ROCKY MOUNTAIN PREP

# Buug-gacmeedka
# Ardayda & Qoysaska

## Waxbarashada Heerkeeda Ugu Sarreeya!
## (Education at its PEAK!)

Sanad Dugsiyeedka
2024-2025

# Liiska Mawduucyada

**Liiska Mawduucyada** 2

Cutubka Koowaad: Dugsiga Rocky Mountain Prep (RMP) 5

Hadafka 5

Bayaanka Sinnaanta ee RMP 5

Taariikhda Dugsiga 5

Himilada 6

Cutubka Labaad: Hogaaminta Dugsiyadeena 6

Kooxaha Dugsigeena 6

Shaqaalaheena Taageerada Shabakadda 6

Cutubka Saddexaad: Filashooyinka iyo Dhaqanka 7

Imaanshaha iyo Kala Dirista 7

Jadwalka Maalinlaha ah iyo Jadwalka Joogtada ah 7

*Ka Xaadirista Dugsiga* 7

*Dugsi U-goynta* 9

*Labbiska Dugsiga* 9

*Isticmaalka Tignoolajiyada Ardayda* 12

*Isticmaalka Iimaylka Ardayga* 13

*Xeerarka Taleefanka Gacanta Ardayga & Waxyaabaha kale ee Elektarooniga ah ee Mashquusliya Ardayga* 14

Dhaqanka Dugsiga 15

*Hiigsiga Dhaqanka Jacaylka iyo Tacliinta Sare* 15

*Character Development and Social Emotional Learning (SEL, Horumarinta Dabeecada iyo Barashada Shucuurta Bulshada)* 15

*Ka Jawaab-celinta Habdhaqanka* 16

Xannibitaanka Ardayga 18

Hubka 19

Rabshadaha 19

Daroogada, Khamriga, iyo Tubaakada 19

Baaritaanka Ardayga 19

Xadgudubyada Basaska 20

Xeerarka Xoogsheegashada iyo Cagajuglaynta interneetka 20
Safe2Tell 20
Hagardaamada 21
Ciwaanka IX (Title IX) 21
Ka Warbixinta Waajibka ah 21
Cutubka Afraad: La shaynta Qoyska 21
Fursadaha Iskaashiga Qoysaska ee RMP 22
Cutubka Shanaad: Tacliinta 24
Hiigsiga Waxbarasho ee RMP 24
Hiigsigeena Waa guul ka gaarida Dugsiga Sare, Waxbarashada Jaamacada, iyo Nolosha guud ahaan 26
Ballanqaadka Qalin-jabinta Ardayda Dhigato RMP 26
Fikradaha Guusha Jaamacadda iyo Shaqada ee RMP 26
Nidaamyada Tacliinta 29
Cutubka Lixaad: Siyaasadaha Dugsiga 31
Campus/Kaambas La Xirey 31
Siyaasadda Booqdaha 32
Xaaladaha Degdega ah ee Ardayda iyo Macluumaadka Xiriirka Qoysaska 32
Habraacyada Xaaladaha Degdega ah 33
Siyaasadda Takoor La'aanta 34
Siyaasadda Cabashada 34
Hababka Xidhiidhka Dugsiga iyo Qoysaska Ardayda 35
Diiwaangelinta 36
Sii Deynta Sawirada iyo Macluumaadka Kale 36
Jadwalka & Xiritaanka Dugsiga 36
Safarrada, Dalxiisyada, iyo Fursadaha Waxbarashada ee Bannaanka Loo Aado 36
Gaadiidka 37
Daawooyinka & Xasaasiyadaha 37
Tallaalida Ardayda 38
Ciyaaraha 38
Jir Caafimaad Leh, Maskax Caafimaad Leh 40

Kharashaadka Dugsiga La Xiriira 40
Buugaagta Akhriska 41
Sanduuqyada 41
Lumay oo La Helay 41
Agabyada Dugsiga 41
Diiwaanada Ardayda iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoysaska iyo Sharciga Qarsoodinimada Xogta 41
Hawlaha Lacag-Ururinta 42
Qaybinta Agabyada ama Dukumentiyada La Daabacay 42
Ganacsiga 43
Qalabyada iyo Hantida leh Xuquuqda Daabacaadda 43
Cutubka 7-aad: Borotokoolada Caafimaadka iyo Badbaadada 43
Lifaaqa Dugsiga Sare 45
Sharuudaha Qalin-jabinta 48
Shuruudaha Dibloomada 49
Daraasad Madaxbanaan 51
Dhibcooyinka Koorsada 51
Iskiribtiga Wareejinta Iyo Dhibcaha Bundooyinka Dibadda 51
Ardayga Ugu Buundada Sareeya, Ardayga Labaad Ee Ugu Buundada Sareeya iyo Maamuusyada 52
Cutubka 8-aad: Bogagga Saxiixa Qoysaska 53
Oggolaanshaha Isticmaalka Mas'uuliyada Leh ee Tignoolajiyada Si Masuuliyad Leh U Isticmaalka 53
Foomka Oggolaanshaha Sawirka/Warbaahinta 55
Foomka Doorshada Isgaadhsiinta ee U-doodista 56
Heshiiska Rideshare 57
Filashooyinka Xaadirista Fasaalka ee Dugsiga Rocky Mountain Prep 59
Ballanqaadyada Dugsiga-Qoysaska ee Sannad Dugsiyeedka 2024-25 61
Bayaanka Fahamka ee Buug-gacmeedka Ardayda & Qoysaska 63

# Cutubka Koowaad: Dugsiga Rocky Mountain Prep (RMP)

## Hadafka

Si loo dhiiro galiyo arday kasta si ay u gaadhaan awoodooda buuxda iyada oo loo marayo khibrad tacliimeed oo heer sare ah, oo leh dareen iyo isbeddel toogan, iyaga oo loo diyaarinayo inay guul ka gaaran waxbarashada jaamacadda, shaqada, iyo noloshaba guud ahaan.

## Bayaanka Sinnaanta ee RMP

Waxaan nahay Dugsiga Rocky Mountain Prep (RMP), oo waxaan nahay urur ka kooban macalimiin, qoysas, aqoonyahanno, iyo u doodayaal heer sare ah kuwaas oo beddelaya wejiga waxbarashada dadweynaha ee Colorado iyaga oo ka dhigaayo kuwa loo siman yahay ka dhigaaya habka gelitaanka kuleejka iyo u diyaargarowga ee ardayda iyo qoysaska taariikh ahaan la takooro.

Waxaan ognahay in kuleejku uu yahay mid ka mid ah siyaabaha ugu waxtarka badan ee looga hortago xaaladaha faqriga ay ardaydeenna adeegsadan karaan. Waxaan u shaqaynaa si hagar la'aan ah si loo hubiyo in dhinac kasta oo ka mid ah nidaamkeena waxbarasho ay abuurto hab-dhaqan ku habbon waxbarashada kuleejka. Waxaan higsanaynaa inaan noqono nidaamka dugsiga ugu waxqabadka sareeya ee guud ahaan Colorado, waxaana kor u qaadi doona inaan u adeegno ardayda jaaliyado badan kuwaas oo u baahan fursado waxbarasho oo badan ee dugsiyada ah kuwaas oo barnaamijyo tacliin oo adag iyo jawi taageero si loogu diyaariyo ardayda kuleejka iyo guusha mustaqbalka. Maadaama Kala duwanaanshiyaha, Sinnaanta, iyo U-Wada Dhannaanta ay aad muhiim ugu yihiin xaqiijinta himiladeena, iyo maadaama aan istaraatiijiyado u dejino aragtidan, annaga, ka bulsho ahaan, waxa aanu go'aansanay in aanu samayno milicsi iyo tallaabo-qaadis, kuna salayno qiyamkeena PEAK.

## Taariikhda Dugsiga

Rocky Mountain Prep waxaa la aasaasay 2011 iyadoo la aaminsan yahay in dhammaan ardaydu u qalmaan waxbarasho heer sare ah oo u diyaarinaysa guusha kulliyadda iyo nolosha. Tan iyo markii dugsigii ugu horreeyay laga furay koonfurta-bari Denver markay taariikhdu ahayd Agoosto 2012, ilmo kasta oo la diwaangeliyay wuxuu ka mid ahaa fasalka ardayda abuuraysay isla markaana sii waday dhaqanka heerka sareeya ee bulshadeena.

Bishii Luulyo 2023, Rocky Mountain Prep waxay la midooween STRIVE Prep si ay u noqdaan shabkada jaatarka ee bixiya waxbarasho gaar ah ee fasalada ECE-12aad ah ee ku yaala Denver iyo Aurora. RMP hadda waxay leedahay 12 dugsi oo ku yaal guud ahaan magaalada Denver gudaheeda, oo ay ka mid yihiin shan dugsi hoose, shan dugsi dhexe iyo laba dugsi sare.

## Qiyamka PEAK

Waxay bulshada RMP ka buuxa shaqaale, arday, iyo daneeyayaal kuwaas oo ay dhiiri galiyaan mabda’eena guusha iyo jacaylka, kuwaa oo maalin kasta ay hagaan qiyamkayaga PEAK, oo si qoto dheer u aaminsan awooda iyo kartida arday kasta oo aanu u adeegno. Qiyamkeena PEAK waxay dejiyaan qaabka dhaqanka dugsigeena waxayna ku lifaaqan yihiin dhamaan is-dhexgalladeena:

| | |
|---|---|
| **Adkaysiga** | Ardaydu waxay si adag uga gudbaan caqabadaha |
| **Khibradda** | Waxaan si heer sare ah u wajahnaa wax walba. |
| **Tacaburka** | Ardaydu waxay leeyihiin kalsooni ay ku sahamiyaan, isku dayaan fikrado cusub, ayna ku qaataan go'aano qatar ah. |
| **Naxariista** | Waxaan nafteena iyo kuwa dadka kaleba ula dhaqannaa hab jacayl iyo ixtiraam ku salaysan. |

### Himilada

*Waxaan ognahay in awooddu ay meel walba ku jirto, laakiin fursaddu sidaas ma ahan.* Anagoo abuurayno jawi ku salaysan jacayl iyo ixtiraam, aaminaadda aan kala go'a lahayn ee aan ku qabno carruurta oo dhan, iyo u heellanaanta heerka sare ah ee tacliinta, waxaan ku dadaaleynaa inaan abuurno mustaqbal uu arday kastaa ku gaarayo guul oo laga aqbalo kulliyad ama jaamacad waxbarasho afar sano ah.

Marka la joogo Dugsiga Rocky Mountain Prep, ardayda, qoysaska iyo macallimiinta waxaa ay si isku mid ah looga filanayaa rajo iyo filashooyin heer sare ah.
Ardeydu waxay helayaan taageero shakhsiyeed, waxay ka qaybqaadanayaan maalin dugsiyeed dheer iyo sanad dugsiyeedka la dheereeyey, waxay kobcinayaan jacaylka ay u qabaan waxbarashada, waxayna ku noolaanayaan awoodooda shakhsi ahaaneed ee PEAK. Arday kastaa waxa uu maraa habka manhajka u diyaarinta kuleejka, waxaananu baraynaa manhajka ugu adag, oo inta badan ugu xiiso badan. Ardaydeenu waa ay yaqaaniin hadafkooda, waa ayna ku faraxsan yihiin, oo si joogto ah ayay ula socdaan horumarkooda. Diiwaangelinta ilmahaaga si uu u dhigto dugsiga RMP ayaa macnaheeedu tahay in uu imahagaa gaari doono heer jaamacad.

# Cutubka Labaad: Hogaaminta Dugsiyadeena

### Kooxaha Dugsigeena

Waxaad wax badan oo ku saabsan kooxaha dugsigeena ka baran kartaa websaydkeena, rmp.org. Dugsi walba waxaa hogaaminaya maamule iyo koox maamul ah oo ah Kaaliyaha Maamulaha Waxbarashada. Dugsiga Rocky Mountain Prep, waxaa naga go'an inaan waxbarashada ugu wanaagsan siino ardaydeena oo u si wanaagsan ugu diyaarino waxbarasha kuleejka iyo jaamacadda. Si loo xaqiijiyo hadafkan, waxaanu shaqaaleysiinay macalimiintii ugu fiicnayd, arday wax barta, iyo shaqaale ka kala yimid dalka oo dhan si ay u noqdaan koox xaqiijinaysa in dhammaan ardayda ka soo gasha albaabadeena ay u noqdaan kuwo laga aqbalo waxbarasho kuleej ama jaamacad 4-sano ah.

### Shaqaalaheena Taageerada Shabakadda

Shabakaddeena waxaa hogaaminaya Tricia Noyola, Madaxa Fulinta ee Rocky Mountain Prep. Ka hor intaysan bilaabin inay ka shaqeyso RMP, Tricia waxay ahayd Agaasimaha Fulinta ee IDEA-Austin, iyadoo soo hogaamisay kobaca gobolka ee 4-ta oo noqday ilaa 16 dugsiyo oo leh natiijooyin waxbarasho oo xooggan. Waxaad wax badan ka ogaan kartaa kooxdayada hogaaminta adigoo booqanaya websaydkeena, rmp.org. Shaqaalaha Taageerada Shabakada waxa ay ka kooban yihiin kooxyo badan

oo kala duwan kuwaas oo wada shaqeeya si ay u xaqiijiyaan guul-gaarista dugsiyadeena iyagoo bixinaya tababaro xirfadeed oo joogto ah, tababarida hogaaminta, iyo abuurista khayraadka.

# Cutubka Saddexaad: Filashooyinka iyo Dhaqanka

## Imaanshaha iyo Kala Dirista

RMP waxay u shaqeysaa si dadaal leh si loo xaqiijiyo in imaatinka dugsiga iyo ka galbashada dugsiga ay u noqdaan kuwo badbaado u leh ardayda iyo qoysaska iyo inay yihiin kuwo waxtar u leh qof walba oo ku lug leh hadba intii suurtagal ah. U fiirsashada siyaasadaha iyo nidaamyada ka jira khadka baabuurka, khadka socodka, iyo basaska ayaa muhiim u ah badbaadada ardayda. Ku xad-gudbida siyaasadaha waxa laga yaabaa inay ka dhaliso shir qasab ah oo lala yeesho waalidka/masuulka ardayga iyo qabanqaabooyin kale oo ay go'aamiyaan hoggaanka dugsiga.

## Jadwalka Maalinlaha ah iyo Jadwalka Joogtada ah

*Ka Xaadirista Dugsiga*

Waxaan han iyi rajo weyn ku qabnaa qoysaskeena anagoo kula xisaabtameyno inay ilmahooda keenaan dugsiga maalin kasta iyo wakhtigii loogu talagalay. Imaatinka joogtada ah ayaa fure u ah guusha waxayna ku taageeri doontaa ilmahaaga wadadii ay ku gaari lahaayeen heer jaamacad. **Dugsiga Rocky Mountain Prep, ardaydu waa inaanay dugsiga ka maqnaan wax ka badan 4 maalmood oo waxbarashada dugsiga ah (cudurdaar la'aan ama sabab la'aan) guud ahaan muddada sannad dugsiyeedka oo dhan. Fadlan xaqiijin in ilmahaagu soo xaadiro maalin kasta marka laga reebo haddii ay jirto xaalad jirro oo halis ah ama xaalado aad u daran. Waa mas'uuliyadda qoyska in la ogeysiiyo dugsiga sababta ardayga uu dugsiga uga maqan yahay iyadoo la raacayo habraaca uu dejiyey dugsiga.** Waxaan si dhab ah ula tacaalnaa dugsi ka maqnaanshaha, soo daahitaanka, iyo in ardayga dugsiga laga kaxeeyo wakhti hore, maadaama ay wax u dhimi karaan guusha tacliinta ardaygaaga. Cawaaqibta ugu weyn ee tooska ah ee ka dhalan karta ka maqnaanshaha dugsiga waxay ku aadan tahay tacliinta ardaygaaga, maadaama dugsiga Rocky Mountain Prep uu leeyahay jawi waxbarasho oo adag oo degdeg ah.

Haddii ardaygu leeyahay in ka badan 10 maqnaansho oo cudurdaar la'aan ah, waxay halis ugu jiri doonaan inay ka baaqdaan hawlaha RMP, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, safarrada dibadda ee waxbarashada ah, bandhigyada qoob ka ciyaarka, maalinta howlaha garoonka ee kala duwan, iyo dabaaldegyada kale. Qoraal uu soo qoro dhakhtar ayaa laga yaabaa in loo baahdo haddii dugsi ka maqnaanshaha ay tahay mid cudurdaar leh. Intaa waxa dheer, dugsiga waxaa uu dacwad ka gudbin karaa dugsi u gembinta ee ardayda dugsiga ka maqnaata in ka badan 30 maqnaansho oo aan cudurdaar lahayn inta lagu jiro sannad dugsiyeedka.

| | |
|---|---|
| **Dugsiga Ka Maqnaanshaha Dheeraadka ah** | Dugsi ka soo xaadirista joogtada ah waxay fure u tahay guusha, qoysaskana waxaa laga filayaa inay xaqiijiyaan in carruurtooda ay dugsiga imaadaan maalin kasta. Dugsi ka maqnaanshaha wakhtiga dheer ah waa in laga fogaado mar kasta oo ay suurtagal tahay. **Dhammaan safarrada dalxiisyada waa in la qorsheystaa inta lagu jiro fasaxyada dugsiga RMP iyo inta lagu jiro xagaaga.** Qoysasku waa inay dugsiga ku wargeliyaan wixii dugsi ka maqnaansho ah oo wakhti dheer qaadanaya |

| | |
|---|---|
| | sida dalxiis aadis, booqashada xubnaha qoyska ee dibadda jira, ama sababo kale dartood. Waxaa laga yaabaa inuu jiro kulan dabagal ah oo loo baahan yahay in lala yeesho saraakiisha dugsiga si ay dib ugu eegaan shaqada muraajicinta casharadii la seegay ah.<br><br>Haddii dugsi ka maqnaanshiyaha ay yihiin kuwo laga cudurdaartay ama aan laga cudurdaaran waxa la go'aamin doonaa iyadoo lagu salaynayo sababta dugsi ka maqnaanshaha iyadoo la raacayo siyaasadda ka soo xaadirista dugsiga ee RMP (tusaale ahaan jirro caafimaad oo dheeraatay, dhawrid diineed, ama fasax tacsiyo). Dugsi ka maqnaanshaha dheeraadka ah lagama cudurdaaran karo iyadoo la isticmaalayo sababo kale. |
| **Dugsi ka soo daahitaanka** | Dugsi ka soo daahitaanka joogtada ahi waxaa ay hor istaagi karaa guul-ka-gaarista dugsiga maadaama waxbarashada ay bilaabato isla marka ardaydu soo galaan dhismaha. Ardayga wuu soo daahay haddi uu yimaado kadib wakhtiga bilaabashada dugsiga. Si la mid ah dugsi ka maqnaanshaha, waxaanu dugsi ka soo daahitaanka ula macaamilnaa si dhab ah. Dugsi ka soo daahitaannada looga cudurdaarto warqad uu soo qorey dhakhtarka, cibaadada diimeed iyo dhimashada xubin ka mid ah qoyska; dhammaan dugsi ka soo daahitaannada kale cudurdaar ma lahan.<br><br>Dugsiyada Hoose/Dhexe: Marka ardaygaaga uu dugsiga ka soo daaho, waa inaad ardaygaaga soo galisaa xafiiska hore oo aad u saxeexdaa.<br><br>**Dugsiyada Sare:** Ardayda dugsiga sare ayaga kaligood ayaa imaan kara haddii ay daahsan yihiin. Fadlan oggow in daahitaanno badan ay la mid yihiin maqnaansho |
| **Wakhti hore ka tagitaanka dugsiga** | Waa lagama maarmaan in ardaydu ku sugnaadaan dugsiga inta lagu jiro maalinta dugsiga oo dhan si ay u helaan aqoonta, xirfadaha, iyo kalsoonida ay u baahan yihiin si ay u buuxiyaan heerarka tacliimeed ee adag ee lagu dejiyay Rocky Mountain Prep. Sababtaas awgeed, in ardayda laga kaxeeyo dugsiga wakhti hore waa in laga fogaado mar kasta oo ay suurtagal tahay. Qoysasku waa inay sameeyaan dadaal kasta si ay si fiican u jadwalaystaan ballamaha dugsiga kadib ah, maalmaha dhamaadka usbuuca, ama maalmaha uu dugsigu xiran yahay. Xafiiska caawinta ayaa la xiri doonaa nus saac kahor inta aan ardayda la fasixin si loogu diyaar garoobo bixitaanka ardayda. Sababo la xiriira badbaadada, dugsi ka kaxaynta wakhti hore ah kadib wakhtigaas lama ogola marka laga reebo marka ay jiraan xaalado degdegga ah.<br><br>Waxay shuruucda dugsiga Rocky Mountain Prep u baahan tahay haddi wakhti kasta ardaygu goor hore baxayo, waa in uu soo qaadaa qof weyn oo idman oo ka diiwaangashan nidaamka Infinite Campus. Ardayda ***looma*** oggolaan doono inay iska baxaan xaalad kasta ha ahaatee ama la siiyo fasax ay ku aadan guriga goor hore maalintaas iyagoo wicitaan taleefon ku codsanaayo sidaas. |

| | |
|---|---|
| **Ballamaha Caafimaad** | Fadlan sameey isku day kasta si aad ballamaha caafimaadka joogtada ah uga dhigato wakhtiyo ka baxsan saacadaha caadiga ah ee dugsiga. Haddii ardaygu u tago dhakhtar, fadlan hore u soo qaad warqad uu soo qorey dhakhtar si dugsi ka maqnaanshaha loogu sababeeyo maqnaansho caafimaad. Ardayda lagama oggolaan doono cudurdaar ah inay ballamo caafimaad la aadeen xubnaha kale ee qoyska. |

## *Dugsi U-goynta*

Dugsi ka soo xaadirista waxaa waajibiyey sharciga gobolka ee loogu talagalay ardayda ilaa 17 jirka ah. Hadafka laga leeyahay sharciga iyo siyaasadda dugsi ka soo xaadirita iyo dugsi u-gembinta waa in la taageero ardayga iyo qoyska lana yareeyo caqabadaha hortaagan ka soo xaadirista dugsiga.
Dugsi u-gembinta waxaa loola jeedaa in afar ama in ka badan oo jeer laga maqnaado dugsiga cudurdaar la'aan ah bil kasta ama 30 maqnaansho sannad dugsiyeed kasta. Haddii ardaygu maqnaado 30 jeer ama in ka badan sannadkii, waxaa loo aqoonsanayaa ardayga dugsi u-gembis ah waxaana loo tixgelin doonaa in lagu siiyo haayo isla fasalka hadda u dhigto. Haddii ardaygu leeyahay 30 maqnaansho oo cudurdaar la'aan ah, dugsigu wuxuu Kiiska Dugsi ka Xaadirista u gudbin karaa Maxkamadda Carruurta. Dugsigu wuxuu warbixin sanadle ah u gudbin doonaa Waaxda Waxbarashada ee Colorado (CDE) warbixintaas oo lagu sheegi doono tirada gembisyada dugsiga.

Ka hor intaan la samayn gudbinta dugsi u-gembinta, dugsigu wuxuu waalidka/masuulka ku ogeysiin doonaa dugsi ka maqnaanshaha aan cudur daarka lahayn wuxuuna codsan doonaa kulan lala yeesho waalidka/masuulka ardayga si loogala hadlo dugsi ka maqnaanshaha loona sameeyo qorshaha dugsi ka xaadirista. Gudbinta kiiska dugsi u-gembinta ayaa laga yaabaa in la tixgeliyo haddii tallaabooyinka uu qaaday dugsigu loogu guulaysan waayo in si wayn loo dhimo dugsi ka maqnaanshaha ardayga isla markaana faragelinta iyo kormeerka maxkamadeed loo arko inay lagama maarmaan u yihiin gacan ka gaysashada in dugsiga yareeyo tirada dugsi ka maqnaanshaha ee ardayga.

Haddii aad aaminsan tahay in ilmahaagu u baahan yahay qorshaha dugsi ka xaadirista ama aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka dugsi u-gembinta, fadlan la xiriir maamulaha dugsiga ardaygaaga.

## *Dugsi Ka-dhuumashada*

Dugsi ka-dhumashada waxaa loola jeeda marka ardaygu ka baxo dugsiga, isagoon la fasaxin, inta lagu jiro maalinta caadiga ah ee waxbarashada dugsiga. Ka hor dhuumashada ardayga, shaqaalaha RMP waxay qaadi doonaan tallaabo kasta si ay uga hortagaan dhuumashada ardayga. Haddi ay dhacdo in ardaygu ka dhuunto dugsiga, shaqaalaha RMP ayaa ardayda la joogi doonaa mar walba (Ardayda fasalka ECE-5) ama la joogi doona ardayda ilaa ay ka baxayaan xaruunta dugsiga (fasalka 6-12aad). Shaqaalaha RMP ayaa wici doonaan oo ku wargelin doonaan waalidka/masuulka ardayga iyo khadka booliiska ee ku haboon ee aan xaaladaha aan degdega ahayn. Ardayda ka dhuuntay dugsiga ma awoodi doonaan inay ku soo laabtaan fasalka iyada aysan la socon waalidka/masuulka. Waxaa ardayda wax ka badan hal mar ka dhuntay dugsiga lagu edbin karaa iyadoo la raacayo siyaasadaha shuruucda RMP.

## *Labbiska Dugsiga*

Dhammaan ardaydu waa inay xirtaan direyska/labbiska dugsiga Rocky Mountain Prep ee maalin kasta iyo inta lagu jiro dhammaan safarrada bannaanka loo aado.

| **KAMBASKA** | **MIDABKA LABBISKA** |
|---|---|
| **Berkeley** | ECE - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Waxbarashada xannaanada caruurta-faslka 5aad - Funaanada Buluuga Khafiifka ah ee Polo AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Creekside** | ECE - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Waxbarashada xannaanada caruurta-faslka 5aad - Funaanada Buluuga Khafiifka ah ee Polo AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Southwest** | ECE - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Waxbarashada xannaanada caruurta-faslka 5aad - Funaanada Buluuga Khafiifka ah ee Polo AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Ruby Hill** | ECE - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Waxbarashada xannaanada caruurta-faslka 5aad - Funaanada Buluuga Khafiifka ah ee Polo AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Fletcher** | ECE - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Waxbarashada xannaanada caruurta-faslka 5aad - Funaanada Buluuga Khafiifka ah ee Polo AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Westwood** | Fasalka 6aad - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 7aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 8aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Sunnyside** | Fasalka 6aad - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 7aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 8aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |

| | |
|---|---|
| **Green Valley Ranch** | Fasalka 6aad - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 7aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 8aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Noel** | Fasalka 6aad - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 7aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 8aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **Federal** | Fasalka 6aad - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 7aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 8aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **RISE** | DHAMMAAN FASALADA - Funaanada Polo oo Midabka Maroon ah ah AMA Funaanadda Maroon ah oo loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |
| **SMART** | Fasalka 9aad - Funaanada Polo oo Midabka Cawl ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 10aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 11aad - Funaanada Polo oo Midabka Buluug Khafiif ah AMA Funaanadda Buluug Kafiif ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt<br>Fasalka 12aad - Funaanada Polo oo Midabka Madowga ah AMA Funaanadda Midabka Madowga ah ee loo yaqaan Crewneck Sweatshirt |

Fadlan dib u eeg macluumaadka gaarka ee faahfaahnsan oo dugsiga ah si aad u aragto dulmar ku saabsan labbiska iyo macluumaadka ku saabsan sida loo iibsado labbiska. Ardaydu waa inay sidoo kale raacaan xeerka lebbiska ee kaambaska. Labiska dugsiga waa muhiim dhowr sababood awgood:

- **Badbaadada:** Labiska dugsiga wuxuu noo oggolaadaa inaan si degdeg ah u aqoonsanno ardayda dugsiga Rocky Mountain Prep.
- **Bulshada:** Labiska dugsiga wuxuu nagu mideeyaa hadafkeena ah inaan u diyaargarowno guusha kuleejka wuxuuna na xusuusinayaa in kooxdeena ay ka muhiimsan tahay summada ama loogada.
- **Heer sareeya:** Labiska dugsiga wuxuu inugu mideynayaa aaminsanaanta ah in aanu si dhab ah u qaadano shaqadeena ka arday ahaan.

Maalmaha qaar waxa laga yaabaa in dugsigu u asteeyo maalmo aan loo baahnayn labiska dugsiga "qofba dharkuu doono iska soo xiran karo". Go'aamadaas waxaa si hormaris ah u gaari doona maamulaha. Waxaa ardayda weli looga baahan doonaa inay u hoggaansamaan xeerka labbiska, oo ay ku jiraan dharka ku habboon maalinta waxbarashada dugsiga.

**Dhammaan ardayda soo xaadirta maalinta dugsiga iyagoon wadan labbiska dugsiga waxay heli karaan labbis amaah ah maalintaas.** Haddii shuruudda labbiska ay tahay dhibaato dhaqaale, fadlan la xiriir xafiiska taageerada.

**Bedelaadda Dharka**

Dhammaan qoysaska arday u dhigata dugsiga xannaanada carruurta (ECE) iyo dugsiga barbaarinta waa inay hal dhar oo bedelaad ah u soo dhiibaan ardaygooda maalinta ugu horreysa ee dugsiga si loogu hayo fasalka loona isticmaalo haddii ay dhacdo xaalado shil ah. Dharka bedelaadda waxa ka mid ah nigis, surwaal, funnaand polo ah hal midab ah, iyo sharabaadyo. Haddi aan loo soo dhiibin dhar bedelaad ah, qoysaska waa la wici doonaa haddii shil dhaco si ay dugsiga ula yimaadaan dhar nadiif ah oo ardaygooda uu iskaga bedelo.

## *Isticmaalka Tignoolajiyada Ardayda*

Dugsiga Rocky Mountain Prep wuxuu aaminsan yahay in dhammaan ardaydu ay tahay inay helaan tignoolajiyad marka ay u dhaqmaan si xilkasnimo, hufnaan, edeb leh, iyo hab sharci ah. Hadafka ka dambeeya bixinta adeegyadan waa inaan kor u qaadno horumarka waxbarasho ee ardaydeena. Dhammaan isticmaalka internetka ee dugsiga waa la filtareeyaa waana la kormeeraa, mana jirto ilaalinta qarsoodinimada isgaarsiinta marka la isticmaalayo aaladahan. Isticmaalka tignoolajiyada ee la aqbali karo waxaa loogu talagalay waxqabadyada taageera waxbaridda iyo waxbarashada.

Ka hor inta aysan isticmaalin tignoolajiyada RMP, dhammaan ardaydu waa inay saxiixaan oo ay soo celiyaan Siyaasadda Isticmaalka La Aqbali Karo ee Tignoolajiyadda Ardayda. Intaa waxaa dheer, ardaydu waxay heli doonaan tababar loo yaqaan "Muwaadinimada Dijitalka ah" si ay uga taageeraan adeegsiga tignoolajiyada ee habka ku habboon. Isticmaalka tignoolajiyada dugsiga RMP ama adeegyada intarneetka lama ogola ilaa ardayda iyo waalidka/masuulka saxiixaan heshiiska mooyaanee. Dhammaan sharciyada dugsiga RMP iyo siyaasadaha waxay dabaqaan isticmaalka aaladaha iyo internetka ee dugsigu bixiyo, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, xeerarka cabsi gelinta ee RMP, takoorida iyo dhibaataynta, iyo xeerarka anshaxa. Ku xadgudubka xeerkani waxay keeni kartaa in ardaydu lumiyaan mudnaanta oggolaanshaha isticmaalka tignoolajiyada oo qoysaska ayaa mas'uul ka noqon doonaan bixinta kharashaadka beddelka tignoolajiyada RMP ee ay ardaydu si ula kac ah u waxyeeleeyaan.

**Laptop-yada Chromebooks iyo Kharashka Tignoolajiyada**

<u>Dugsiyada Hoose:</u> Arday kasta oo ku jira xannaanada carruurta ilaa fasalka shanaad waxaa la siin doonaa laptopka Chromebook si uu u isticmaalo inta lagu jiro maalinta dugsiga. Chromebook-gan waxa uu noqon doonaa mid ay iyaga daryeelaan inta lagu jiro saacadaha dugsiga. Chromebook-yada waxay yaali doonaan dugsiga oo sinnaba looma gayn karo guriga. Haddii ardaygu uu waxyeello u geysto Chromebook-ga taas oo ka baxsan waxyeellada maalinlaha ah ee caadiga ah, RMP waxa laga yaabaa inay qiimeeyaan waxyeelada maaliyadeed isla markaana ku soo dalacaan qoyska, qiimahaas oo u

dhigma kharashka dayactirka Chromebook-ga ilaa qiimaha beddelka buuxa ee Chromebook-ga oo aan ka badnayn $200.

<u>Dugsiyada Dhexe iyo Sare:</u> Arday kasta oo dhigta dugsiga dhexe ilaa dugsiga sare waxaa la siin doonaa Chromebook. Sida waafaqsan siyaasadda dugsi kasta, ardayda dugsiga dhexe iyo sare waxay mas'uul ka noqon karaan isticmaalka Chromebook-gooda inta ay la joogaan guriga si ay u dhamaystiraan shaqada dugsiga looga dhiibey. Si loo xaqiijiyo in kombayuutarrada ay diyaar u yihiin ardayda, RMP waxa ay ururisaa $25 khidmad sanadeed ah, iyada oo khidmada ugu badan ee uu qoyska bixin karo ay tahay $50 qoyskiiba, xitaa haddii in ka badan laba carruur ah uga diiwaangashan tahay dugsi sare oo RMP ah. Kharashkan waxaa ku jira caymiska hal dayactir oo sannad dugsiyeedkiiba mar ah. Hal dayactir kadib, qoyska ayaa mas'uul ka ah dhammaan kharashyada dayactirka ee xiga. Kharashka Tiknoolajiyada waxaa la bixiyaa bilowga sannad dugsiyeedka maalinta diiwaangelinta, ama kahor maalinta koowaad ee ardayga haddii ardayga uu sanadka dhexdiisa is-diiwaangeliyo. Kharashka waxaa lagu bixin karaa lacag caddaan ah, jeeg, ama kaarka deynta/kiridhitka. Haddii aadan awoodin inaad bixiso khidmadaha teknoolojiyadda ama aad qabto su'aalo dheeraad ah, fadlan la xiriir Xafiiska Weyn ee dugsiga ilmahaaga. Waxaan ku waydiisanaynaa taageeradaada ah inaad bixiso khidmadaha tignoolajiyadda ee ilmahaaga si aan u siino ilmahaaga dhammaan faa'iidooyinka jawi waxbarasho oo xooggan.

## *Isticmaalka Iimaylka Ardayga*

Siyaasadda iimaylka ayaa maamusha isticmaalka akoonada iimaylka ee ardayda dugsiga Rocky Mountain Prep. Waxay qeexaysaa hab-raacyada iyo xaddidaadaha lagu xaqiijinayo isticmaalka habboon ee mas'uuliyadda leh ee adeegyada iimaylka ee loogu talagalay ardaydeena. Ardaydu waa in aanay filan in la ilaaliyo qarsoodinimada xogta marka ay isticmaalayaan iimaylkooda dugsiga. Fadlan si taxadar leh u akhri siyaasaddan, maadaama ay qeexayso waxyaabaha laga filayo isticmaalka iimaylka waxayna qeexaysaa cawaaqiibta ka dhalan karta ku xadgudubka siyaasadda.

**Xaddidaadda Akoonka Iimaylka ee ardayda K-12:**

a. **Ardayda ku jirta fasalada K(Xannaanada Carruurta) ilaa fasalka 8aad** ma awoodi doonaan inay iimayl u diraan ama ka helaan isticmaalayaasha dibadda ah. Akoonadooda iimaylka waxa ay ku koobnaan doonaan isgaarsiinta gudaha dugsiga Rocky Mountain Prep ah.
b. **Ardayda ku jirta fasalada 9aad ilaa fasalka 12aad** waxay marin u heli karaan inay iimaylo u diraan ama ka helaan isticmaalayaasha dibadda ah. Fadlan xasuusnoow, waa lala socdaa ciwaanka iimaylka ee RMP.

**Si Masuuliyad Leh u Isticmaalka Iimaylka:**

a. Ardayda waxaa laga filayaa inay u isticmaalaan akoonadooda iimaylka si mas'uuliyad iyo anshax leh, iyagoo u hogaansamaya xeerka anshaxa ee dugsiga Rocky Mountain Prep iyo siyaasadaha tacliimeed ee shabakada jaatarka.
b. Xiriirada iimaylka waa in loo adeegsadaa ujeeddooyin waxbarasho, oo ay ku jiraan is dhexgal lala sameeyo macalimiinta, maamulayaasha dugsiga, iyo ardayda kale, waxyaabaha khuseeya waxqabadyada tacliimeed, shaqooyinka dugsiga, iyo hawlaha manhajka ka baxsan.

**Kormeerka iyo Digniin ka Bixinta:**

a. Dhammaan akoonnada iimaylka ee ardayda dugsiga sare (fasalada 9-12) waxaa laga kormeeri doonaa isticmaalka habboon.

b. Waxaa dugsiga Rocky Mountain Prep ay xaq u leedahay in ay hawlgeliso nidaamyo otomaatig ah oo lagu kormeerayo iimaylada ka kooban waxyaabo aan habboonayn, weerar ah, ama waxyeelo leh.
c. Iimaylada la calaamadeeyo waxaa eegi doona shaqaalaha dugsiga ee loo qoondeeyay, sida Kooxaha Dhaqanka Dugsiga, si loo sii baaro loona qaado tallaabooyin dabagal ah oo ku haboon.

**Cawaaqibta Ka Dhalan Karta Ku Xad-Gudubyada Siyaasadda:**

a. Ku xadgudubyada siyaasadda iimaylka, oo ay ku jiraan dirida ama helitaanka waxyaabaha aan habboonayn, waxaa lagu qaadi doonaa tallaabo anshaxeed sida waafaqsan xeerka anshaxa ee Rocky Mountain Prep.
b. Tallaabooyinka anshax-marinta waxa ka mid noqon kara laakiin aan ku xaddidnayn digniin-siin, xannibaadyo saaris, ka joojinta ku meelgaarka ah ama joogtada ah ee mudnaanta iimaylka, iyo ku wargelinta waalidka ama mas'uuliyiinta ardayga.

**Qarsoodinimada iyo Qarsoonaanta Xogta Shakhsiyeed:**

a. Ardayda waxa la xasuusinayaa in iimaylka aanu ahayn qaab isgaarsiineed oo sugan. In kasta oo uu dugsiga Rocky Mountain Prep qaadi doono tillaabooyin macquul ah si loo ilaaliyo qarsoodinimada xogta iyo amniga akoonada iimaylka, ardaydu waa inay iska ilaaliyaan dirista macluumaadka xasaasiga ama qarsoodiga ah iyagoo isticmaalaya iimaylka.
b. Ardaydu waa inay taxaddaraan marka ay wadaagaan macluumaadka shakhsiyeed ama ay galayaan khadka. Waa inay wixii iimaylo ah oo shaki leh ama aan habboonayn uga soo warbixiyaan macallinka, maamulka dugsiga, ama shaqaalaha IT-ga.

Iyadoo la isticmaalayo nidaamka iimaylada ee Rocky Mountain Prep, ardayda iyo waalidiintooda ama mas'uuliyiinta sharciga ah waxay qirayaan inay fahameen oo ay oggol yihiin inay u hogaansamaan siyaasadan iimaylka. Ku guuldareysiga in loo hogaansamo siyaasaddaas waxay keeni kartaa in ardayga lagala noqdo mudnaanta iimaylka, iyo in la qaado tallaabooyin anshaxeed hadba sida ay maamulka dugsigu u arkaan in ay haboon tahay.

Siyaasaddan waxaa lagu samaynayaa dib u eegis xilliyeed waxaana la cusboonaysiin karaa ama wax laga beddeli karaa wakhti kasta si loo waafajiyo isbeddelada tignoolajiyada, dhaqamada ugu wanaagsan, ama shuruudaha sharciga. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah oo ku saabsan siyaasadda iimaylada, fadlan la xiriir maamulka dugsiga ama waaxda IT-ga si aad u hesho caawimaad dheeraad ah. Waad ku mahadsan tahay u hogaansanaantaada ku dhaqanka siyaasaddan iyo kor u qaadista isticmaalka mas'uuliyadda iyo ixtiraamka leh ee iimaylka dugsiga Rocky Mountain Prep.

## *Xeerarka Taleefanka Gacanta Ardayga & Waxyaabaha kale ee Elektarooniga ah ee Mashquusliya Ardayga*

Mudnaanta samaynta Xeerarka Taleefanka Gacanta Ardayga & Waxyaabaha kale ee Elektarooniga ah ee Mashquusliya Ardayg ee RMP waxaa labadaba loogu talagalay si loo hubiyo in qoysasku ay si badqab leh ula xiriiri karaan ardaydooda, iyo sidoo kale in la yareeyo carqaladaha ka jira fasaladayada iyo inta lagu jiro hawlaha dugsigu wado. Waxaan fahansanahay in qoysaska qaar ay rabaan in ardaydooda ay helaan taleefannada gacanta sababo la xiriira baqabkooda/isgaarsiineed awgeed. Si kastaba ha ahaatee, siyaasada RMP ayaa ah in isticmaalka taleefanka gacanta aan la ogolayn inta lagu

jiro maalinta dugsiga. Tani macnaheedu waxa waaye in taleefoonnada gacanta ardayda aanan lagu arkin ama lagu maqlin gudaha kambaska iyo/ama munaasabadaha RMP iyo safarrada banaanka ah sababtoo ah waxay carqaladeynayaan waxbarashada.

Waxaa ardayda looga baahan doonaa inay damiyaan teleefankooda gacanta iyo waxyaabaha kale ee elegtarooniga ah ee mashquuliya, oo ay ku jiraan headphones-ka, oo ay kaga tagaan boorsadooda ama sanduuqa ee bilawga maalin kasta. Haddii ardaygu ku guuldareysto inuu damiyo oo uu meel fiican dhigo waxyaabaha elektaroonigga, xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa la ka qaadi doona taleefanka gacanta iyo xafiiska hore ee maamulka ayaa ilaalin doona oo kaydin doona qalabka. Maamulaha dugsigu ayaa la xidhiidhi doona waalidka/masuulka ardayga si ay u qaadan qalabka ama shayga. Waxaa ardaygu uu sidoo kale la kulmi doonaa cawaaqiib ku habboon maadaama uu qalabka elektarooniga ah uu ku soo bixiya/ku isticmaalay gudaha kaambaska ama inta lagu jiro munaasabad dugsi ama safarka bannaanka loo aado ee dugsiga. Hadba marka loo baahdo, iyo xaaladaha degdega ah, ardaydu waxay isticmaali doonaan taleefanka dugsiga si ay ula xiriiraan waalidkood/mas'uulkooda. Haddii ardaygu u baahan yahay inuu la xiriiro waalidka/masuulka, ardaygu waxa laga filayaa inuu shaqaalaha ka codsado fasax ah inuu isticmaalo taleefanka dugsiga.

Haddii taleefoonka gacanta ee ardayga, ama shay kale oo uu kala yimid guriga, oo ay ku jiraan taablet iyo alaabta carruurtu ku ciyaarto, la xado, la waxyeelleeyo, ama ay lumaan, dugsiga Rocky Mountain Prep mas'uul kama aha mana dammaanad qaadi karo helitaanka alaabtaas. Ardayda iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa qaadaya dhammaan mas'uuliyadda taleefannada gacanta ee uu ardaygu dugsiga keeno. Fadlan tixgeli inaad dhammaan aaladaha tignoolajiyada looga soo tago guriga.

# Dhaqanka Dugsiga

## *Hiigsiga Dhaqanka Jacaylka iyo Tacliinta Sare*

Annagu ma nihin nidaam dugsi - waxaan nahay urur. Hadafka ururukeena waa in aan dimuqraaddiyno gelitaanka kuleejka oo ka dhigno mid la heli garo oo loo simmanyahay ee carruurta iyo bulshooyinka badanaa loo haybsooco ee ku aadan helitaanka waxbarashada kuleejka ee tayada sare leh. Dhaqanka dugsigu ma aha kaliya fikrad. Balse dhaqanku waa sida hawada oo kale. Waxay buuxisaa meel kasta oo waay ay nagu hareersantahay waxayna kor u qaadaa nolosheenna. Anaga oo adeegsanayna mabda'eena tacliinta iyo jacaylka, waxaanu maalin kasta bixinaa khibrad heer caalami ah oo dhinac walbo oo nolosha ah. Qof kasta oo dhigat dugsiyadeena waxa laga filayaa inuu u dadaalo sidii aanu u gaari lahayn qiyamka PEAK ee aanu wadaagno oo aanu horumar heer sare ka gaarno wax kasta oo aanu samayno.

## *Character Development and Social Emotional Learning (SEL, Horumarinta Dabeecada iyo Barashada Shucuurta Bulshada)*

Dugsiga Rocky Mountain Prep waxaan kobcinaa dhaqan adkaansho iyo farxad isugu jira halkaas oo ay ardaydu ugu noolanayaan heerkooda PEAK:

- Adkaysiga: Ardaydu waxay si adag ugu shaqeeyaan caqabadaha
- Heer sareeya: Ardaydu waxay ku dadaalaan wax kasta oo ay sameeynayaan
- Dalxiis: Ardaydu waxay leeyihiin kalsooni ay ku sahamiyaan, isku dayaan fikrado cusub, ayna ku qaataan farsado halis ah
- Naxriis: Ardaydu waxay dhexdooda iyo dadka kaleba ula dhaqmaan si kalgacayl iyo ixtiraam leh

Si aan arrintaan u taageerno, waxaanu si firfircoon oo hordhac ah u barnaa uguna tababarnaa carruurta horumarinta xirfadaha shucuurta-bulsheed si la mid ah sida aan ugu dadaalno xirfadaha waxbarasho. Waxaan wakhti ku bixinaa abuuritaanka qaab-dhismeedyo, caadooyin, iyo hab-raacyo taageera horumarka shucuurta-bulsheed. Waxaan shucuurta iyo iskahorimaadka bulsheed u aqoonsannahay inay yihiin fursad kobcineed waxaana ardayda kala hadalnaa khibradahan. Mararka qaarkood, inta ay ardaydu baranayaan xirfado, waxay u baahan yihiin taageero dheeraad ah. Marka ay xaaladdu sidaas noqoto, waxaanu la shaqaynaa qoysaska iyo ardayda si aanu u siino taageerooyin kooxeed ama shakhsiyeed.

## *Ka Jawaab-celinta Habdhaqanka*

Waan ognahay ardaydu inay u baahan yihiin xuduudo adag. Qayb ka mid ah horumarkooda waa in la tijaabiyo xuduudahaas. Xaaladahaas oo kale, shaqadeena ayaa ah inaan xaqiijino xuduudahaas iyo inaan tallaaboyin qaadno. Anagoo si firfircoon oo hormaris ah u barayna una tababarayna, si firfircooni leh u xalinta dhibaatada, iyo tallaabo ka qaadista, waxaan barnaa ardaydeena xirfadaha lagama maarmaanka u ah inay ku noolaadaan heerkooda PEAK. Waxaan aqoonsannahay in ardayda qaar ay u baahan yihiin caawimaad dheeraad ah si ay u bartaan xirfadaha tacliinta, iyo in ardayda qaar laga yaabo inay u baahdaan taageero dheeraad ah xagga barashada xirfadaha shucuurta iyo bulshada ah. Haddii ay taasi dhacdo, Maamulka Dugsigu wuxuu si dhow ula shaqayn doonaa macalimiinta, ardayda, iyo qoysaska si ay uga caawiyaan dhamaan ardayda inay bartaan oo ay kobcaan isla markaana loo xaqiijiyo jawi waxbarasho oo ammaan ah, wax soo saar iyo farxad u leh dhammaan ardayda.

Marka ay munaasib tahay, macalimiinta iyo maamulka dugsigu waxay awood u leeyihiin inay go'aan ka gaaraan cawaaqibta/tallaabooyinka laga qaadayo hab-dhaqanka ardayga. Haddii ardaydu doortaan inay jebiyaan sharciyada ama ay sameeyaan xulashooyin aan badbaado lahayn, waxa laga yaabaa inay lumiyaan mudnaanaha ay helaan (sida wakhtiga xulashada, safarada dibadda loo aado, iwm) haddii ay macno samaynayso in sidaas la sameeyo. Qayb kasta oo khuseeysa IEP-ga ardayga ama Qaybta 504 (tusaale ahaan, qorshaha wax-ka-qabadka habdhaqanka, qabanqaabooyinka, iwm.) ayaa la tixgaliyaa marka la go'aaminayo tallaabooyinka laga qaadayo habdhaqanada ardayda naafada ah.

Bulsho wax barata ahaan, ficiladeenu waxay saameeyaan dadka kale. Sidoo kale, ficilka uu sameeyo hal arday ayaa laga yaabaa inuu saameyn ku yeesho waxbarashada ardayda kale. Waxaa jira habdhaqano gaar ah oo carqaladeeya ujeeddada wax-barashada iyo jacaylka ka dhaxeeya midba midka kale; habdhaqanadaas waa wax aan la aqbali karin. Si loo xaqiijiyo in dhammaan ardaydu ay helaan fursad kasta oo ay wax ku bartaan oo ay isku jeclaadaan, waxaanu u maarayn doonaa hab-dhaqanadaas qaab lagu ilaalinayo sharafta ardayga ee carqaladaynta samaynaya sidoo kalana waxaan ilaalin doonaa wakhtiga waxbarashada ee ardayda kale. Haddi ardaygu si isdaba joog ah ugu dhaqaaqo habdhaqamo xad gudub ku ah ixtiraamka, badbaadada shucuureed, ama badbaadada jireed ee ardaydaas, waxaan dugsi/qoys ahaan u qaadaynaa tallaabooyin. Shaqaalaha dugsiga ee ka masuulka ah fulinta siyaasadaha edbinta ee dugsiga waa in ay sidaas sameeyaan iyaga oo aan qofna ku takoorin jinsiyad, jnsi, asal qaran, qoomiyada, diinta, naafanimada, nooca galmoodka, ama aqoonsiga jinsiga.

Iyadoo qorshayaasha shakhsiyeed ee ardayda gaarka ahi ay kala duwanaan karaan, habka loo wajahayo waa isku mid. Wejiga koowaad ee habdhaqannada aan habboonayn ee soo noqnoqda waa in la bixiyo taageero dheeraad ah oo si toos ahna arrinta looga qeybgeliyo qoysaska.

**Habka Dhiirrigelinta iyo Abaal-marinta**

Iyadoo RMP ay raacdo nidaamyada edbinta dugsiga ee DPS/APS, ardaydu waxay sidoo kale ku kasban karaan dhibco loo yaqaan PEAK Points iyada oo la eegaayo dhaqannada wanaagsan ama kuwa xun ee uu ardaygu sameeyo. Nidaamkani wuxuu caawiyaa dhiirigelinta ardayda isagoo tilmaamaya inay dhaafeen, buuxiyeen, ama hoos u dhaceen filashooyinka RMP.

- Dhaqannada Wanaagsan (+3 Dhibcood oo Abaal-marin ah): Dhaqannada wanaagsan ayaa ardayda ku abaal-mariso hab-dhaqankooda wanaagsan, guulaha, ama wax ku biirin kasta oo samayeen oo ka baxsan heerka filashada aasaasiga ah ee dugsiga.
- Dhaqannada Xun (-1 Dhibic oo Abaal-marin ah): Abaal-marinta dhaqannada xubn waa cawaaqibta ka dhalatay ficilada jebiya xeerarka dugsiga oo dhan ama carqaladeeya jawiga waxbarashada laakiin waxaa si guul ah loogu maarayn karaa gudaha fasalka.
- NIDAAMKA U GUDBINTA MAAMULKA SARE (0 Dhibcood oo Abaal-marin ah): U gudbinta maamulka saree waa hab loogu talagalay in wax looga qabto hab-dhaqannada carqaladeeya habka waxbarashada (dabeecadaha ku lug leh ixtiraam la'aanta, tallaabooyinka wax u dhimaya badqabka ardayda, iyo carqaladayn aad u daran) ee uu baahan faragelin dheeraad ah oo maamulka ah.
- Akadeemiyada Abaal-marinta ah (0 Dhibcood oo Abaal-marin ah): Abaal-marinta Akadeemiyada waa cawaaqibta ficilada ardayga ee ku xad gudbaya xeerarka badqabka iyo isdhexgalka ee dugsiga oo dhan. Abaal-marinta Akadeemiyada waa in la wargaliyo qoysaska sababtoo ah waxaa la sameeya saacadaha waxbarashada dugsiga ka dib.

Dukaanka Dugsiga: Dugsiyadu ayaa lahaan doonaan nidaam dukaanka dugsiga halkaas oo ardaydu ka iibsan karaan alaab iyagoo isticmaalaya dhibcahooda PEAK POINTS oo ay kasbadeen. Qaar ka mid ah alaabtan, sida lebbiska leh sumadda dugsiga iyo agabyada kale, ayaa loo qaabayn doonaa si loo dhiirogeliyo bulshada dugsiga gudahiisa. Hindisahani ayaa ku dhiirigeliyaa ardayda in ay si togan oo firfircon u dhaqmaan oo ay dhibco helaan, iyaga oo kor u qaadaya isku xirnaanta dhexdooda.

**Habdhaqanka Dhacdada**

Dhacdooyinku waxay sabab u yihiin u gudbinta maamulka waxayna ka dhigan tahay inay jirto baahi loo qabo caawimaadda maamulka si loo taageero badbaadada fasalka ama jawiga waxbarashada. Waxaan rabnaa in dhammaan ardaydeena ay noqdaan kuwo guuleysta iyo inay helaan fursad ay wax ku bartaan. Jawaab-celinta maamulku waxay noqon kartaa in la bixiyo taageero, in la tababaro macalinka, in casharka fasalka macalin kale uu bixiyo si uu macalinku u yeesho wadahadal soo kabasho ah, ama taageerada maamulka ee ka baxsan fasalka. Wakhtiga lumay ee waxbarida waxay keenaysaa guul-gaaris hooseysa ee ardaydeena. Sidaa darteed, kuma fiicna in ardaydu ay seegaan wakhtiga waxbaridda hab-dhaqanka awgeed.

Tusaalayaasha waxaa ka mid ah:

- Dhaawac Jireed: shilalka ka dhasha dhaawacyo fudud
- Habdhaqanka Sharci-jebin ah oo Soo Noqnoqda
- Hubka
- Daroogada/khamriga
- Dhibaateynta ku saleysan jinsiyad, qomiyad, dooqa galmada, aqoonsiga lab/dheddig, curyaanka, ama diin

- Xatooyo weyn
- Burburin weyn oo hantiyeed
- Hanjabaaydo badbaado
- Weerar jireed

Haddii arday uu dugsiga keeno hub, daroogo, ama aalkolo, uu arday kale ama shaqaale ula macaamilo hab galmo ah, uu ku lug yeesho xatooyo wayn (in ka badan $500), uu sababo burbur wayn oo hantida dugsiga ah (in ka badan $500), khatar geliyo badbaadada dadka kale ama laftooda, weeraro arday kale ama xubin shaqaale ka mid ah, ama isku dayo inuu waxyeelo jireed oo halis ah u geysto naftiisa, maamulka ayaa lala xiriiri doonaa isla markiiba. Maamulka ayaa qaadi doonta tallaabooyinka anshaxa. RMP waxay raacdaa tilmaamaha fulinta Siyaasadaha BOE JK - Anshaxa Ardayda iyo JK-R - Habraacyada Anshaxa iyo Dhaqanka Ardayda oo loogu talagalay DPS iyo Xeerarka iyo Siyaasaddaha loogu talagalay APS. Tallaabooyinka isla markiiba la qaadayo waxaa ka mid noqon kara: la xiriirida qoyska, cawaaqibta, jawaab-celinta amniga iyo badbaadada DPS, qiimeynta caafimaadka dhimirka, ama adeegyada bulshada, iyo xaaladaha qaarkoodna ka eryida dugsiga ama meelaha ka baxsan. Haddii ka cayrinta dugsiga la dammaanad qaado, wargelin qoraal ah oo rasmi ah ayaa la siin doonaa waalidiinta/masuulka. Ka cayrinta ka baxsan dugsiga way kala duwan tahay laakiin waxay u dhaxayn kartaa 1 (hal) ilaa 5 (shan) maalmood.

Ardayga waxa kaliya loo eryi karaa habdhaqan lagu qeexay Xeerka Anshaxa ee Denver Public Schools (DPS) (ama Siyaasadda Aurora Public Schools ee loogu talagalay RMP Fletcher), marka lagu daro sharciyada Magaalada iyo Degmada Denver ama Gobolka Colorado. RMP ayaa mas'uul ka ah in ardayga loo gudbiyo DPS/APS si loo mariyo hannaanka ceyrinta marka uu sidaas farayo sharciga ama siyaasadda. Hannaanka dugsi ka cayrinta, oo ay ku jiraan dhageysiyada, waxaa maamula DPS/APS si waafaqsan siyaasadaha iyo habraacyada DPS/APS ee khuseeya. RMP waxay qoraal ku ogeysiin doontaa waalidka ama mas'uuliyiinta ardayga haddii la go'aamiyo in ardayga loo gudbiyo in laga eryo dugsiga ay lagama maarmaan tahay ama uu sharcigu farayo. Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waxay heli doonaan ogaysiis qoraal ah oo horudhac ah oo ku saabsan dhegeysiga dugsi ka eryida. RMP ma gaarto go'aannada ugu dambeeya ee dugsi ka eryida.

Su'aalaha la xiriira Matirikiska Habdhaqanka ee DPS/APS ama hirgelintiisa, fadlan la xiriir maamulaha dugsigaaga. **Nuqulka Matirikiska Habdhaqanka ugu casrisan ee APS iyo DPS ayaa laga heli doonaa dugsiga marka laga codsado.**

**Xannibitaanka Ardayga**

RMP waxay raacdaa Siyaasadda Xakamaynta Ardayda ee Denver Public Schools iyo Isticmaalka Xakamaynta Gacan ka hadalka ee Aurora Public Schools marka la joogo kambaskayada Fletcher. Siyaasaddan waa in la fuliyaa iyadoo la adeegsanayo caqli-galnimo suuban, iyadoo la tixgelinayo badbaadada, samaqabka, iyo sharafta xubnaha bulshada ee dugsiga.

Kaliya xubnaha shaqaalaha ee shahaadaysan ayaa jir ahaan u xakamayn kara ardayga haddii aysan jirin waxyeello degdeg ah oo uu markaas gaysanayo. Xakamaynta jireed waxa kaliya la isticmaali karaa xaaladaha soo socda:

- Si ardayga la xakameynayo ama ardayda kalaba looga ilaaliyo khatar halis ah, dhaawac jireed oo suurtagal ah

- Xaaladaha degdega ah markaas oo xeeladaha kale ee xakamaynta yar lagu guuldarraysto ama shaqaalaha ay go'aansadaan in xeeladaha noocaas ahi aanu habboonayn ama aan waxtar lahayn marka la eego xaaladaha jirta

Tallaaboyinka noocaan ah kama dhigna ku xad-gudubka carruurta loomana fasiran doono inay ka dhigan yihiin ciqaab jireed iyadoo loo eegayo macnaha iyo ujeeddada siyaasaddan.

**Hubka**

Hubka qoryaha ah, mindiyaha, waxaabaha qarxa, ama hubka noocuu doono ha ahaadee lagama ogola gudaha dugsiga, gudaha kambaska, meel kasta oo ka mid ah dhismaha dugsiga, gaadiidka uu dugsigu uu bixiyo, ama dhacdo kasta oo dugsigu maag galiyo ama la xidhiidha dugsiga. Waxyaabaha u eg ama u muuqda inay yihiin hub, oo ay ku jiraan alaabaha hubka macmalka ah, ama xitaa kuwa loo isticmaali karo hub ahaan, marna lama ogola guud ahaan. Ardeyda lagu helo waxybaahan la mamnuucay ayaa wajahi doonaan tallaabo anshaxeed oo ku salaysan xeerarka ama hab-raacyada u yaalo dugsiga.

**Rabshadaha**

Si loo hubiyo ammaanka qofka kasta oo ku sugan dugsiga Rocky Mountain Prep, looma dulqaadan doono dhaqanka rabshada ku salaysan. Arday kasta oo ku kaca ama ku hanjaba fal gacan ka hadal ah ee dugsiga dhexdiisa, ama gudaha gaadiidka dugsiga uu bixiyo, ama dhacdo la xidhiidha dugsiga, ama qorshaynaya fal rabshada wata inta lagu jiro maalinta dugsiga, waxay lakulmi doonaan cawaaqib ku haboon sida lagu qeexay Habdhaqanka Matirikiska DPS/APS.

**Daroogada, Khamriga, iyo Tubaakada**

Isticmaalka, haysashada, qaybinta, ama iibinta khamriga, tubaakada, shiishada vape-ka ah, ama daroogooyinka sharci darrada ah, oo ay ku jirto isticmaalka xashiishka iyada oo aan la haysan warqad dhakhtarka soo qoray oo sax ah oo waafaqsan dhammaan sharciyada isticmaalka, ama si xun u isticmaalka dawooyinka dhakhtarku qoray, waa ka mamnuuc dugsiga gudahiisa, gudaha dhacdo kasta oo dugsigu oggolaaday, xilliga ardayda ay saaran yihiin gaadiidka dugsigu uu bixiyo, ama wakhti kasta ama meel kasta oo dugsigu ku qabto howlihiisa adeegeed. Ku xadgudubka xeerarkan ayaa sababi doonto cawaaqib daran, sida lagu qeexay Habdhaqanka Matirikiska DPS/APS.

**Baaritaanka Ardayga**

Shaqaalaha RMP ayaa laga yaabaa inay baadhis ku sameeyaan hantida dugsiga (ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn sanduuqyada ardayda) haddii dugsigu leeyahay sababo muhiim ah ay ku baaran, baahi gaar ah, ama uu jiro tuhun macquul ah oo ku aadan ku xad-gudbida siyaasadda ama sharciga dugsiga. Maamulka dugsigu waxa kale oo uu baadhi karaa qofka naftarkiisa iyo/ama hantida gaarka ah ee ardayga, aagga miiska ardayga, boorsada ardayga, gaadhiga la dhigo dhismaha dugsiga, ama hantida dugsiga ee arday gaar ah la siiyay, mar kasta oo maamulka dugsigu uu ka shakiyo in waxyaabaha loo arko in sharci-darro yihiin, carqaladaynaya, ama ku xad-gudbaya nidaamka ama sharciga dugsiga, ama in ardaygu uu haysto waxyaabahan oo kale oo loo adeegsado si ka hor imanaysa nidaamka ama sharciga dugsiga. Shaqaalaha dugsiga ayaa xidhi doonaan ardayga (ilaa inta shakhsiyaadka wax ka qabadka ku habbooni ka imanayso) haddii uu jiro tuhun macquul ah oo ah in ardaygu haysto daroogo, maandooriye, hub, walxaha qarxa, ama alaab kale oo khatar ah oo ay gacanta ku hayaan, iyo haddii haysashadaasi ay sababi karto khatar cad oo ku wajahan badqabka iyo daryeelka ama hantida dugsiga.

**<u>Xadgudubyada Basaska</u>**
Basku waa taageero gaar ah oo ay bixiso dugsiga Rocky Mountain Prep oo waxaana rabnaa inaan hubinno in dhammaan ardaydu ay dugsiga imaadaa kana laabtaan si nabad ah iyo wakhtigii loogu talagalay. Haddii dareewalka baska uu dugsiga u soo wargeliyo wax caqabad oo dhanka dhaqanka ah, dugsigu ayaa samayn karaa baaritaan, ardayguna waxa laga yaabaa in uu wajaho cawaaqibta ka dhalata baartaanka. Haddii dhaqankaas xadgudubka uu sii socdo waxa laga yaabaa inay sabab u noqoto in ardayga laga mamnuuco gaadiidka baska inta sanadka ka hadhay. Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan ka eeg qaybta Gaadiidka ee hoose ku jirta.

## Xeerarka Xoogsheegashada iyo Cagajuglaynta interneetka

Hadaanu nahay dugsiga Rocky Mountain Prep, waxaanu ku dadaalaynaa inaanu abuurno jawi badqab ah, la saadaalin karo, oo joogto ah si dhammaan ardaydu u dareemaan jecayl, amman iyo ixtiraam. Waxaan aaminsanahay in ardaydu ay awood u leeyihiin inay wax ku bartaan jawi ka madax banaan hanjabaad, dhibaatayn, iyo nooc kasta oo habdhaqanka cagajuglaynta ah. Cagajuglaynta sabab kasta ha ahaatee waa ka mamnuuc dhammaan dugsiyada RMP, gudaha hantida dugsiga iyo dhacdooyinka dugsigu maalgeliyo labadabo.

Marka uu dhaco xadgudub ku aadan ammaanka goobtan ha ahaato qaab cagajuglayn ama dhibaatayn u dhaxaysa ardayda ama kooxo ardayda ah, shaqaalaha Rocky Mountain Prep ayaa si degdeg ah uga jawaabaan si ku haboon si ay wax uga qabtaan arrimahaas, hagaajinta xiriirada burburay, kala shaqeeyaan ardayda si ay u bedelaan hab-dhaqanka cagajuglaynta , la shaqaynta dhibanayaasha cagajuglaynta, iyo aqoonso iyo kor u qaadida hab-dhaqan ammaan ah oo taageero leh. RMP waxaa laga yaabaa inay edbiso ardayda iyadoo lagu salaynayo matirikiska edbinta ee DPS/APS. Ka dugsiga RMP ahaan, waxaanu si firfircoon wax uga qabanaa xaaladaha cagajuglaynta iyada oo aan loo eegin meesha ama marka ay dhacdo dhacdo iyo haddi ay keento carqaladayn la taaban karo oo ku timaada habka waxbarashada ama habsami u socodka dugsiga.

**<u>RMP waxay leedahay siyaasad aan marnabo u dulqaadan karin cagajuglaynta.</u>**

**Sidee ayay Qoysasku Gacan Uga Gaysan Karaan?**
Haddii aad ka welwelsan tahay in cagajuglayn ay ka dhacayso dugsigaaga, waxaan kugula talineynaa inaad la xiriirto maamulaha dugsigaaga, shaqaalaha arrimaha bulshada, dhakhtarka cilmi-nafsiga dugsiga, ama macalinka si wax looga qabto arrinta. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad ilmahaaga kala hadasho cagajuglaynta iyo inaad bartid ilmahaaga inuu had iyo jeer u sheego qof weyn oo la aamini karo haddii isaga ama iyada, ama arday kale, loo xoogsheegto ama interneetka lagu handado. Baro wax badan oo ku saabsan u xoogsheegashada iyo cagajuglaynta interneetka adigoo isticmaalaha ilaha soo socda: Cyberbullying.org • Stopbullying.gov • Safeschools.state.co.us • Commonsensemedia.org

**Safe2Tell**
Safe2Tell Colorado waxaa loogu talagalay inay ka caawiso ardayda si qarsoodi ah inay u soo sheegaan dhaqan kasta oo hanjabaad ah oo khatar gelinaya naftaada, dugsigaaga, asxaabtaada, qoyskaaga, ama bulshadaada. Safe2Tell CO waa QARSOODI - tani waxaa loola jeedaa in aqoonsigaaga ka warbixin soo gudbiyaha ahaan yahay MID AAN LA GARANAYN. Safe2Tell kaliya waxay rabtaa inay maqasho walaacaaga iyo inay isku daydo inay ku caawiso. Qarsoodinimada xogtaada shakhsiyeed waxaa ilaalinaya Sharciga Gobolka Colorado. Lambarka wicitaanka ee bilaashka ah waa: 1-877-542-7233

(SAFE). Warbixinta waxaa sidoo kale lagu soo gudbin karaa khadka. Waxaad wax badan ka ogaan kartaa Safe2Tell iyo sida loo soo gudbiyo warbixinnada qarsoodiga ah ee khadka adigoo isticmaalaya safe2tell.org

### Hagardaamada

Dugsiga Rocky Mountain Prep waxaa ka go'an inuu joogteeyo jawi dugsi oo xor ka ah dhibaataynta ku salaysan isir, midab, diin, asal qaran, jinsi, nooca galmoodka, ama naafanimada. Dhibaataynta ay sameeyaan maamulka, shaqaalaha taageerada, ardayda, adeeg-bixiyeyaasha iyo shakhsiyaadka kale ee jooga dugsiga ama dhacdooyinka dugsigu maalgeliyo waa mamnuuc. Dugsiga Rocky Mountain Prep wuxuu dhammaan shaqaalaha iyo ardayda uga baahan yahay inay si habboon ula dhaqmaan shaqaalaha, ardayda iyo dhammaan xubnaha bulshada dugsiga.

### Ciwaanka IX (Title IX)

Dhacdooyinka Title IX waxa ka mid ah xaaladaha takoorka ee ku salaysan jinsiga ee barnaamijyada waxbarashada ama hawlaha RMP. Kambaska kasta waxay leedahay qof u xilsaaran arimaha Title IX. Warbixinnada waxaa si toos ah loogu gudbin karaa xiriiriyaha ama Iskuduwaha Title IX. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan siyaasaddayada Title IX, fadlan booqo websaydkeena Rockymountainprep.org.

### Ka Warbixinta Waajibka ah

Dhammaan shaqaalaha RMP waxaa khasab ah inay ka warbixiyaan xaaladaha noocaas ah waxaana sharcigu uga baahan yahay inay ka warbixiyaan ku xadgudubka ama dayacaada carruurta haddii ay si macquul ah uga shakiyaan yihiin xadgudub ama dayacaad. Warbixintu maaha gabagabo ku saabsan habdhaqanka qof kasta. Waxay bilaabeysaa su’aal lagu go'aaminayo in habdhaqan walaac leh uu, dhab ahaantii, dhacay iyo haddii kale. Dhammaan shaqaalaha RMP waxaa looga baahan yahay inay qaataan tababarka ka warbixinta xaaladaha ee qasabka ah sannad kasta. Si aad usoo sheegto xadgudub ama dayacaad ilmo loogaysanaayo, laxariir Laynka Tooska ah ee Dayacaada iyo Xadgudubka kadhanka ah Caruurta ee Colorado 844-264-5437.

# Cutubka Afraad: La shaynta Qoyska

Waxaan aaminsanahay in qoysaskeena ay yihiin shuraakadayada iyo taageerayaashayada. Si loo hubiyo in arday kastaa uu gaaro awoodiisa buuxda waxay u baahan tahay awooda iyo waxqabadka wadajirka ah ee dugsiyada, macalimiinta, shaqaalaha, iyo qoysaska. Sidaa darteed, iskaashi xoog anoo ku dhisan jacayl iyo ixtiraam ka dhexeeya qoysaska iyo shaqaalaha dugsiga, gaar ahaan macallimiinta, waa mabda'a ugu muhiimsan ee howlaheena RMP. Waxaan la shaqaynaa qoysaskeena si aan uga caawino inay helaan macluumaad dhamaystiran oo ku aadan horumarka waxbarasho ee ilmahooda iyo sida ay uga caawin lahaayeen wadada ay u gaari lahaayeen illa heerka waxbarashada kulliyadda sare. Waxaan ula dhaqannaa si sharaf iyo xushmad ku dheehan tahay, anagoo ixtiraameyna doorkooda sida in ay yihiin macalinka koowaad iyo kan ugu muhiimsan ee ilmahooda.

Waxa kale oo aanu qaadnaa masuuliyadda hubinta in qoysaskeena ay helaan awood waxbarasho iyo aqoon oo ay u doodi karaan caruurtooda iyo bulshadooda, anagoo u samaynayno tabobar iyo horumarinta fursadaha qoysaskeena siinaya inay door ku yeeshan howlaha go'aan saamaynta ayna qayb uga qaadan lahaayeen horumarka bulshadeena. Waxa aan si adag ugu dhiirigelinayno dhammaan qoysaska inay si firfircoon uga qaybqaataan iskaashigan ay la leeyihiin bulshada dugsigooda iyaga oo ka qayb qaadanaya fursadaha hoggaaminta ama mutadawacnimada ee dugsiyadeena. Qoysaska RMP waa isbahaysi hagaya bulshada oo awood leh waana kuwo lagu xisaabtamo oo waxtar leh.

## Fursadaha Iskaashiga Qoysaska ee RMP

Waayo-aragnimada qoysaska iyo ka-qaybgalkooda hawlaheena waxay muhiim u yihiin si la mid ah ardaydooda.
Hoos waxaa ku yaala siyaabaha ay qoysasku uga qaybqaadan karaan dugsiga ilmahooda. Fadlan ogow, in kastoo laga yaabo in waqtiyada shirarka iyo/ama magacyada guddiyadani ay ku kala duwanaan karaan dhammaan xarumaha, fursada iskaashi la samaynta qoysaska wali waa isku mid.

**Shirarka Qoysaska iyo Macallimiinta:** Waxaa jira laba shir oo qoysaska/macalimiinta yeeshaan oo rasmi ah sanadka oo dhan; dabyaaqada dayrta iyo gu'ga. Shirarku waa qasab maadaama ay yihiin wakhti muhiim ah oo lagaga hadlayo yoolalka tacliimeed ee ardayda iyo horumarkooda. Haddii qoysku aanu awoodin inuu ka soo qayb galo shirka, dugsigu wuxuu la xiriiri doonaa qoyska oo wuxuu kala shaqeyn doonaa inay samaystaan shirka kala war-qaadashada. Waxay sidoo kale muhiim u yihiin maamulka dugsiga inay soo ururiyaan jawaab-celin rasmi ah oo qoysaska ka bixiyaan sida ay ugu qanacsan yihiin dugsiga iyo inay doonayaan inay ku noqdaan.

**Guddiga Hoggaaminta Qoysaska:** Guddiyada Hoggaaminta Qoysaska waxay lama huraan u yihiin kordhinta codadka qoysaska ee dugsiyadeena/shabakadeena, iyo samaynta khad isgaarsiineed oo macno leh oo u dhexeeya dugsiga iyo qoysaska. Hogaamiyayaasha qoysaskeena waxay taageeraan qorsheynta dhacdooyinka kambaska, dhisidda hanka dugsiga, iyo u doodista iyo ku hadlida magaca dugsiga. Taariikhaha iyo waqtiyada kulanka bilaha ah ayaa la soo dhejin doonaa dhammaan qoysaska si ay uga soo qaybgalaan.

**Guddiga La Xisaabtanka Dugsiga (SAC):** Guddiga La-xisaabtanka Dugsiga ee kaambas kasta waxay u adeegaan sidii hay'adda gaarista go'aamada kama dambaysta ah ee la-xisaabtanka dugsiga iyo la socodka horumarka, oo ay ku jirto dib-u-eegista macluumaadka ardaydeena Luuqadaha-badan leh ee Guddiga La-talinta Waalidiinta ee MLE (MLE-PAC). Wakiilada qoysasku waxay si dhow ula shaqeeyaan hogaamiyayaasha dugsiga iyo shaqaalaha haya doorka la-talinta ugu yaraan teeram kasta si ay u bixiyaan talooyin, u gaaraan go'aamo si ay u horumariyaan kaambaskooda, ayna dib u eegis ugu sameeyaan xogta waxqabadka dugsiga. Xubnuhu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan in dugsiga lala wadaaga macluumaadka muhiimka ah ee qoysaska kale iyaga oo aqoonsanaya mawduucyo muhiim ah oo ku salaysan baahida waxbarasho iyo shucuurta bulsho ee ardayda kaambaskooda iyo bulshada guud ee dugsiga. Qoysaska danaynaya inay codsadaan inay ku biiraan Guddiga La Xisaabtanka Dugsiga iyo/ama guddi-hoosaadka PAC waa inay buuxiyaan foomka danaynta iyo/ama la xiriiraan xafiiska taageerada.

**Family Champions for Change (Horyaalka Qoysaska ee Isbeddelka):** Barnaamijkeena kooxda Hindisaha Isbeddelka Qoyska (Champions for Change Family) ee dhawaan la bilaabay waxa ay ka kooban tahay wakiilada qoyska ee mid kasta oo ka mid ah 12 ka xarumood ee RMP. Kooxdeena

hindisaha isbeddelka waxay saddexdii biloodba mar la kulmaan maamulaha guud si ay u bixiyaan jawaab celin, iyo si ay u qorsheeyaan tababarada qoyska si loo hormariyo ka qayb qaadashada bulshada iyo/ama ka shaqaynta danaha RMP. Qoysaska danaynaya inay hogaamiyaan shaqadan muhiimka ah waa inay buuxiyaan foomka danaynta iyo/ama la xiriiraan xafiiska taageerada. Barnaamij la mid ah ayaa la siin doonaa ardayda fasalka 10-12aad

**Habeennada Iskaashiga Waxbarashada/ Bandhigyada Aqoon-is-weydaarsiyo Tacliineed:** Munaasabadahan saddexdii biloodba mar ah waxay udub dhexaad u yihiin tacliinta si ay qoysasku wax badan uga bartaan manhajka, sida ardaydoodu u horumarayaan Cilmiga Wax-akhriska, iyo si ay u helaan agabyo ay ku taageeraan waxbarashada ardayga inta ay joogaan guriga. Inta lagu jiro wakhtigan, qoysasku waxay la xiriiri karaan macalimiinta ardayda iyo qoysaska kale ee bulshada dugsigeena si loo wada shaqeeyo oo loo xoojiyo tacliintooda. Munaasabadahan waxaa lagu xayaysiinayaa warsidaha loogu talagalay qoysaska waxaana dhammaan qoysaska si weyn loogu dhiirigelinayaa inay ka qaybqaataan.

**Saacadaha Kafeega ama 'Cafecitos':** Hogaamiyayaasha dugsigu waxay marti galiyaan saacadaha kafeega ee bille ah si ay qoysasku u bartaan waxyaabaha ku cusub dugsiga, u wadaagaan jawaab celin, una weydiiyaan wixii su'aalo ah ee ay qabaan iyagoo cabaya qaxwo iyo cunaaya quraac fudud. Dhacdooyinkan waxa lagu sheegi doonaa wargaysyada iyo jadwalkeena bilaha ah ee dugsiga.

**Mutadawacnimada:** Waxaanu raacnaa siyaasada loo dhan yahay ee qoysaskeena waxaanu siinaa fursado balaran oo hal abuur leh si ay uga qayb qaataan waxbarashada ilmahooda. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay si mutadawacnimo ah ugu deeqaan wakhtigooda iyo xirfadahooda iyagoo gacan ka gaysanaya hawlaha fasalka, ka qayb galka safarada dibadda, shaqada ardayda dugsiga looga soo dhiibo, ka qeyb noqoshada guddiyada ay maamusho kaambaska, ka qaybgalka tababarada, iyo wax intaas ka badan. Mutadawiciinta waalidiinta ah waxay u baahan doonaan inay maraan baaritaanka taariikhda iyo dhaafitaanka ka hor intaysan mutadawac ka noqon dugsiyadeena. Fursadaha mutadawacnimada waxaa lagu shaacin doonaa warsidaha dugsiga ama qoysasku ayaa la xiriiri karaan kooxda maamulka dugsiga si ay wax badan uga ogaadaan.

**Ballanqaadka Qoysaska-Dugsiga:** Ballanqaadka Qoysaska-Dugsiga, ee ku jira buug-gacmeedkan, wuxuu qeexayaa filashooyinka gaarka ah iyo kuwa guud ee ardayda, macallimiinta, iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta. Shaqadeena wadajirka ah waa iskaashi seddex geesood ah, filashooyinka ugu sareeya waa inay hagaan dhammaan ficiladeena si aan waxbarashada tayada ugu sareysa u siino ilmo kasta.

**La-taliyayaasha iyo Xiriirada Waalidiinta/Masuuliinta:** Dugsiyada sare ee RMP waxay isticmaalaan barnaamijka la-talinta si ay u abuuraan bulsho waxbarasho oo xooggan oo ku salaysan qiyamka RMP. Lataliyuhu waxa uu u adeegaa sidii xiriirka aasaasiga ah ee qoysaska waxaanu fududeeyaa xiriirka ka dhexeeya qoysaska, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. La-taliyayaasha waxaa laga filayaa inay la xiriiraan qoysaska ugu yaraan hal mar bishii, ha ahaato wicitaan taleefan ama warqad/iimayl, si ay u siiyaan warar joogto ah oo ku saabsan horumarka dugsiga. Isgaarsiinta bilaha ah waxaa ku jiri doona jawaab-celin-celin togan iyo mid wax dhisi karta oo ku saabsan horumarka tacliinta iyo habdhaqanka ardayda. Qoysaska waa lagu soo dhaweynayaa inay la-taliyayaasha ula soo xiriiraan sabab kasta, oo ay ku jiraan su'aalaha ku saabsan munaasabadaha dugsiga ama walaacyada jira ee ku

saabsan ilmahooda ama guud ahaan dugsiga.

**Ka-qaybgalka Madaniga ah ee Qoysaska:** Dugsiga Rocky Mountain Prep, waxaan aaminsanahay inay aad muhiim u tahay in xubin kasta oo bulshadeena ka mid ah ay hesho fursad ay ku wadaagaan fikradooda iyada oo loo marayo ka qaybgalka bulshada. Arrintaan waxaa ka mid ah ka codeynta doorashooyinka deegaanka, gobolka, iyo qaranka. Ka 501 (C)(3) ahaan, waxaanu ka qeyb qaadanaa ficilo waxbarasho oo siyaasadeed oo aan xisbinimo ku jirin, taasoo la macno ah inaan aqbali doonin musharax ama xisbi gaar ah. Taas bedelkeeda, doorkeenu waa inaan qoysaska siino agabyo iyo kheyraadka loo baahan yahay in lagu wargeliyo bulsho ahaan loogana hawl galo hannaanka doorashada. Waxaan si dhow ula shaqaynaa hawl-galayaasha bulshada, sida Qoysaska Denver ee Dugsiyada Dadweynaha, si aan u taageerno oo aan ula xiriirno qoysaska xilliyada cod bixinta doorashooyinka soo socda, diiwaangelinta cod bixinta, iyo wadaagista macluumaadka ku saabsan goobta iyo goorta la codeynayo. Xaaladaha qaarkood, tani waxay u baahan doontaa in qoysaska ay doortaan in loo soo diro waxyaabaha qaar; fadlan tixraac lifaaqa foomkan.

# Cutubka Shanaad: Tacliinta

## Hiigsiga Waxbarasho ee RMP

Annagu ma nihin nidaam dugsi - waxaan nahay urur. Hadafka ururukeena waa in aan dimuqraaddiyno gelitaanka kuleejka oo ka dhigno mid la heli garo oo loo simmanyahay ee carruurta iyo bulshooyinka badanaa la haybsooco ee ku aadan helitaanka waxbarashada kuleejka ee tayada sare leh. Waa in aan ogaano in wax baridda, wax barashada, mowduucyada, falanqaynta xogta, iyo qiimayntu aanay ahayn fikrado ku jira RMP- taa beddelkeed waa agab aanu isticmaalno si aanu u hubinno in ardaydeenu ay haystaan ikhtiyaarada ugu badan si ay u qaabeeyaan nolol ay jecel yihiin oo ay naftooda go'aansadeen.

**Tiirka 1aad: Aqoonta = Cadaalad:** Waxaan ognahay in aqoontu aanu kaliya ahayn xirfad ama maaddo. Waa qalab xorriyadeed oo qarniyo badan loo adeegsanayey in dadka siiyo aqoonta iyo xirfadaha hab-fekerka muhiimka ah ee ay u baahan yihiin si ay u go'aan u gaaraan aayahooda. U diidista dadka xaqa ay u leeyihiin inay bartaan sida wax loo akhriyo waa mid ka mid ah hababka taariikhiga ah ee dulmiga, waxayna arrintaas hadda ka dhacdaa Ameerika iyadoo heer la yaab leh ku socoto arrintaas. RMP way diiday tan oo waxay si sharaf leh u aqbashaa cilmiga wax-akhriska ee heer kasta oo fasal ah, iyadoo siinaysa ardaydeena fursado ay wax ku bartaan, ku koraan, oo ay ku jeclaadaan wax akhriska. Fasalka ECE-2aad, ardaydeenu waxay baranayaan inay wax akhriyaan oo ay dhisaan aqoontood wax-akhriseed. Fasalka 3aad-5aad, ardaydeenu waxay isticmaalaan xirfadahooda wax-akhris si ay wax badan uga bartaan adduunka ku xeeran oo ay u isticmaalaan wax-akhriska inay wax ka ogaadaan meel fogfog. Fasalka 6aad-8aad, ardaydeenu waxay wax u akhriyaan si ay wax uga ogaadaan oo u fahmaan mowduucyo, fikrado, iyo xaalado aad u adag. Waxay dhammeeyaan waayo-aragnimadooda aqooneed ee dugsiga dhexe iyagoo leh aragti ballaadhan. Fasalka 9aad-12aad, ardaydeenu waxay wax-akhriska u adeegsadaan si ay uga doodaan fikradahooda iyo fikradaha dadka kale iyagoo samaynaayaan cilmi-baaris si ay u taageeraan una difaacaan fikradahooda.

**Tiirka 2aad: Luuqadda=Xoriyad:** Marka ay dadku si wax ku ool ah wax u qoraan oo ay u hadlaan,

waxay helayaan awood ay ku cabbiraan fikradahooda, wadaagaan khibradahooda, oo ay qeexaan baahiyahooda iyo rabitaankooda. Awood-siintani waxay muhiim u tahay bulshooyinka la haybsooco si ay xuquuqdooda u helaan, u dalbadaan caddaalad, oo ay si buuxda uga qayb noqdaan bulshada. RMP waxay si qoto dheer u aaminsan tahay in ardaydeenu ay leeyihiin xirfado iyo karti, laakiin waxaan rabnaa inaan siino agabka ay ku isticmaali xirfadohood iyo kartidooda addunkan casriga ah. Waxaan sidoo kale ognahay in ardaydeenu badankoodu yihiin kuwo barto oo ku hadlo luuqaddo badan, oo bixinta jawi waxbarasho oo soo dhawayn iyo wax tar leh waa mudnaanteena koowaad. Fasalka ECE-2aad, ardaydeenu waxay bartaan in ay jaclaadaan luqadda iyagoo baranaya aasaaska qoraalka iyo ku hadalka iyo dhisidda kalsoonidood ku aadan wax-qoridda iyo wax-akhrinta. Fasalka 3aad-5aad, waxaan bilaabnaa in aan ku dhiirigelino ardaydeena inay ku hadlaan luqadda si ay u gudbiyaan fikradahooda, aragtidooda, iyo waxbarashadooda ee dhammaan fasalada. Fasalka 6aad-8aad, ardaydeenu waxay horumariyaan xirfadahooda luqadda si ay u qeexaan aragtidooda, fikradahooda, iyo sidoo kale aragtida, fikradaha, iyo ra'yiyada dadka kale. Fasalka 9aad-12aad, ardaydeenu waxay xirfadooda qoraalka iyo hadalka u isticmaalaan si ay kor ugu qaadaan codkooda iyagoo kalsooni qabo si ay ula xiriiraan bulsho weynta cid kasat ha ahaadaane, mowqifka ay aaminsan yihiin, iyo sababta ay taasi muhiim u tahay. Waxa kale oo ay adeegsadaan qoraal si ay u fahmaan qoraallada adag, fikradaha, iyo aragtiyada, iyaga oo hubinaya in ay ku hadli karaan waxna ku qori karaan heerka jaamacadeed ka hor xilliga qalin-jabinta.

**<u>Tiirka 3aad: Waxbarashada= Aqoonta Heer jaamacadeed:</u>** Waxbarashadu waa hab ay faqriga ooga baxaan shakhsiyaadka badan oo ka soo jeeda dadka danyarta ah. Waxay bixisaa fursadaha isbeddelka dhaqaale ee bulshada, waxay yaraynaysaa sinnaan la'aanta dakhliga oo waxayna ka caawisaa heerka joojinta faqriga ee jiilalka iyadoo awood u siinaysa shakhsiyaadka inay bartaan xirfado dhammaystiran oo ay gaaraan xasillooni dhaqaale. RMP waxay ka dhigta gelitaanka kuleejka mid loo siman yahay iyadoo hubinaysa in manhaj kasta ay yihiin kuwa ugu tayada sarreeya fasalka. Qaar badan oo ka mid ah manhajyada lagu bixiyo dugsiyada RMP waxaa laga heli karaa dugsiyada ugu sareeya ee dalka oo dhan. Fasalka ECE-2aad, ardaydeenu waxay ku dadaalaan inay jeclaadaan waxbarashada iyagoo helaan deegaan ku habboon waxbarashada iyo manhajyo ku dhiirigelinaya inay bartaan xaqiiqooyinka iyo xirfadaha kuna dhiirigeliya inay sii wadaan oo kobciyaan xiisaha nolosha iyo jacaylka waxbarashadooda. Fasalka 3aad-5aad, waxaan ku dudaalnaa in ardaydeena ay si toos ah wax u bartaan iyagoo qof kale gadaal ka riixayn, annagoo og in maskaxdooda ay diyaar u tahay fakarka muhiimka ah iyo hal-abuurka anagoo hubinayna in wax walba oo ay u baahan yihiin ay ogaadaan ee ku saabsan aqoonta aasaasiga ah lagu heli karo sida toos ah. Manhajyadu kuma koobna oo keliya xaqiiqooyinka macluumaadka aasaasiga ah; waxaad arki doontaa ardayda fasalka 3aad-5aad oo akhrinaya kana hadlaya mawduucyo adag oo suugaanta ah. Fasalka 6aad-8aad, waxaan bilaabna in ardaydeenu loo diyaariya waxbarashada heerka jaamacada ah, inagoo hubinayna inay leeyihiin aqoon iyo xirfada iyo in sidoo kale ay fahan ka haystaan waxbarashada jaamacada iyo xirafadda shaqada mustaqbalka taasoo ay bilaabeen inay si firfircoon u qorsheeyaan oo ay u sahamiyaan qalan jabinta ka dib. Fasalka 9aad-12aad, waxaan diiradda saarna in aan si firfircoon ula qorsheyno ardaydeena si ay ugu diyaar garoobaan jaamacadda iyo xirfadda shaqada. Waxyaabaha ay ardaydeenu bartaan ee heerkan badanaa waa waxbarashada heerka jaamacadda, oo ardaydu waxay wakhtigood ku bixiyaan barnaamijyada tababarka shaqada, barnaamijyada aqoonsiga, iyo shahaadosiinta si ay kor ugu qaadaan fursadahooda iyo ikhtiyaarkooda.

## Hiigsigeena Waa guul ka gaarida Dugsiga Sare, Waxbarashada Jaamacada, iyo Nolosha guud ahaan

Markaan dib u eegis iyo baaritaan dheer ku samaynay agabyadeena waxbarashada, bandhigyada barnaamijyada, iyo qaab dhismeedka dugsiyadeena sare, waxaan ognahay inkastoo aan guulo waaweyn la gaarnay ardaydeena dugsiga sare, waxaan sameyn karno xitaa wax ka badan intaas. Habka lagu sii wado horumarinta waxbarashada fasalka ECE-12aad ma noqon doonto kaliya mid ku kooba muddo hal sano ah. Waxaan bilownay inaan aqoonsanno waxyaabaha muhiimka ah ee barnaamijyada dugsigeena sare iyo fursadda

Ilmo kastaa ay xaqqa ugu leeyihiin nolol wanaagsan, oo doorasho shakhsiyeed leh. **Ma aaminsanin aragtida ah in ardaydeenu lagu qasbo in ay kala doortaan xirfadda shaqo ama waxbarashada jaamacadda. Waxaan rabnaa in ardaydeena loo diyaariyo in ay ku guulaystaan labadaba iyo in aan hubinno in barnaamijadeena waxbarashada fasalka ECE-12 uu ka taageero ardaydeena si buuxda u soo saaraya, qeexaya oo horumarinaya rabitaankooda.**

## Ballanqaadka Qalin-jabinta Ardayda Dhigato RMP

Waxay RMP ballan qaadaysaa inay ku taageerto arday kasta oo RMP dhigto inuu ku qalin jabiyo dugsiga sare isagoo haysto waxyaabahan soo socda:

1. In uu ardayga oggolaanshyo badan ka helo kuleejyada , jaamacadaha, barnaamijyada tababarka, iyo barnaamijyada tayada sare leh ee waxbarashada jaamacadda ee heerka sare ah ka dib iyo in ay helaan taageerada lagama maarmaanka ah si aan u caawino ardaydeena illaa heerka ka qalan-jabinta jaamacadda, gaar ahaan ardaydeena jiilka kowaad ee qoyskooda waxbarashada jaamacadda markoodaa koowaad u tahay.
2. In uu aradaygu helo aqoonsi ama shahaado rasmi ah oo u sahlaaya in isla markiiba ay helaan shaqo wanaagsan, taasoo u sahlaysa inay sii wadaan inay naftooda taageeradooda iyagoo ku guda jiro waxbarashadood dugsiga sare ka dib.
3. Qorshe cad oo ku aadan tillaabooyinka xiga ka dib qalin-jabinta ayaa lala habeeyay ardayga iyo qoyskooda. Qorshahan waxaa ku jiri doona talaabooyinka xiga oo degdega ah ee faahfaahsan, agabyo taageereed si loo caawiyo looguna dhiirigaliyo ardayda, iyo waxqabadyada muddada-gaaban iyo kuwa fog si loo taageero fulinta riyooyinkooda.

## Fikradaha Guusha Jaamacadda iyo Shaqada ee RMP

Mid ka mid ah caqabadaha hadda jira ee nidaamkayaga ayaa ah sugitaanka ilaa dugsiga sare si aan u bilaabo wax badan oo ka mid ah howlaha muhiimka ah ee nolosha. Waxaan ognahay in dugsiyada sare ee tayada sare leh ee guud aaan dalka oo dhan ay wadada gaarista guusha waxbarashada jaamacadda iyo shaqadabo ee ardayga ay bilaaba xilliga waxbarashada carruurnimada ee hore ECE. Sidaa darteed, fahamka iyo ku dhaqanka hab-dhaqanka saxda ah ayaa horumar heer fasal kasta u keeni karo RMP. Macallin kasta, xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada ee RMP ayaa mas'uul ka shaqaynta inaan u abuurno xaalado ardayda u sahlayaa hab-fikrikan maalin kasta. Cilmi-baadhisa ayaa muujisay in fikradahan, caqiidooyinkan, iyo siyaabahan ayaa qayb ka noqon karaan in ardaydu ay gaadhi karaan hadafkood nololeed.

**Fasalka 2aad ee ECE:** Waxaan ahay arday dadaal badan ugu jiro sidi uu ku gaari lahaa wadaadii waxbarashada jaamacada, iyo shaqo wanaagsan! Waxaan jeclahay inaan tijaabiyo waxyaabo cusub, oo naftayda horumar gaarsiiyo. Waan jeclahay bulshada dugsiga oo waxaan ogahay inay halkan u joogaan inay iga caawiyaan horumarkayga iyo waxbarashadayda. Waxaan bilaabi karaa in aan ka fikiro yoolalka mustaqbalka dhow iyo kuwa fog ee aan rabo in aan gaaro oo waxaanan samayn karaa qorshayaal da'dayda ku habboon si aan u gaaro. Waxaan fahamsanahay xidhiidhka ka dhexeeya dadaalka iyo horumarka aan naftayda u rabo.

**Fasalka 3aad-5aad:** Waxaan ahay guuleyste- Waxaan dejin karaa oo aan ka shaqeyn karaa yoolal waaweyn, qorsheyn karaa inaan guuleysto, oo si joogto ah ula socdo horumarka aan ka gaarayo yoolalkaa nololeed. Waan fahamsanahay sida go'aannadayda maanta ay u saameeyaan noloshayda hadda iyo midda mustaqbalkayga. Waxaan ka fekerayaa waxyaabaha rabitaankayga iyo xiisahayga ah oo waxaanan sheegi karaa qaar ka mid ah waxyaabaha xirfadeed ee i xiisagaliya aniga. Waan jeclahay bulshadayda RMP waxaanan dareemaa nabad inaan muujiyo aragtiyo kala duwan, ka qaybgalo doodaha, oo aan dadka kale la dhexgalo si jacayl iyo ixtiraam ku salaysan. Waxaad fahamsanahay sida loo wajaho khilaafaadka ra'yiga saaxibadayda oo waxaanan dareemaa kalsooni in aan awood u leeyahay in aan tallaabo ka qaado oo aan xalliyo waxyaabaha aniga i khuseeya.

**Fasalka 6aad-8aad:** Waa xilliga aan si qoto dheer u baran lahaa agabyada macluumaadka, mowduucyada, iyo xirfadaha shaqada ee aan aadka u xiiseeyo. Waxaan si fiican uga fikiri karaa sidii aan uga gudbi lahaa caqabadaha dugsiga gudihiisa iyo dibadiisaba si aan nolosheyda u gaarsiiyo guusha shakhsi ahaaneed. Waxaan aad uga warqabaa awoodahayga gaarka ah iyo sida loo isticmaalo si aan u gaaro yoolal waxbarasho oo wax ku ool ah. Marka aan ka gudbo fasalka 8aad, waxaan diyaar u ahay in aan caddeeyo xirfadda shaqada ee xiiseeyo oo aan abuuro qorshe dugsi sare oo la jaan qaadaya xirfadda shaqada ee aan doortay. Waxaan ahay hoggaamiye kalsooni leh iyo wax barte, oo waxaan ogahay in aan masuul ka ahay waxa soo wajaho noloshayda. Waan ogahay in aanan wax walba xakameyn karin, laakiin waxaan xakameyn karaa sida aan uga jawaabo waxyaabahaas, taasina waxay ka dhigeysaa awooddayda mid aan xad lahayn.

**Fasalka 9aad-12aad:** Kani waa wakhtigii aan riyadayda ka dhigi lahaa mid dhab ah - Waxaan ku howlnaa noloshayda xirfadeed ee dugsiga RMP si aan u gaaro wakhtigan! Waxa aan fikirkayga sidii aan u abuuri lahaa qorshe cad oo noloshayda ah ku aadan ka dib waxbarashada dugsiga sare kaas oo la jaan qaadaya rabitaankayga iyo xirfadayda shaqo ee aan rabo in aan ku takhasuso. Waxaan baranayaa oo aan ku dadaalaaya sida aan u heli lahaa shahaadada shahaado takhasuskayga ku aadan ama shahaado aqonsiga uu iga caawinaysa xirfadda shaqo ee aan doortay. Tani waa muhiim sababtoo ah waxay isla markiiba i siinaysaa fursad aan ku helo shaqo wanaagsan taas oo noqon doonta mid waxtar leh aniga oo shaqaynayo oo horumarinayo xirfadaha aan ku gaari lahaa riyooyinkayga. Waan ogahay sida loo qiimeeyo barnaamijyada waxbarashada dugsiga sare ka dib kuwaaso oo i siinaya dheefaha ku habboon wakhtiga maalgashiga aan galinay aniga iyo qoyskaygaba. Had iyo jeer waxaan isku dayaa inaan doorto fursadaha ii fuuraya albaabo badan oo horumar ah. Waxaan ku kalsoonahay awoodayda inaan si madaxbanaan u bilaano oo u helo khibrad iyo waayo-aragnimo ka baxsan mida dugsigayga iyo bulshadayda, sida barashada khibradaha waxbarashada dibadda ah, tababarada shaqo, iyo barnaamijyada horumarinta xirfadayda ee xilliga xagaaga. Ka hor xilliga qalin-jabintayda, waxaan helay koox taageero wax ku ool ah i siinayso oo i caawin karta waxbarashada dugsiga sare

kadib. Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan qaado tillaabooyinka xiga oo waxaan rajo wanaagsan ka qabaa mustaqbalkayga.

**Akadeemiyada Wax-akhriska**
RMP waxay bixisaa barnaamij wax-akhris oo lagu magacaabo Akadeemiyada Wax-akhriska ee RMP kaas oo ku salaysan cilmiga sayniska wax-akhriska si ardaydeena looga caawiyo inay noqdaan wax-akhriyaal wanaagsan oo kalsooni leh. Barnaamijkan waxa loo qaabeeyey Mabaadi'da aasaasiga ah ee soo socota: Taageerada Wax-akhriska ee Shakhsiyeed, Yaraynta farqiga wax-akhriska ee u dhaxeeya ardaydeena sare, iyadoo la adeegsanayo Manhajka Sayniska ee Wax-akhriska, Taageeradda Qoysaska, iyo adeegsiga Tilmaamaha Xogta Ku salaysan. Isticmaalka hababka cilmi-baarista ku salaysan iyo taageerada shakhsiyeed, waxaan ku dadaalnaa inaan horumarino fahamka wax akhriska oo aan wax-akhriska uga dhigno mid xiiso leh ee dhammaan ardayda. Ballanqaadka RMP ee xagga wax-akhriska waa qayb ka mid ah hiigsiga ballaaran si aan u xoojinno arday kasta si uu u gaaro awooddiisa buuxda, oo la siiyay xirfadaha muhiimka u ah mustaqbalkooda.

**Taageerada Shakhsi-ahaaneed**
Waxaan aaminsanahay in arday kasta uu ku kobci karo dhaqan filashooyinka iyo isla xisaabtan sareeya leh. Si loo xaqiijiyo in arday kasta oo dhigta dugsiga Rocky Mountain Prep uu u guulaysto, waxa naga go'an inaan si joogto ah u isticmaalno xogta guusha iyo imtixaanaad iyo barnaamij adag oo Nidaamka Taageerada ee Heerarka Kala Duwan ah (MTSS). Nidaamkeena MTSS wuxuu ardayda siiya taageero heer kala duwan leh si ay u waafaqdo horumarinta baahidooda waxbarasho iyo mida shucuureed ee bulsho.

**Qorshayaasha Waxbarashada Shakhsi ahaaneed:** Macallimiintu waa inay si joogto ah u qiimeeyaan hannaanka waxbaridda iyo waxbarashada oo waa inay horraanta sannad-dugsiyeedka aqoonsadaan ardayda aan samayn horumar ku filan si ay u gaaraan heerarka waxbarasho ee degmada. Macallimiintu waxay dooran karaan inay qorshe waxbarasho oo shakhsiyeed u sameeyaan arday kasta oo aan samayn horumar ku filan si uu u gaaro heerarka waxbarasho ee Degmada. Haddii waalidka ama masuulka sharciga ah ee ardaygu codsado in ardaygiisa loo sameeyo qorshe waxbarasho, markaas macalinku waa inuu horumariyaa oo uu hirgeliyaa qorshaha waxbarashada shakhsi ahaaneed. Qorshe kasta oo waxbarasho shakhsi ahaaneed waa in uu sameeyaan macalinka ardayga iyo/ama shaqaalaha kale ee dugsiga ee ku haboon. Macalinka ardayga waa inuu talooyinka weydiistaa waalidka/masuulka ardayga marka uu samaynayo qorshaha. Waalidiinta/masuulka ardayga waa inay qoraal ahaan ku oggolaadaan inay taageeraan qorshaha, laakiin haddii waalidka/masuulka ardayga ay ku guuldaraystaan inay ka qaybqaataan samaynta qorshaha ama inay qoraal ahaan u oggolaadaan inay taageeraan qorshaha, taasi ma saamaynayso fulinta qorshaha.

Qorshuhu waa inuu wax ka qabtaa baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah ee ardayga. Xeeladaha loo dejin karo si wax looga qabto baahiyahaas waxaa ka mid noqon kara barnaamijyada umeerinta, barnaamijyada dugsiga kadib ah, barnaamijyada waxbarashada xagaaga, barnaamijyo kale oo xoojin ah, iyo xeelado kale oo la xaqiijiyay. Macallimiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay iska kaashadaan samaynta qorshayaashan oo kale iyo inay isticmaalaan xeelado kala duwan oo waafaqsan qaabka iyo baahiyaha waxbarasho ee ardayga. Simistar kasta, ardayda leh qorshooyinka waxbarasho ee shakhsi ahaaneed waa in dib loogu imtixaanaa waxyaabaha uu qorshuhu daboolayo.

**Qaybta 504 ee Xeerka Baxnaaninta ACT**
Qaybta 504 waa sharci madani ah oo heer federal ah kaasoo xaqiijinaaya in ardayda naafada ah ay helaan "fursad lamid ah ardayda kale si ay uhelaan natiijo lamid ah, ayna helaan faa'iido la mid ah, ama ay gaaraan isla heerka guuleed" ee ay gaaraan ardayda asaagood ah ee aan naafada ahayn. Si ay ugu qalmaan adeegga, ardayga waxaa loogudbinayaa iskuduwaha Qaybta 504 ee dugsiga. Kooxda Qaybta 504 ayaa kashiraaya go'aaminta cida uqalanta adeegga. Waalidiinta waa xubno ka tirsan kooxdan. Hadii ardaygu xaq uyeesho adeegga, kooxda Qaybta 504 ayaa go'aaminaaya meesha ardayda lagaynaayo, adeegyada uuhelaayo, iyo caawimaada lasiinaayo si looga caawiyo yaraynta caqabadaha ka imaanaaya naafonimada. Wac dugsigaaga haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah.

**Waxbarashada Gaarka ah**
RMP waxay bixisaa adeegyo joogto ah si ay u daboosho baahiyaha gaarka ah ee ardayda naafada ah ee leh baahiyo fudud iyo baahiyo dhexdhexaad ah. RMP waxay barnaamijyo xarumeed ku leedahay dugsiyada qaar ee ay taageeraan oo ay wada maamulaan Wakaaladda Waxbarashada Deegaanka (LEA) - DPS ama APS. Barnaamijyadan waxaa laga yaabaa in laga galo barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) iyadoo lagu salaynayo baahiyaha gaarka ah ee ardayda.

IEP waxa ay qeexdaa adeegyada waxbarashada ee sida gaarka ah loo nashqadeeyay ee la siin doono ardayda. Waxaana ka mid ah waxbarid ay bixiyaan macalimiin si gaar ah u tababaran oo u shatiyeysan bixinta waxbarashada gaarka ah iyo hawl-wadeennada (ay ku jiraan Dhegooleyaasha/Ardayda Maqalka iyo Aragga Ku Adag). Ardaydu waxay sidoo kale taageero ka heli karaan kalkaaliyayaasha caafimaadka, daryeel-bixiyeyaasha caafimaadka maskaxda, dhakhaatiirta luqadda hadalka, khabiirada maqalka, turjubaanada luqadda dhegoolaha ee waxbarashada, khabiirada farta indhoolayaasha, khabiirada jiheynta iyo dhaqdhaqaaqa, daaweeyayaasha shaqada iyo daaweeyayaasha jirka.

Uqalmida waxaa lagu jaangooyaa nidaam toos ah oo qiimayn ah kaasoo adeegsada shuruudo laxariira naafonimo gaar ah. Inta lagu jiro nidaamkaan qiimaynta ah,qoysaska waxaa lasiinayaa macluumaad la xariira uqalmida ilmahooda iyo dookhyada adeegyada ee ay heli karaan. Hadaad aaminsantahay in cunugaagu uu xaq uleeyahay adeegyada waxbarasho gaarka ah, fadlan laxariir dugsigaaga si aad ucodsato qiimayn arrintaas ku aadan.

## Nidaamyada Tacliinta

**Xeerarka iyo Nidaamyada**
Si loo xaqiijiyo in dhammaan ardayda RMP ay diyaar u yihiin guul-gaaris, waa inay naga go’naataa inaan ka caawino dhammaystirka shaqada ku habboon inta ay joogaan gudaha iyo dibadda dugsiga. U hoggaansanaanta adag ee xeerarka iyo habraacyada soo socda ayaa muhiim ah xaqiijinta in ardaydeenna ay diyaar u yihiin kuleej iyo nolashada ka dambeysa.

| | |
|---|---|
| **Siyaasadda Shaqada Dugsiga** | Shaqada dugsiga waa shay lagama maarmaan u ah waxbarashada ardaydeena. RMP waxay ardayda u dhiibtaa shaqo-dugsiyeed macno leh habeen walba ee fasalada intooda badan (marka laga reebo fasaxyada iyo inta lagu jiro xilliyada imtixaanaadka) si ay u muujiyaan una xoojiyaan xirfadaha fasalka iyagoo la jooga qoysaska, si loo kordhiyo waxbarashada ardayda, iyo korna loogu qaado maareynta wakhtiga. Qoysasku waa inay taageeraan dadaalka ardayda ee shaqada-dugsiga waana inay si |

| | |
|---|---|
| | firfircoon u hubiyaan shaqada dugsiga looga soo dhiibo habeen kasta. Ku guuldaraysiga dhamaystirka shaqada dugsiga waxay u horseedi kartaa cawaaqib iyo/ama faragelin waxbarasho oo dheeraad ah. |
| **Galka PEAK** | Usbuuc kasta ardaygaagu wuxuu guriga keenayaa Galkooda PEAK, kaas oo ay ku jiraan raad-raacayaasha wanaajinta nuxurka tacliimeed ee usbuuca, ka xaadirista dugsiga, iyo akhrinta madaxbannaan. |
| **Wax Akhriska Madaxbanaan** | Habka ugu wanaagsan ee lagu wanaajin karo xirfadaha wax akhriska ardayga waa inuu WAX AKHRIYO, AKHRIYO, WAX AKHRIYO! Ardayda waxaa laga filayaa inay si madax-banaan wax u akhriyaan (ama xubin qoyska ka tirsan wax la akhriyaan) ugu yaraan 20 ilaa 30 daqiiqo habeen kasta. Ardaydu waxay awoodi doonaan inay qaataan Su'aalaha Wax-akhriska (Accelerated Reader) markay dhameeyaan buugaagtooda. Dhammaystirka su'aalaha fahamka waxa ay ka caawin doontaa in ay erayadooda kordhiyaan si ay u gaaraan yoolka ah hal Milyan Eray ee dugsiga hoose iyo hadafka ah gaarista laba Milyan oo Eray ee dugsiga dhexe. Haddii u ilmahaagu u baahan yahay taageero dheeraad ah, fadlan la xidhiidh maamulaha dugsigaaga. |

**Siyaasadda Horumarinta Ardayga**

Iyadoo la isticmaalayo xogta adag iyo kormeerka taxadarka leh ee horumarka, waxaanu si dhow ula socon karnaa oo aanu taageeri karnaa ardayda la dhibtoonaysa waxbarashada. Dugsiga Rocky Mountain Prep waxay raacdaa siyaasada iyo tilmaamaha DPS iyo sidoo kale Xeerka Wax-akhriska (READ Act) iyada oo dugsi-ku-haynta loo tixgelinayo ka xeelad ahaan oo lagu taageerayo horumarka ardayga.

**Siyaasadda Darajaynta/Buundo Siinta**

In kasta oo darajooyinka/buundooyinka aanay ahayn waxa keliya ee tilmaamaya guusha ardayga marka la joogo Dugsiga Rocky Mountain Prep, waxay muhiim u yihiin xiriirada ka dhaxeeya qoysaska iyo macalinka ee ku saabsan waxqabadka ardayga. Maadaama aan nahay dugsiyo leh hadafka udiyaar garowga kuleejka, dalabyadeena tacliineed ayaa muhiim u ah u diyaarinta ardayda inay ku guulaystaan dugsiga sare iyo Kuleejka; sidaas oo kale, waxaa muhiim ah in la cabbiro waxqabadka ardayga isla markaana la bixiyo jawaab celin joogto ah oo ku saabsan imtixaanada, shaqada dugsiga, shaqada fasalka, ka qaybgalka, iyo shaqooyinka kale.

Dhaqanka iyo siyaasadeena qiimaynta waxay ka tarjumayaan fahamka ardayda ee heerarka iyo awoodda ay ku soo saari karaan natiijooyin muujinaya fahamkooda. Waxay sidoo kale ardayda siiyaan fursado badan si ay u helaan jawaab celin ku saabsan shaqadooda, waxayna hirgeliyaan jawaab-celintaas isla markaana horumariyaan waxqabadkooda. Sidaas darteed, celceliska buundooyinka ardaydeenu waxay ka tarjumaysaa shuruudaha gelitaanka kuleejyada waxayna ardayda siisaa faham dhab ah oo ku saabsan horumarkooda ku aaddan aqbalaadda kuleejka, waxayna u oggolaanaysaa ardayda inay kasbadaan buundooyinka qalin-jabinta waqtigeeda ku dhacda.

Intaa waxaa dheer:

- Macallimiintu waxay u samayn doonaan heerar kala duwan oo imtixaano ah, waxay si joogta ah ardayda u siin doonaan jawaab celin qoraal ah oo ku saabsan shaqadooda, waxayna ardayda

siin doonaan fursado badan si ay u hirgeliyaan jawaab celinada kahor inta aysan qiimeynin ku samayn fahamka kama dambaysta ah.
- Qoysaska si joogto ah ayaa loola socodsiin doonaa darajooyinka ilmahooda, oo ay ku jiraan Warbixinnada Horumarka iyo Kaararka Warbixinta. Warbixinada Horumarka waxa la siiyaa ardayda sanadka oo dhan iyadoo ku xiran heerka fasalka. Dugsiga sare, ardaydu waxay helaan warbixinta horumarka ee dheeraadka ah dhamaadka marka la gaaro dhamaadka simistarka 1 iyo 3 kadibna waxay helaan kaarka warbixinta kama dambaysta ah dhamaadka simistar kasta. Dhammaan qoysaska ku jira dugsiyada sare waxay had iyo jeer darajooyinka ilmahooda ka arki karaan Barta Waalidiinta ee Campus Infinite.
- Haddii macalimiinta ama shaqaaluhu ay qabaan walaac weyn, waxaa laga yaabaa inay qabtaan shir ka baxsan shirarka caadiga ah. Haddii qoysasku ay qabaan su'aalo ku saabsan waxqabadka ardayga, waxay la xiriiri karaan macalinkooda si ay u ballansadaan kulan.

**Daacadnimada Waxbarashada**
Dugsiga Rocky Mountain Prep waxaa ka go'an heerarka iyo filashooyinka ugu sarreeya ee daacadnimada tacliimeed ee dhammaan ardayda. Waxaan aaminsanahay in aan samayno jawi dugsi oo kor u qaada anshaxa ardayda xilliga tacliinta iyo wixii ka dambeeya. Dhammaan ardayda waxaa laga filayaa inay isku dayaan intii karaankooda ah, inay shaqadooda qabsadaan, tixraac sameeyaan marka ay shaqo dadka iska leh isticmaalaan, iyo inay si daacadnimo ku jirta uga jawaabaan baahida waxbarasho ee koorso kasta. Marka ardaygu ku guuldareysto inuu ilaaliyo heerarkan, daacadnimada tacliimeed ayaa qiilqiil galaysa.

Daacadnimo la’aanta tacliinta, oo ay ku jiraan qishka iyo been-abuurka, waxay sababi doonaan in ardayga loo gudbiyo maamulaha si wax looga qabto arrimahaas la xiriira daacad-darrada tacliinta ardayda ayaana mas'uul ka noqon doonaan shaqada kabista ah. Ardaydu wax buundooyin ah ka ma heli doonaan shaqo tacliineed oo aan si sax ah uga tarjumaynin fahamkooda aqooneed iyo xirfadeed. Go'aannada ku saabsan abaal-marinta buundada marka ay soo baxaan xaaladahan waxaa lagu saleeyaa go'aanka dugsiga. Dhacdooyinka soo noqnoqda ee daacadnimo darada tacliimeed ah waxay sababi doonaan kulan loogu yeeri doono waalidka/masuulka ardayga iyo cawaaqib dheeraad ah.

# Cutubka Lixaad: Siyaasadaha Dugsiga

## Campus/Kaambas La Xirey

Dugsiga Rocky Mountain Prep waa xarun xiran, taas oo ay tahay in dhammaan ardayda ay ku sugnaadaan gudaha kaambaska sida uu qeexay dugsigu marka laga reebo haddii uu kormeerayo xubin ka tirsan shaqaalaha. Ardayda dugsiga sare waxa laga yaabaa inay helaan mudnaan ah inay ka soo qadeeyaan meel ka baxsan kaambaska sida uu dugsi walba faray. Soo-booqdayaasha waxaa laga yaabaa in loo oggolaado inay soo galaan gudaha dhismaha iyaga oo uu la socdo shaqaalaha hawlgallada. Soo-booqdayaashu waa inay haystaan sabab ay u joogaan dhismaha dugsiga, waa in uu la socdo xubin shaqaalaha ka tirsan mar kasta, waxaana looga baahan doonaa in ay is diiwangeliyaan oo qoraan xogtood saxda ah oo ay dhamaystiraan hubinta amniga si loo xaqiijiyo in ay lahayn wax khatar amni ah. Markay la joogo kambaska, ardaydu waa inay had iyo jeer ku jiraan fasalka oo ay la socdaan kormeere qof weyn ah.

Si loo xaqiijiyo badbaadada ardayda inta lagu jiro xilliyada imaatinka iyo xilliyada galbashada (wakhtiyada ugu dhaqdhaqaaqa badan ee maalinta), ardayda iyo qoysaska looma ogolaan doono inay soo galaan dhismaha wax ka badan nus saac kahor xilliga imaatinka ama nus saac kahor xilliga galbashada. Haddii qoysasku doortaan inay yimaadaan wakhtigan, waxay u baahan doonaan inay dibadda la joogaan ardaydooda ilaa albaabadu ka furmaan. Ardeyda ay tahay in ay goor hore ka baxaan kaambaska waa in uu kaxeeyaa waalidka/masuulka ama qof u idman oo wata aqoonsi sawir leh sida ka muuqata barta Infinite Campus.

Waxay shuruucda dugsiga Rocky Mountain Prep u baahan tahay haddi wakhti kasta ardaygu goor hore baxayo, waa in uu soo qaadaa qof weyn oo idman oo ka diiwaangashan nidaamka Infinite Campus. Ardayda ***looma*** oggolaan doono inay iska baxaan xaalad kasta ha ahaatee ama la siiyo fasax ay ku aadan guriga goor hore maalintaas iyagoo wicitaan taleefon ku codsanaayo sidaas.

## Siyaasadda Booqdaha

Soo-booqdayaasha, gaar ahaan qoysaska, waxay muhiim u yihiin bulshada Rocky Mountain Prep. Waxaanu u soo dhawaynaynaa ka mutadawac ahaan. Si loo xaqiijiyo badqabka ardaydeena iyo shaqaalaheenna, shakhsiga raba in uu si joogto ah mutadawac u noqdo in ka baxsan ilmahiisa, ama keligiis looga tagi doono ardayda, waxaa looga baahan yahay in uu buuxiyo codsiga mutadawacnimada iyo inuu maro baaritaanka taariikhda oo ay samayso maamulka gobolka. Marka la ansixiyo, booqdayaashu waa inay saxeexaan diiwaanka marka ay soo galayaan ama ka baxaan xafiiska hore waana inay xirtaan calaamada booqdaha inta ay ku jiraan booqashadooda. Booqde kasta oo aan iska xaadirin xafiiska, ama lagu arko gudaha dhismaha fasax la'aan ama isagoon haysan kaarka booqdaha, waxaa laga codsan doonaa inuu isla markiiba ka baxo dhismaha.

Qoysaska ardayda dhigata dugsiga xannaanada carruurta waa inay had iyo jeer soo galaan dhismaha si ay ardayda uga xaadiriyaan ugana kaxeeyaan fasaladooda. Waa lagu soo dhawaynayaa inay joogaan ilaa waxbarashadu ka bilaabmayso, bilawga sanadka iyo wixii ka dambeeyaba. Walaaca kala tagida waa wax caadi u ah carruurta jirta da'da dugsiga xannaanada, qoysaskana waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la shaqeeyaan macallinka ilmahooda si ay u helaan xalka ugu fiican haddii ardaygu la kulmo walaaca kala-taga. Xalka waxaa ka mid noqon kara in qoyska keenaan ilmaha kadibna ay iskaga tagaan, laakiin waxaa loo go'aamin doonaa kiisba-kiis iyadoo loo eegayo xaalada gaarka ah ee ardayga. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan eeg buug-gacmeedka qoyska ECE.

## Xaaladaha Degdega ah ee Ardayda iyo Macluumaadka Xiriirka Qoysaska

Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waa inay la xiriiraan xafiiska taageerada iyagoo isticmaalaya taleefan ama u tagaya qof ahaan. Marna waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah lama xiriiri karaan ardayda iyagoo ku jira fasaladooda, oo ay ku jiraan hawlaha dugsiga kadib la qabto, ama inay isku dayaan in ay ardayda kala baxaan dhismaha iyaga oo aan ogeysiinin ogolaanshana ka helin shaqaalaha xubnaha xafiiska taageerada.

Haddii xaalad degdeg ah oo caafimaad ay ku dhacdo arday jooga dugsiga, gargaarka degdegga ah ayaa loo fidin doonaa oo waalidka(iinta)/masuulka(iinta) ardayga ayaa isla markiiba lala xiriiri doonaa. Haddii waalidka(iinta)/mas'uulka(iinta) aan la heli karin , qof ku qoran foomka caafimaadka ardayga (ama kaarka xiriirada degdega ah) ama dhakhtarka qoyska ayaa lala xiriiri doonaa. Dugsigu wuxuu wici

doonaa Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah (911) haddii xaaladdu ay sidaas noqoto. Gargaarka degdega ah ayaa loo bixin doonaa hadba sida loogu baahdo. **FADLAN CUSBOONAYSII MACLUUMAADKAAGA XIRIIRKA ee yaala xafiiska si aan u awoodno inaan kula soo xiriirno.**

**Fadlan ogow in RMP aysan ilmaha ka celin karin waalidka ama mas'uulka ku qoran IC. Haddii aad haysato Amar Maxkamadeed oo loogu diidayo waalid ama masuul inuu ilmaha ka kaxeeyo ama keeno dugsiga, fadlan xafiiska la wadaag nuqulka amarkaas oo qareenkeena guud ayaa dib u eegis ku samayn doona.**

Intaa waxaa dheer, xitaa haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, waxay shuruucda dugsiga Rocky Mountain Prep u baahan tahay haddi wakhti kasta ardaygu goor hore baxayo, waa in uu soo qaadaa qof weyn oo idman oo ka diiwaangashan nidaamka Infinite Campus. Ardayda ***looma*** oggolaan doono inay iska baxaan xaalad kasta ha ahaatee ama la siiyo fasax ay ku aadan guriga goor hore maalintaas iyagoo wicitaan taleefon ku codsanaayo sidaas.

## Habraacyada Xaaladaha Degdega ah

Marka la joogo RMP, badbaadada ardaydeenu waa mudnaanta koowaad. Waxaanu leenahay qorshayaal faahfaahsan oo loogu talagalay xaaladaha degdegga ah waxaana shaqaalaheenna ku tababarnay sidii ay uga jawaab celin lahaayeen xaaladaha kala duwan ee imaan kara, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn dabka, duufaannada, xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka, argagixisanimada, cilladaha isticmaalka qalabyada, khataraha amniga dibadda dhismaha dugsigeena ah, iyo dadka duumashaal ku soo gala dhismaha.

Sababo amni awgood, RMP ma sii dayso habraacyadeena faahfaahsan ee loogu talagalay xaaladaha degdegga ah. Hoos waxaa ku yaala guudmar heer sare ah oo ku saabsan xaaladaha degdegga ah ee shaqaalaheenna loo tababaray inay wax ka qabtaan.

| Xaalada | Guudmarka | Hab-maamuuska isgaarsiinta |
|---|---|---|
| **Qabasho** | Haddii ay jirto khatar la dareensan yahay inay ka jirto meel ka baxsan dugsiga, dariiqyada waa la baneeyaa oo dhammaan ardayda iyo shaqaaluhu waxay baneeyaan dariiqyada waxayna galaan qolalka ama agagaarka qolalka waxayna hawshooda u sii wataan sidii caadiga ahayd. | Kadib marka lala xiriiro maamulada, hogaamiyayaasha dugsigu waxay guryaha u soo diri doonaan ogeysiis isla markiiba. |
| **Sugid** | Haddii ay jirto khatar la dareensan yahay inay ka jirto meel ka baxsan dugsiga, dhammaan ardayda iyo shaqaalaha ayaa loo wareejinayaa gudaha, dhismaha waa la sugayaa, waxaana la ogeysiinayaa maamulada arrinta ku habboon. | Kadib marka lala xiriiro maamulada, hogaamiyayaasha dugsigu waxay guryaha u soo diri doonaan ogeysiis isla markiiba. |
| **Xiritaan** | Haddii uu jiro qof dhuumashaal u soo dhex gelay dhismaha, ardayda iyo shaqaalaha waxaa loo | Kadib marka lala xiriiro maamulada, hogaamiyayaasha |

| | | |
|---|---|---|
| | wareejin doonaa meelo ammaan ah oo xiran oo gudaha dhismaha dugsiga ah iyadoo la ogeysiinayo maamulada ku habboon. | dugsigu waxay guryaha u soo diri doonaan ogeysiis isla markiiba. |
| **Daad-gureyn** | Marka loo baahdo, habraacyada daadgureynta ayaa isla markiiba la raacaa si loo xaqiijiyo in dhammaan ardayda si degdeg ah oo badbaado leh uga baxaan dhismaha. Ku tababarashada xaaladaha noocaas ah waxaa la sameeyaa bishiiba mar. | Marka dhammaan ardayda iyo shaqaalaha si badbaado leh loo daadgureeyo, qoysaska ayaa isla markiiba lala xiriiri doonaa, oo ay ku xigto la xiriirista hadba sida ugu habboon. |
| **Hoy** | Haddii ay dhacdo xaalad la xiriirta cimilo xun/duufaan, waxaa la raacaa habraacyo si ardayda loogu wareejiyo meelo sugan oo ka fog daaqadaha ilaa ay cimiladu ka roonaadaan. Ku tababarashada xaaladaha noocaas ah waxaa la sameeyaa simistarkiiba mar. | Marka cimiladu hagaagaan, qoysaska waxaa loola xiriiri doonaa hadba sida loogu baahdo. |

## Siyaasadda Takoor La'aanta

Waa siyaasadda Rocky Mountain Prep in la shaqaaleysiiyo, la tababaro, wax la baro, la dalacsiiyo, oo la maamulo dhammaan shaqaalaha iyo ficillada edbinta iyada oo aan loo eegin jinsiyad, diin, jinsi, dookh jinsi, da'a, asal qaran, naafanimo, baahida adeegyada waxbarashada gaarka ah, Xaaladda guurka, isticmaalka gargaarka dadweynaha, ama xaalad kasta oo kale oo uu ilaaliyo sharciga. Uma dulqaadan doono takoorid nooc kasta ha ahaatee, dhaqan kasta oo noocaas ahna waa mamnuuc. Dugsigu waxaa uu sidoo kale mamnuucayaa nooc kasta oo edbin ah ama aargoosi ah oo qofka loogaga aargoosanayo ka warbixinta dhacdooyinka.

Waxaan ku faanaa inaan nahay shabakad dugsiyo oo loo dhan yahay oo qiimeeya dhammaan aqoonsiyada iyo aragtiyada kala duwan. Sidan oo kale, ma ahan wax aan caadi ahayn in fasallada ay ka hadlaan arrimaha la xiriira jinsiyadda, nooca galmada, xuquuqda aadanaha, caddaaladda, iyo takoorka. Waxaan aaminsanahay in wada-hadalladan ay siinayaan ardayda faham qoto dheer oo ku saabsan caddaaladda bulshada, iyada oo loo diyaarinayo inay noqdaan muwaadiniin naxariis iyo mas'uuliyad leh.

## Siyaasadda Cabashada

RMP waxay qiimeysaa xiriirka furan ee xubnaha bulshadeena, oo ay ku jiraan waalidiinta, ardayda, macalimiinta, shaqaalaha, maamulka, iyo guddiga. Arrimaha aan sida tooska ah wax looga qaban waxay noqon karaan kuwo wax u dhimaya bulshada dugsiga, sidaas darteed, saamayn ku yeelanaya habka wax-barasho ee ardaydeeda. Habraacyada RMP waxaa loo qaabeeyey inay taageeraan xallinta degdegga ah ee sinnaanta ku jirto ee khilaafyada/is-afgaran waaga laga soo bilaabo heerarka maamuleed ee ugu hooseeya ee suurtogalka ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Siyaasadda Cabashada ee ugu dhambeeyay, fadlan booqo Bogga isla-xisaabtanka websaydkeena rockymountainprep.org.

## Hababka Xidhiidhka Dugsiga iyo Qoysaska Ardayda

| | |
|---|---|
| **Wicitaanada Taleefanka** | Marar badan oo sannad dugsiyeedka oo dhan, waxaad heli taleefan ama qoraalo ka heli doonta macalin ama xubin kale oo shaqaalaha ah. Haddii fariintu u baahan tahay jawaab celin, fadlan kala xidhiidh dugsiga telefoon ahaan ama qoraal ahaan muddo 24 saacadood gudahood. |
| **Fariin Qoraalleed** | Dugsigu waxa uu soo diri doonaa fariimo dugsiga oo dhan ah iyo/ama xasuusin qoraal ah oo ku qoran luuqadda guriga qoyska iyada oo loo marayo madal qoraaleed laba-geesood ah (kambas kastaa waxa ay isticmaali kartaa madal kale, fadlan la tasho maamulahaaga si aad wax badan uga ogaato). Waxay qoysaska farriimaha ku heli karaan hab qoraal iyo/ama ama ay kala heli karaa ablikeeshinka ay lasoo dagaan. |
| **Ka Warbixinta Habdhaqanka** | Qoysaska ay ardaydoodu dhigato dugsiga hoose waxay heli doonaan warbixino la xiriira habdhaqanka/akhlaaqda ardaydooda iyadoo la isticmaalayo ablikeeshin loo yaqaan Class Dojo. Fadlan ablikeeshinkan si lacag la'aan ah ugala soo deg app store-ka oo xaqiiji inaad oggolaato helitaanka ogeysiisyada.<br><br>Qoysaska ay ardaydoodu dhigato dugsiga sare waxay heli doonaan warbixino la xiriira habdhaqanka/akhlaaqda ardaydooda iyadoo la isticmaalayo ablikeeshin loo yaqaan Dean's List. Si aad dib ugu eegto xiriirka iyo horumarka habdhaqanka iyada oo loo marayo barta/bogga waalidiinta, waa inaad ablikeeshinka kala soo degtaa app store-ka. |
| **Warside/War gays** | Dugsigu waxa uu guriga u soo diri doonaa warside faahfaahin ka bixinaya dhacdooyinka soo socda, xasuusinta, iwm. Inta badan wargeysyadani waxay ahaan doonaan kuwo onlayn ah waxaana lagu soo diri doonaa madasha s'more. Qoysasku waxay ku heli karaan qoraal, iimayl, ama waxay nuqullo ka mid ah ka codsan karaan xafiiska caawinta. |
| **Iimayl** | Haddii aad heli karto iimaylka guriga ama taleefanka gacanta, oo aad jeclaan lahayd inaad iimaylka u isticmaasho xiriirka lala yeesho dugsiga, fadlan u sheeg xafiiska taageerada. |
| **Kulamada** | Haddii dugsigu codsado kulan lala yeesho adiga iyo ilmahaaga, arin muhiim ah waa in laga wada hadlaa. Qoysasku waxay xor u yihiin inay codsadaan la kulanka macallimiinta ama maamulayaasha mar kasta oo loo baahdo. Qoysasku waa inay had iyo jeer isku dayaan inay la kulmaan oo la shaqeeyaan macalinka ardaygooda marka hore. Haddii aad u baahan yihiin taageero dheeraad ah qoysasku waxay codsan karaan inay la kulmaan kaaliyaha maamulaha. Kulamada lala yeesho maamulaha waa in la codsadaa kadib marka qoysasku ay la soo kaashadeen lana soo xiriireen macalinka iyo kaaliyaha maamulaha. Fadlan si toos ah ula xiriir ama xafiiska taageerada si aad ballan u qabsato. |

| | |
|---|---|
| **Possip** | Bishii hal mar, wuxuu dugsigu soo diri doonaa xog-uruurin onlayn ah oo ku aadan ku qanacsanaanta adeegyada dugsiga. Qoysasku ayaa wadaagi kara jawaab-celintooda iyo ama khibrahooda toogan ee ku aadan adeegyada dugsiga. Hogaamiyayaasha dugsiyadu ayaa wadaagi doonaan tillaabooyinka xiga iyo isbeddellada loo baahan yahay kuwaas oo ku dhici doona Xilliga Kullamada Qoyska, lagu doono wargeysyada, ama loo diri doona guddiyada ay qoysku maamulaan. |

## Diiwaangelinta

Iyadoo qayb ka ah diiwaangelinta, waalid/mas'uul kastaa wuxuu u buuxiyaan Diiwaangelinta Onlaynka ah ee ilmahooda. Diiwaangelintaan waxa ku jira qaar ka mid ah Ogolaanshooyinka iyo Siidaynta Waalidka. RMP waa dugsi dadweyne oo jaatar ah oo ay ansixiyeen DPS iyo APS; Markaad ilmahaaga ka diiwaangelinayso RMP waxaad fahantay oo aad oggolaanaysaa in dhammaan macluumaadka diiwaangelinta iyo ogolaansho bixinta waalidka/masuulka, oggolaashooyinka, iyo sii daynta la buuxiyey inta lagu guda jiro Diiwaangelinta Onlaynka ah ayaa sidoo kale khuseeyaan RMP.

## Sii Deynta Sawirada iyo Macluumaadka Kale

Dugsiga Rocky Mountain Prep wuxuu si marmar ah guusha ardayga, nolosha dugsiga, iyo dhacdooyinka dugsiga loogu soo bandhigi doonaa websaydka dugsiga, warbaahinta bulshada, iyo daabacadaha kala duwan, si loo sameeyo wacyigelinta diiwaangelinta, xiriirka dadweynaha, iyo isticmaalka kale ee kor loogu qaadayo/lagu xayaysiinayo dugsiga. Dugsigu waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu helo codsiyada warbaahinta si markaa si guud loo sheego dugsiga iyo ardaydiisa. Inta lagu jiro hannaanka jiheynta, waalid/masuul kasta waxaa la siin doonaa foomka Oggolaanshaha Sawirka/Macluumaad Ardayga, oo hoos ku taxan. Dugsigu waxa uu ixtiraami doonaa foomamkan, sida in sawirada ardaydu lagu daro daabacadaha kaliya haddii waalidka/mas'uulka ay oggolaadaan.

## Jadwalka & Xiritaanka Dugsiga

Dugsiga Rocky Mountain Prep wuxuu raacaa Denver Public Schools (DPS) iyo Aurora Public Schools (APS) (gaar ahaan RMP Fletcher) marka dugsiyada loo xirayo sababo la xiriira cimilada. Si kastaba ha ahaatee, jadwalka Dugsiga Rocky Mountain Prep had iyo jeer ma waafaqsana kalandarka/jadwalka Denver ama Aurora Public Schools. Ardayda ayaa wali laga filayaa inay ku jiraan dugsiga xitaa marka Denver Public Schools ama Aurora Public Schools aysan furnayn/casharo qaadanayn. Fadlan ka hel jadwal dugsiyeedkaaga adiga oo booqanaya websaydkeena rockymountainprep.org.

## Safarrada, Dalxiisyada, iyo Fursadaha Waxbarashada ee Bannaanka Loo Aado

Safarada bannaanka, dalxiiska, iyo fursadaha waxbarashada dibadda waa qayb ka mid ah waxbarashada ardayda ee RMP waxayna ardayda siiyaan fursado badan oo waxbarasho oo aan ka jirin fasalka. Waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah waxay fahamsan yihiin in ka qaybqaadashada safar kasta oo bannaanka loo aadayo ama fursad waxbarasho oo bannaanka ah ay ilmahooda u soo bandhigi karto khataro, oo ay ku jiraan shilal, waxyeello, khasaare ama dhaawac waxayna fahamsan yihiin in RMP aysan mas'uuliyad ka saarnayn khatarahaas. Warqadaha ogolaanshaha safarka bannaanka loo aado ayaa loo diri doonaa guriga kahor intaan la aadin safar kasta, ardayguna kama qayb qaadan karo safarkaas marka laga reebo haddii warqadda ogolaanshaha oo saxeexan la soo celiyo. Waalidiinta/masuuliyiinta ardayda ee qaba su'aalo ku saabsan siyaasadaha safarada bannaanka

ah waa in ay la hadlaan maamulaha dugsiga, su'aalaha ku saabsan safar gaar ah waa in loo diraa/la weydiiyaan macalinka/xubnaha shaqaalaha ah ee hogaaminaya safarkaas bannaanka loo aadayo.

## Gaadiidka

Dugsiga Rocky Mountain Prep wuxuu bixiyaa adeegyada baska iyadoo loo marayo adeeg-bixiyayaasheea gaarka ah, DS Bus Lines, baskaas oo aadaya meelaha soo socda: RISE, GVR, Noel, Sunnyside, iyo Berkeley. Dugsiga Rocky Mountain Prep Creekside wuxuu bixiyaa adeegyada baska iyada oo loo marayo DPS Transportation. Rocky Mountain Prep Fletcher waxay bixisa adeegyada basaska si oo aada kaliya meelaha la doortay oo ay bixiyaan APS Transportation.

Rocky Mountain Prep waxay ku dadaashaa in ay qoysaska dugsiyadeena ay siiso gaadiid kuwaas oo aan haysan hab kale oo ay ardaydooda ku geeyaan kana soo qaadaan dugsiga. Dhammaan waalidiinta xiisaynaya dugsiyada xaga sare lagu sheegay waa in ay iska diiwan geliyaan xafiiska hore ee dugsigooda iyaga oo go'aankooda ku salaynaayo boosteejooyinka baska ee hore loo diyaarisayay. Boosaska ka bannaan baska waa kuwo aad u xaddidan oo haddii la helo codsiyo ka badan inta uu baska qaadi karo, ardayda u qalanta waxaa lagu kala saari doonaa bakhtiyaa-nasiib. Qoysaska ay ardaydoodu raacaysa baska waa inay yimaadaan meesha baska laga raacayo shan daqiiqo kahor wakhtiga loo asteeyay qaadista ama keenista.

Ardayda dhigta dugsi isla markaana leh qorshaha IEP oo hela adeegyada gaadiidka iyadoo la isticmaalayo qorshahaas waxay adeegyadaas ka heli doonaan maamulka dugsiga.

Ardayda dhigato heerka ECE xaq uma laha inay raacaan baska ilaa ay u qalmaan Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee DPS.

## Daawooyinka & Xasaasiyadaha

Haddii ilmahaagu u baahan yahay dawo inta lagu jiro saacadaha dugsiga, waa inaad daawadaas oo ku jirta weelka asalka ee farmashiga loogaga soo qaaday si toos ah ugu keentaa kalkaalisada waana in weelkaas lagu qoraa magaca ilmaha, magaca dawada, qadarka qiyaasta/dooska la siinayo, inta jeer/maalintii ee la siinayo, iyo taariikhda daawadu tahay in la joojiyo (haddii ay khuseyso). Daawada sidoo kale waa in lala keenaa foomka Ogolaanshaha Daawada oo dhamaystiran (kaaso laga heli karo xafiiska taageerada ee dugsiga ama kalkaalisada dugsiga), foomkaas oo ay buuxinayaan isla markaana ay saxiixayaan waalidiinta/mas'uuliyiinta iyo dhakhtarka **- daawada haku soo ridin boorsada dhabarka ee ardaygaaga.** Dhamaan daawooyinka waxa lagu hayaa kabadh qufulan lamana siin karo arday iyada oo aan la helin foom sax ah. Intaa waxaa dheer, shaqaaluhu waxay u bixin karaan daawada keliya sida ku qoran calaamadda iyo/ama tilmaamaha dhakhtarka.

Haddii ilmahaagu qabo xasaasiyad, xannibaad cunto, ama dookhyo cunto, fadlan ku qor foomamka diiwaangelinta (ama foomamka ku habboon ka codso xafiiska taageerada ee dugsiga ilmahaaga) una ogeysii shaqaalaha dugsiga ee ku habboon inta lagu jiro jiheynta qoysaska cusub. Marka aad ogeysiiso, dugsigu wuxuu kaala shaqayn doonaa daboolista baahiyaha ilmahaaga iyo xaqiijinta badbaadadooda. Dukumeentiyada caafimaad ayaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqdaan, qoysaska ayaana waxay mas'uul ka yihiin bixinta dawooyinka degdega ah ee lagama maarmaanka ah ee laga yaabo inay ilmahoodu u baahdaan (ie, EpiPen). Kalkaalisada dugsiga, maamulaha dugsiga iyo waalidka/masuulka ayaa si wada jir ah uga shaqayn doona sidii ay u samayn lahaayeen qorshe ku aadan xaaladda

caafimaadka degdega ah ee xasaasiyadda. (sida, siinta EpiPen, haddii loo baahan yahay oo lagu soo gudbiyo foomka caafimaadka). Waalidiinta/masuuliyiinta ardayda ayaa mas'uul ka ah inay u sheegaan dugsiga haddii ay jiraan wax isbeddel ah oo ku yimid xasaasiyadda ama baahiyaha daawaynta ee ilmahaaga. Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waxa laga rabaa inay dawooyinka ka qaadaan dugsiga maalinta u dambaysa ee dugsiga. Kadib maalinta ugu dambaysa ee dugsiga, dugsigu wuxuu tuuri/qubi doonaa daawooyinka iyadoo la raacayo siyaasadda DPS/APS.

## Tallaalida Ardayda

Sida uu dhigayo siyaasadda Denver Public Schools, ardayna looma oggolaan doono inuu dhigto ama sii wato dhigashada dugsi ku yaala degmadan isaga oo aan buuxin shuruudaha sharciga ah ee tallaalka cudurrada marka laga reebo haddii uu ardaygu haysto ka-dhaafid ansax ah oo la xiriirta sabab caafimaad, diimeed, shakhsiyeed ama sababo kale sida uu sharcigu dhigayo.

## Ciyaaraha

Ka dugsiga RMP ahaan, waxaan fahamsanahay xirfadaha nolosha ee qiimaha leh iyo fursadaha dhisidda hab-dhaqanka ee uu ciyaaruhu keeni karo. Innaga oo bixinayna nidaam isboorti oo habaysan, RMP waxay higsanaysaa inay dhisto hab firfircoon oo ku wajahan fayo-qabka guud ee ardayda. Dhaqdhaqaaqa jireed kaliya muhiim uma ah kor u qaadida qaab nololeedka caafimaad laakiin sidoo kale waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan horumarinta shucuureed iyo maskaxeed ee dadka da'da yar.

Waxay RMP fahamsan tahay in guusha dhabta ah ee ciyaaraha isboortiga iyo nolosha ay u baahan tahay in la yeesho hadafyo cad iyo rajooyin wax ku ool ah oo la wadaago. Waxaa ujeedada ciyaaraha ee RMP ay tahay inay abuurto jawi taageero ah oo kor u qaadaya korriinka, wada shaqaynta kooxeed, iyo anshaxa guud. Macallimiinta, waalidiinta, iyo maamulayaasha ayaa si wanaagsan u wada shaqeeyo sidii loo hubin lahaa in barnaamijka ciyaaraha fudud uu waafaqsan yahay Qiyamka PEAK ee aan wadaagno iyo hadafkeena waxbarasho.

**U-qalmitaanka Ciyaaraha**

- Waxay dugsiyada sare ee RMP raacaan heerarka RMP ee ka qaybgalka ciyaaraha iyo tilmaamaha Colorado High School Activity Association ee ku aadan u-qalmitaanka. Dugsi kasta oo dhexe iyo sare wuxuu leeyahay qorshe u-qalmitaan oo si gaar ah loogu talagalay dugsigaas iyadoo lagu salaynayo hab-raacyada la xiriira barnaamijyada la hawlgala. Qorshaha u-qalmitaanka waxaa waalidiinta/masuuliyiinta iyo ardayda la socodsiin doona agaasimaha ciyaaraha ee kambaska iyo tababarayaasha ka hor xilli kasta.
- Liiska u-qalmitaanka ayaa waxaa soo diyaarinaya todobaad kasta Agaasimaha Ciyaaraha.

**Baaritaanada Jirka**

Kahor intaanay ka qaybqaadan ciyaar kasta oo tartan ah sannad kasta, dhammaan ardayda waa inay maraan baaritaan jireed oo rasmi ah oo uu sameeyo dhakhtar shahaado haysta oo ardaydu waa inay helaan oggolaansho ay kaga qaybgalayaan jimicsiyada, tababarada, iyo tartanada la xiriira hawlaha ciyaaraha. Waxaa lagu talinayaa in qoysaska ay qorsheeyaan baaritaanada jireed ee ilmahooda xilliga xagaaga si ay ardaydu u helaan jir dhisan oo sax ah inta lagu jiro sanad dugsiyeedka oo dhan. RMP waxay xaq u leedahay inay uga baahato arday kasta inuu keeno shahaada baaritaanka jireed. Xitaa haddii ardaygu ka qaybqaatay ciyaaraha fudud ee RMP sannadihii hore, baaritaan jireed oo cusub ayaa loo baahan yahay.

**Kharashka Ka Qeybqaadashada Ciyaaraha Isboortiga ee Dugsiga Dhexe iyo Dugsiga Sare**
Si loo sii wado in kaambaska laga dhiso kooxooyin adag, koox kastaa waxay soo saari doontaa kharashka ka qaybgalka oo keliya laga qaadi doono ardayda lagu daray liiska. Ardayda Dugsiga Dhexe iyo Dugsiga Sare waxay bixin doonaan kharashka isboortis/ciyaar kasta. Kharashkaan wuxuu daboolayaa bixinta kharashaadka saraakiisha, qalabyada, funaanadaha, gaadiidka, iyo alaabta kale ee lagama maarmaanka u ah in maamulitaanka koox. Tababaraha ilmahaaga ayaa guriga u soo diri doona fariin ku saabsan foomamka loo baahan yahay in la soo gudbiyo iyo sidoo kale kharashka la iska rabo si loo helo u-qalmitaanka loo baahan yahay si loogu tartamo ciyaaraha. Qoysasku waxay awoodi doonaan inay bixiyaan lacag caddaan ah, jeeg, ama kaarka kiridhitka. Haddii aadan awoodin inaad bixiso khidmadda ka qaybgalka ciyaaraha fudud xilliga la iska rabo, fadlan la xiriir kooxdaada maamulka kambaska si aad u hesho qorshayn iyo taageero.

Kharashka Ka-qaybgalka Ciyaaraha Isboortiga ee Ardayga Dugsiga Sare - $90
Kharashka Ka-qaybgalka Ciyaaraha Isboortiga ee Ardayga Dugsiga Dhexe - $50

Ardayda ciyaartoyda ah ee ka qaybqaadanaya ciyaaro isboorti badan waxa kaliya laga rabaa inay bixiyaan kharashaadka laba ciyaar isboorti. Qoysaska leh ciyaartoy badan ayaa bixin doona kharashka ugu badan kaas oo aan ka badnayn $270, qoyskiiba.

**Gaadiidka Ardayga Ciyaartoyda Ah**

**Dugsiyada Sare**
Ardayda iyo kooxda ciyaartoyda ah waxaa la siin doona adeegyada gaadiidka ee howlaha ama munaasabadaha ciyaaraha/tartamada ka baxsan Aagga magaalada ee Denver/Aurora ama meelaha dugisga ka fog illaa 45 daqiiqo. Ciyaartoyda iyo kooxaha leh howlaha ciyaaraha ama munaasabadaha ciyaaraha/tartamada ee gudaha aagga magaalada ee Denver/Aurora ayaga mas'uul ka ah kharashaadka gaadiidkooda.

**Dugsiga Dhexe**
Lama daboolo kharashyada adeegyada gaadiidka howlaha ciyaaraha ah ama munaasabadaha ciyaaraha/tartamada ciyaaraha dugsiga dhexe ee gudaha ciyaaraha horyaalka gobolka ama munaasabadaha dhacaya maalinta Sabtida ah. Adeegyada gaadiidka ayaa la bixin doonaa ee munaasabadaha ciyaaraha ama howlaha ciyaaraha ee ka baxsan ciyaaraha horyaalka gobolka ee wax ka badan 30 daqiiqo u jira dugsiga inta lagu jiro maalimaha toddobaadka.

**Anshaxa Ardayda Ciyaartoyda Ah**
Annaga oo xoogga dardar galinayno mabaadi'da isla-xisaabtanka iyo is-wacyigelinta, sharciyadan ayaa ardaydeenna ku beeraysaa mas'uuliyadda ay ku dhowraan ballanqaadkooda gudaha dugsiga iyo dibaddaba. Taageerida nidaamka tartanka ee tooogan, waxaan ku dadaalaynaa inaan kobcino deegaan teegaaraya korriinka iyo wada shaqaynta kooxeed anagoo hubinayna badqabka iyo taageerada ka qaybgale kasta. Matrix anshaxa ciyaaraha ee RMP ayaa hoos ku qoran.

**Ciyaartoyda Dugsiga Dhexe iyo Dugsiga Sare:**

**Ka eryida Gudaha Dugsiga:**

- Ardayda ciyaartoyda ah ayaa seegi doonaan tababarada/ciyaaraha inta lagu jiro muddada ka joojinta ciyaaraha iyo wax aan ka yarayn laba maalmood oo dheeraad ah oo ganaax ah ka dib muddada ganaaxa (kuma jiraan maalmaha Axada ah).

**Eryida Dugsiga Ka baxsan:**

- Ardayda ciyaartoyda ah ayaa seegi doonaan tababarada/ciyaaraha inta lagu jiro muddada ka joojinta ciyaaraha iyo wax aan ka yarayn laba maalmood oo dheeraad ah oo ganaax ah ka dib muddada ganaaxa (kuma jiraan maalmaha Axada ah).

**Soo-xaadirista Dugsiga**

- Marka la joogo xilli ciyaareedkaa ardayda ciyaartoyda ah waa inay xaadiraan ugu yaraan kala badh ka mid ah fasalladooda waxbarashada maalinlaha ah si ay ugu qalmaan inay u tartamaan ama ay tababarka qayb uga noqdaan maalintaas.
    - Xaaladaha qaarkood shuruudaha waa laga dhaafi karaa ardayda u qalma ee wajaho xaaladaha maqnaanshaha ee tacsida, booqashooyinka kuleejka iyo/ama xaaladaha baahiyaha waajibaadka diineed.
- Ardayda ciyaartoyda ah waa inay haystaan oo ay lahadaan 95% boqolkiiba ama wax ka sareeya ee heerka xaadiriska celceliska si ay ugu qalmaan ka qaybgalka ciyaaraha isboortiga ah.
    - Codsi rasmi ah oo qoraal ah ayaa laga yaabaa inuu sameeyo agaasimaha ciyaaraha ee ku aadan xaaladaha gaarka ah ee khuseeya caafimaadka, arrimaha qoyska, iyo/ama walaaca ama baahiyaha waajibaadka diineed.

## Jir Caafimaad Leh, Maskax Caafimaad Leh

Marka la joogo Dugsiga Rocky Mountain Prep, waxaa naga go'an in aan cunto caafimaad leh u doorno jirkeena. Cuntooyinka dheellitiran waxay ka caawiyaan ardayda inay helaan nafaqooyinka ay u baahan yihiin si ay diiradda u saaraan waxbarashada ayna u gaaraan awoodooda PEAK. Haddii aad jeclaan lahayd inaad u dabbaaldegto xafladda dhalashada ardaygaaga, fadlan la xiriir maamulka kambaska ardaygaaga si aad u ogaato wax ku saabsan xaddidaadaha iyo siyaasadaha booqashada.

Dugsiga Rocky Mountain Prep waxay iskaashi la samaysaa Adeegyada Cuntada SLA (dugsiga badankooda) iyo Adeegyada Cuntada DPS (ee dugsiyada RMP Noel iyo GVR) si ay ardaydeena u siiyaan cuntooyin caafimaad leh. Dhammaan qoysaska waa INAY buuxiyaan codsiga Qadada bilaashka ah iyo Qadada Qiimaha laga dhimay ee Sanad Dugsiyeedka 24-25. Fadlan booqo xafiiska weyn ee dugsigaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo buuxiyo.

## Kharashaadka Dugsiga La Xiriira

In kasta oo waxbarashada RMP ay tahay lacag-la'aan, liiskaan soo socda waa kharashyada suurtagalka ah in la bixiyo ee la xiriira barnaamijyada RMP:

- Labbiska Dugsiga Kor/Hoos

- Ka-qaybgalka Barnaamijka Daryeelka Dugsiga Kahor ama Kadib ah
- Safarka Bannaanka/Barnaamijka Munaasabadaha Gaarka ah
- Kharashka Ka-qaybgalka Ciyaaraha Isboortiska (Ardayda Dugsiga Dhexe iyo Sare ee ka qaybqaadanaysa ciyaaraha)
- Kharashka tignoolajiyada ee ardayda dugsiyada dhexe iyo sare
  + Kharash kasta oo dheeraad ah oo loogu talagalay laptopka Chromebook ee dhammaan heerarka fasalada

Shaqaaluhu waxay bixin doonaan ogaysiis horudhac ah oo ku aadan kharashaadka si qoysaska loo siiyo wakhti ku filan oo ay ku qorshaystaan. Haddii kharashyada la xiriira dugsiga ay keenaan walaac, fadlan la xiriir xafiiska taageerada si aad ugala hadasho xulashooyinka taageerada ee la heli karo.

## Buugaagta Akhriska

Ardayda waxa laga yaabaa in la siiyo buugaag-dugsiyeedka iyo buugaagga-fasalka waana in sanadka oo dhan si wanaagsan u ilaaliyaan buugaagta. Buugaagta waxyeelloobay ama lumay waxaa mas'uul ka ah waalidka/mas'uulka ardayga waxaana laga yaabaa inay sababaan kharash dheeraad ah.

## Sanduuqyada

Sanduuqyada/lookarada waxaa iska leh dugsiyada RMP waxaana loo fasaxaa inay ardayda isticmaalaa inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Mudnaanta ardaygaas la siiyey waxaa dulsaaran mas'uuliyad dheeri ah oo ah in sanduuqa la ilaaliyo lana nadiifiyo. RMP ma qaado wax mas'uuliyad ah oo ku aadan alaabta luntay ama la xado; ardayda dugsiga keena alaabo qaali ah iyaga ayaa ka masuul ah alaabtooda. RMP ayaa leh xaquuq ah inay baarto sanduuqyada hadba sidii lagama maarmaanka u ah badbaadada jireed ee ardayda iyo fulinta sharciyada dugsiga.

Ardayda ayaa ka mas'uul ah waxa ku jira sanduuqa loo qoondeeyey. Alaabta Luntay ee La Helay

## Lumay oo La Helay

Dugsi kastaa wuxuu leeyahay sanduuq lagu rido alaabta lunta ee la helay. Fadlan la xiriir maamulaha xafiiska taageerada ee dugsigaaga si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah. Alaabooyinka aan qofna sheegan waxaa deeq ahaan loo siiyaa hay'ad samafal ah hadba sida ay RMP u go'aansato.

## Agabyada Dugsiga

Waa mas'uuliyadda ardayda inay dugsiga la yimaadaan agabyo ku habboon. Haddii waalidiintu u baahan yihiin in laga caawiyo xaqiijinta in ilmahoodu haystaan agabyada dugsiga ee ku habboon, waalidiinta/masuuliyiinta waa inay la hadlaan la-taliyaha ilmahooda, macallinka ama maamulaha.

## Diiwaanada Ardayda iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoysaska iyo Sharciga Qarsoodinimada Xogta

Diiwaanada waxbarashada ardaydu waa dukumentiyo sir ah oo rasmi ah oo uu ilaalinayo mid ka mid ah shuruucda ilaalinta qarsoodinimada xogta ee ugu adag ee qaranka, Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoysaska iyo Qarsoodinimada Xogta ee 1974 (FERPA). FERPA wuxuu khuseeyaa dhammaan dugsiyada hela dhaqaalaha waxbarashada ee federaalka, oo ay ku jiraan RMP. In loo hogaansami waayo sharcigan waxay keeni kartaa luminta lacagahaas/deeqahaas. Diiwaanada waxbarasho ee qarsoodiga ah waxaa

ka mid ah foomamka diiwaangelinta ardayda, macluumaadka xiriirka, shaqada la darajeeyay, diiwaanka akadeemiyada, faylasha anshaxa, lambarada sooshiyaal sekuuritiga ee ku xiran magacyada, iyo macluumaadka ardayga ee lagu soo bandhigay shaashadda kombiyuutarka. Dhammaan shaqaalaha dugsiga iyo mutadawiciinta waxaa looga baahan yahay inay u xafidaan macluumaadka ardayga si ammaan ah oo qarsoodi ah, si loo ilaaliyo xuquuqda ardayda.

**Nuxurka ka dambeeya sharcigan ayaa ah in:**

- Waalidiinta/mas'uuliyiinta ay xaq u leeyihiin inay baaraan oo ay dib u eegaan diiwaanka waxbarasho ee ilmahooda (diwaanka kasta oo ardayga si gaar ah looga aqoonsan karo), marka laga reebo qolo saddexaad. Ardeydu sidoo kale waxay helayaan xaquuqdaan marka ay gaaraan da'da 18. Rocky Mountain Prep waxay ka jawaabtaa codsiyada waalidiinta ay ku codsanayaan macluumaadka ardayga kaliya marka qoraal lagu soo gudbiyo 72 saacadood gudahood.
- Waalidiinta/masuuliyiinta iyo ardayda u qalanta waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan in dugsigu saxo diiwaanada la rumaysan yahay inay khaldan yihiin ama marin habaabin yihiin.
- Waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay xaq u leeyihiin inay dacwad u gudbiyaan Waaxda Waxbarashada ee Dowladda Maraykanka cabashadaas oo la xiriirta ku guul-daraysiga in Rocky Mountain Prep ay u hoggaansanto shuruudaha sharciga.

Machadyada iyo shaqaalahooda ma bixin karaan macluumaadka ku saabsan ardayda, mana ogolaan karaan in la baaro diiwaankooda, iyaddoo aan waalidka ama ardaygu fasax qoraal ah laga haysan, marka laga reebo haddii falkaas uu daboolayo ka-dhaafinaada qaar ee sharciga sida ku cad sharciga. FERPA waxay ka mamnuucday dhammaan shaqaalaha inay macluumaadka ardayga ee qarsoodiga ah kala hadlaan qollo saddexaad, oo ay ku jiraan waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah.

Fadlan faham in saraakiisha dugsiga-macalimiinta, maamulka iyo xubnaha guddiga-ay tahay in dhammaantood u hoggaansamaan filashooyinka FERPA, sidaas darteedna aysan kaala hadli karin arday kale oo aan ahayn ardaygaaga wakhti kasta ama sabab kastaba ha noqotee. Ka dhaafitaan oo uu sharcigu ogol yahay ayaa ah "xogta hagaha." Macluumaadka hagaha waa macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada ardayga oo aan guud ahaan loo aqoonsanayn inuu yahay macluumaad lagu geysan karo waxyeello ama jebinaya qarsoodinimada xogta shakhsiga. Waalidka ama ardayga u qalma wuxuu xaq u leeyahay inuu diido oggolaansho bixinta ah in macluumaadkiisa qaar loo aqoonsado mid aan waxyeello lahayn haddii diidmadaas lagu soo gudbiyo qoraal ahaan loona gudbiyo xafiiska maamulaha dugsiga ugu dambayn Sebtembar 15-keeda, ama Isniinta xigta haddii Sebtembar 15 ay tahay Sabti ama Axad. Haddii ardaygu is-diiwaangeliyey kadib Sebtembar 15-keeda, qoysasku waxay haystaan 2 toddobaad kadib markay isdiiwaangeliyaan si ay diidmadaas u gudbiyaan.

## Hawlaha Lacag-Ururinta

Dhammaan codsiyada laga dhex sameeyo dugsiga iyo/ama RMP iyo/ama iyadoo la matalayo RMP waa in ay ogolaansho hordhac looga helaa Agaasimaha Maamulka Samafalka iyo Maamulaha dugsiga. Ma jirto hay'ado lacag ururineed oo loo ogolaan doono inay lacag ka codsadaan iyada oo aan oggolaansho hore laga helin Agaasimaha Maamulka Samafalka iyo Maamulaha dugsiga.

## Qaybinta Agabyada ama Dukumentiyada La Daabacay

Daabacaadaha ay diyaariyeen ama loo diyaariyey dugsiga waxaa loo qaybin karaa bulsho weynta, iyadoo ay oggolaansho hore laga helayo maamulaha, la-taliyaha, ama macalinka. Alaabooyinkaas

waxaa ka mid noqon kara boodhadhka dugsiga, buug-yaraha, farshaxannada darbiyada, iwm. Dhammaan daabacadaha dugsiga waxay hoos imaanayaan macallinka, maal-geliyaha, iyo maamulaha dugsiga.

Marka laga reebo haddii ardaygu uu ogolaansho gaar ah ka helo maamulaha, agabyada qoraalka ah, sawirada, codsiyada, filimaanta, cajaladaha, waraaqaha, ama agabyo kale oo muuqaal ama maqal ah lama qaybin/dhejin karo, lama iibin karo, lama faafin karo, ama laguma qaybin karo dugsiga ama kaambaska dhexdiisa. Waxyaabaha la soo dhejiyo iyadoo la helin ogolaanshahan waa la fujin doonaa.

### Ganacsiga

Ardaydu waxba kuma dhex iibin karaan dhismaha dugsiga iyaga oo aan fasax ka haysan maamulaha. Ma uruurin karaan lacag ama walxo kale si iskood ah ama iyagoo u uruurinaya urur ay ka tirsan yihiin oo ka baxsan dugsiga iyaga oo aan oggolaansho hore ka helin maamulaha.

### Qalabyada iyo Hantida leh Xuquuqda Daabacaadda

Ardaydu waa inay u hogaansamaan qodobada sharciga xuquuqda daabacaada iyo sharciyada hantida. Dugsiga Rocky Mountain Prep wuxuu mamnuucay nugul ka bixinta sharci-darrada ah ee hantida dugsiga nooc kasta ha ahaatee. Walxaha xuquuqdooda daabacaada uu dugsiga iska leeyahay, hadday yihiin kuwo daabacan ama kuwa aan daabacnayn; si onlayn ah u daabacan; ama ah qaab softiweer, muusig, ama qaab dhijitaal ah waa in aan nugul laga bixin/la koobiyeyn marka laga reebo haddii isticmaalka noocaas ah uu oggol yahay sharciga ama haddii ogolaansho qoraal ah oo habboon laga helo qofka haysta xuquuqda daabacaada. Ardayda iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay ballan-qaadayaan inay weydiiyaan maamulaha dugsigooda haddii ay qabaan wax su'aalo ah oo ku saabsan inay agabka noocaas ah u isticmaali karaan shaqadooda dugsiga.

Lahaanshaha, iyo dhammaan xuquuqaha iyo xiisaha, dhammaan hantida garaadka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn hantida garaadka ee ah qaabka xaquuqda daabacaadda ama nooc kale oo hantida garaadka ah, taas oo ay sameeyeen ardaydu inta lagu jirey koorsada iyo baaxadda ka diiwaangashanaantooda dugsiga RMP ama inta ay isticmaalayeen agabyada RMP (ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn qalabyada, sahayda, tas-hiilaadka ama macluumaadka ganacsiyeed ee qarsoodiga ah) hantida noocaas ah waxaa isla leh ardayga iyo Rocky Mountain Prep. Ardayda iyo waalidiintooda/mas'uuliyiinta waxay lahaanshaha wadajirka ah, iyo dhammaan xuquuqaha iyo faa'iidooyinka lahaanshahaas, u xilsaarayaan/masuul uga dhigayaan RMP. Rocky Mountain Prep waxa laga yaabaa in agabyada uu ardaygu leeyahay ku wareejiyaan ama u oggolaadaan ururo dibadeed ama inay agabyadaas u isticmaalaan daabacado, lacag uruurin ama sababo kale. Ilaa iyo intii suurtagal ah, RMP waxay ogaysiin doontaa waalidiinta/masuulka iyo ardayda kahor intaan la samayn daabacaadda ama isticmaalka dibadeed ee shaqada ardayga.

# Cutubka 7-aad: Borotokoolada Caafimaadka iyo Badbaadada

Borotokoolada badbaadada ee soo socda waxay inta badan ku saleysan yihiin Hab-maamuuska Badbaadada ee DPS iyo APS, kuwaas oo ku saleysan tilmaamaha maamulka caafimaadka ee degmada. RMP waxay xaq u leedahay inay ka leexato siyaasadda APS ama DPS iyadoo ka leexashadaas lagu salaynayo xogta caafimaadka deegaanka. Bayaanka siyaasaddu waxa uu ku salaysan yahay xaaladaha taagan.

In kasta oo aan khasab ahayn inaad qaadato tallaallada COVID si aad u timaado dugsiga, RMP waxay si xooggan u dhiirri-gelinaysaa in dhammaan xubnaha bulshada RMP ay yihiin kuwo qaatay dhammaan tallaallada oo uu ka mid yihiin tallaallada COVID.

***Hadda ma jirto muddada 5ta maalmood ah oo khasabka ah in ay dugsiga ka maqnaadaan ardayda iyo shaqaalaha laga helay COVID-19.*** Ardayda laga helay COVID-19 waa inay guriga joogaan ilaa ay astaamaha caabuqa ay ka roonanaayan oo ay qandho la'aan noqdaan iyagoon isticmaalin dawooyinka yarayso qandhada muddo 24 saacadood gudahood. *Fiiro gaar ah: Heerka qandhada waxaa laga wadaa heerkulka ah ≥ 100.4 F.*

Kula tali dadka in ay sameeyaan taxaddar dheeraad ah shanta maalmood ee soo socota, gaar ahaan dadka khatarta sare ugu jira in uu ku dhaco xannuunada halista ah; yacni dadka ka wayn 65 sano iyo dadka habdhiska difaaca jidhkoodu uu daciif yahay. Tallaabooyinka taxaddarka dheeraadka ah waxaa ka mid noqon kara:

- Gacmo-dhaqashada joogtada ah
- Yaraynta faafida jermiska qufacaaga
- Kordhinta kala-fogaanshaha jireed
- Xirashada maaskaraha

Ardayda iyo shaqaalaha leh calaamadaha neef-mareenka ee aan laga helin COVID-19 waa inay raacaan tilmaamaha Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyo Deegaanka ee Colorado ee ku aadan qeexida "Sida Xanuunku aad Uu U Daran Yahay."

**Haddi Ilmahaagu Bilaabo Inuu Dareemo Xanuun Isagoo Jooga Dugsiga**

Haddii ilmahaaga uu bilaabo inuu xanuunsado intuu joogo dugsiga isagoo leh astaamaha waaweyn oo COVID, waxaanu ku soo wici doonaa isla markiiba si aad u timaado dugsiga oo aad ilmahaaga ugu kaxayso guriga. Fadlan faham in arrintaan loo samaynayo si loo ilaaliyo badbaadada bulshada, waxaanan kaaga baahanahay inaad sida ugu dhakhsaha badan u kaxayso ilmahaaga. Waxaan kula wadaagi doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan goorta uu ilmahaaga ku soo laaban karo dugsiga, laakiin ugu yaraan, waxay u baahan yihiin inay astaamo la'aan ahaadaan ugu yaraan 24 saacadood waxaana laga yaabaa inay u baahdaan inay warqad ka keenaan dhakhtar si ay ugu soo laabtaan dugsiga.

# Lifaaqa Dugsiga Sare

**Waxbarashada Dugsiga Sare ee Tayada Sare Leh**

*Qorshaha Shakhsiga ee Tacliimeed iyo Xirfadeed: Qorshayaasha Shakhsiga ee Tacliimeed iyo Xirfadeed* (ICAPs) waa nidaam loo baahan yahay sannado badan oo joogto ah kaas oo ardayda iyo qoysaska ku haga fahanka shaqooyinka, tacliinta iyo fursadaha jira ka dib waxbarahada dugsiga sare. Laga bilaabo fasalka lixaad illa iyo waxbarashada dugsiga sare oo dhan, ardaydu waxay sameeyaan oo cusbooneysiiyaan qorsho joogto ah, oo ay gacan siinayaan dadka waaweyn, arrimaha ku aadan shaqada, dejinta yoolalka, fursadaha waxbarashada kuleejka, taageerada maaliyadeed, iyo xirfadaha kordhinaya guusha tacliinta ee ardayga. Iyagoo taageero ka helaayo dadka waaweyn, ardaydu waxay kor u qaadaan fahamkooda, aqoontooda, aragtidooda, iyo xirfadahooda si ay u abuuraan qorshayaal macno leh oo awood leh si ay u noqdaan kuwo u diyaarsan waxbarashada kuleejka iyo xirfadaha shaqada labadabo. ICAP dhamaystiran oo waxtar leh macneheedu waxa weeye in ardaygu uu buuxiyay dhammaan ujeedooyinkii waxbarasho oo uu dhameeyay su'aal kasta oo ku saabsan Xog-ururinta ICAP ee ku jirta Portal-ka Ardayga Waxyabaha tacliinta ah oo ay seegaan ardayda beddelka ku imaadaan waa in dib loo baro si loo hubiyo in dhammaan ardaydu ka faa'iidaystaan nidaamka ICAP oo dhammaystiran. Ardaydu waa inay dhammaystiran su'aalaha ICAP ee fasallada 6-12, iyadoon loo eegin taariikhda gelitaanka ama ku biirista DPS/RMP. Dugsiyadu waxay raaci doonaan siyaasadda ICAP ee dagmada (IHBK) gabi ahaanba inta lagu jiro qaybtan IKF iyo IKF-R

*Barnaamijyada Meelaynta Sare (AP) & Is-diiwaangelinta Isbarbar Socota (CE):* Dugsiyada sare ee RMP waxay bixiyaan fursadooyin badan oo Isdiiwaangelinta Isbarbar Socota (CE) ah si ay ardayda u helaan buundooyinka kuleejka inta ay ku jiraan dugsiga sare. Hadba marka koorasyo CE ah oo badan lagu soo daro, koorasyada Meelaynta Sare (AP) qaarkood ayaa laga yaabaa in la bedelo. Barnaamijyada AP ayaa sidoo kale la siiyaa ardayda si ay imtixaanka AP u qaataan guga si ay isugu dayaan kasbashada buundooyinka kuleejka. Koorasyadani waa kuwo adag oo ka tarjumaya koorsooyinka heerka kuleejka ah.

*Meelaynta Sare (AP):* Ardaydu waa inay ku aflaxaan/ka baasaan fasalka shardiga ah ama waa inay ogolaansho qoraal ah ka helaan macalinka si ay iskaga diiwaangeliyaan fasalka AP. Dhamaystirka guusha leh iyo ka helista dhibco gaaraya 3 ama wax ka sareeya ee imtixaanka AP ayaa waxay sababi kartaa in ardaygu helo buundada koorsada kuleejka ee jaamacadda ama kuleejka. RMP ayaa bixin doontaa kharashka imtixaanka AP ee ardayda kasta oo hela 80% ama wax ka badan inta lagu jiro koorsada. Ardayda hela wax ka hooseeya 80% ee koorsada, kharashka imtixaanku inta badan waa $89; ardaydu waxa laga yaabaa inay helaan qiimo dhimis haddii ay u qalmaan qado bilaash ah ama qiimaha laga dhimay. Haddii kharashka imtixaanku sababo dhibaato xagga qoyska ah, ardaydu waxay ka-dhaafitaanka kharashkaas ka codsan karaan maamulaha u xilsaaran. Si ay u joojiyaan koorsada AP, ardaydu waa inay la kulmaan la-taliyahooda kuleejka oo waa inay dukumeenti saxeexan ka haystaan waalidka/masuulka iyo maamulaha u xilsaaran.

*Is-diiwaangelinta Isbarbar Socota:* Iyadoo ah dariiqa loo maro tacliinta sare, is-diiwaangelinta isbarbar socota ee RMP waxay u ogolaataa ardayda inay kasbadaan buundooyinka kuleejka ee bilaashka ah inta ay weli ku jiraan dugsiga sare, taasoo siinaysa bilowga wanaagsan ee kuleejkooda iyo yoolalka shaqo. Ardeydu waxay la kulmaan caqabadaha tacliimeed ee kuleejka inta ay ku jiraan goobtooda taageerada dugsiga sare ama kambaska kuleejka, iyagoo isla mar wada helaya buundooyinka kuleejka iyo

buundooyinka dugsiga sare. Isdiiwaangelinta isbarbar socota waxay u furan tahay ardayda hesha ogolaanshaha qorshaha tacliimeed, buuxiya codsiyada kama dambaysta ah, isla markaan buuxiya shuruudaha koorsada kuleejka. Qorshaha tacliimeed ee ardayga waxaa si wadajir ah u sameeya ardayga iyo la-taliyaha dugsiga ama maamulaha dugsiga. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan is-diiwaangelinta isbarbar socota, fadlan la hadal Diiwaan-hayaha ama xubin ka tirsan shaqaalaha Gelitaanka Kuleejka.

**Dugsiyada sare ee Rocky Mountain Prep waxay raacaan xeerarkan buundo-siinta/darajaynta (macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda buundo-siinta/darajaynta ee dugsiyadeena ayaa hoos ku qoran):**

- Dhammaan koorsooyinka waxaa buundooyinkooda la bixiyaa simistarka.
- Si looga dhigo buundooyinka kuwo ka tarjumaya fahamka ugu dambeeya ee heerarka, ardaydu waxay awoodaan inay dib u qaataan imtixaanka kadib markay helaan jawaab-celin (imtixaanada kama dambaysta ah ee la qaato dhamaadka-simistarka waa ka reeban yihiin).
- Macallimiintu waa inay ardayda siiyaan fursado badan si ay shaqada u dhamaystiraan oo ay mar kale u sameeyaan shaqada. Dhammaan shaqada waa in la dhammeeyaa inta lagu jiro simistarka shaqadaas la bixiyey.
- Ardayda ku dhacda koorsada (buundo ka hooseeysa 69.5%) waa in ay ka qeybqaataan waxqabad dib loogaga soo kabanayo buundooyinkaas si ay u helaan buundada koorsada[1.]
- Si aan loo ogolaan in caadooyinka tacliimeed ay si aan sinnayn saamayn ugu yeeshaan buundooyinka ardayda, buundada ugu hooseeysa ee ardayga laga siin karo shaqo koorso oo uu soo celiyey waa 50% ee dhammaan koorsooyinka marka laga reebo AP iyo Koorsooyinka Isbarbar Socda. Shaqo koorseed kasta oo aan la soo celin waxaa buugga buundooyinka loo gelin doonaa eber ahaan. Tani waxay khusaysaa dhammaan heerarka fasalka ee dugsiga sare.

Ardayda leh Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEPs) ama Qorshayaasha Qaybta 504 waxaa la siin doonaa qabanqaabooyin iyo wax ka beddello sharciyeed. Imtixaanada kama dambaysta ah, kaliya ardayda leh IEP-yada, Qorshayaasha Taageerada ee Heerarka Kala Duwan Leh (MTSS) ama Qorsheyaasha Shakhsi ahaaneed ee Akhris-qoraalka (ILP), ama Qorshayaasha Qaybta 504 ayaa laga yaabaa inay helaan shaqo la habeeyey ama wax laga beddelay.

**Cabirka Buundo Bixinta ee Dugsiga Sare**

Cabirka buundo bixinta ee dugsiyada Rocky Mountain Prep wuxuu ku salaysan yahay cabirka buundo bixinta ee Denver Public School waxaana lagu faahfaahiyey halkaan hoose. Si kastaba ha ahaatee, si ka duwan DPS, waxaan si ula kac ah uga reebnay D inay noqoto buundo lagu kiridhit ahaan loo kasbado. Ardayda RMP waxay u baahan yihiin inay helaan C- ama buundo ka sareeysa si ay uga baasaan fasalka oo ay u helaan kiridhit[2.]

---

[1]RMP waxay sharfi doontaa cabirka buundo bixinta ee dugsigii hore ee ardayda beddelka ku yimaada, taasoo la macno ah haddii ardaygu uu D ka soo helay dugsigii hore oo buundadaasna loo tixgeliyo mid lagaga baaso dugsigaas, ardaygu uma baahna inuu dib u qaato koorsada RMP, ardayguna wuxuu heli doonaa kiridhitka qalin-jabinta ee fasalkaas.

[2]Rocky Mountain Prep waxay sharfi doontaa cabirka buundo bixinta ee dugsigii hore ee ardayda beddelka ku yimaada, taasoo la macno ah haddii ardaygu uu D ka soo helay dugsigii hore oo buundadaasna loo tixgeliyo mid lagaga baaso dugsigaas, ardaygu uma baahna inuu dib u qaato koorsada RMP, ardayguna wuxuu heli doonaa kiridhitka qalin-jabinta ee fasalkaas.

| Qiimaha cabirka 4-dhibcood | Qiimaha cabirka 5.2-dhibcood | ku salaysan % | Buundooyinka Xarfaha ah |
|---|---|---|---|
| 4.0 | 5.2 | 93-100 | A |
| 3.67+ | 4.77+ | 90-92+ | A- |
| 3.33+ | 4.33+ | 87-89+ | B+ |
| 3.0+ | 3.9+ | 83-86+ | B |
| 2.67+ | 3.47+ | 80-82+ | B- |
| 2.33+ | 3.0+ | 77-79+ | C+ |
| 2.0+ | 2.6+ | 73-76+ | C |
| 1.67+ | 2.17+ | 69.5-72+ | C- |
| 0 | 0 | 0-69.4 | F |

**Loogu talagalay keliya AP-ga dugsiga sare, maadooyinka sharafta, iyo koorsooyinka isdiiwaangelinta isbarbar socda.*

**Siyaasadda Rocky Mountain Prep ee Buundooyinka Aan Dhamaystirnayn ee Iskiribtiga**

Ardaydu waa inay helaan buundo mar kasta oo ay suurtogal tahay. RMP waxay si wada jir ah ula shaqeyn doontaa ardayda si ay u sameeyaan dadaal kasta si loo xaqiijiyo in ardaydu ay helaan fursad ay ku dhammeeyaan shaqadooda fasalka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jiri kara xaalado ah in ardayga la siiyo 'Aan dhammaystirnayn' (I) la dammaanad qaaday. RMP waxay kaliya ardayga siin doontaa ‘Aan Dhammaystirnayn’ marka ay jirto xaalad degdeg ah oo aan laga fursan karin ama arrin gaar ah ama xaalad ay dhacday taasoo ka hor istaagaysa ardayga inuu dhammeeyo shaqooyinka loo arko inay qayb weyn ka yihiin buundo bixinta ee fasalkaas(fasaladaas) gaarka ah. Ardayda waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay bixiyaan dukumeenti qoraal ah si ay u helaan buundada ’Aan dhamaystirnayn’, sida lidka ku ah buundada dhicitaanka.

Tusaalooyinka xaaladaha u ogolaan kara ardayga inuu helo buundada ’Aan dhamaystirnayn’ waxaa ka mid ah ardayda si cudurdaar leh dugsiga uga maqan, ardayda haysta arrimo caafimaad, ardayda xabsiga lagu xirey, qaxitaan la xiriira xaalad degdeg ah, arday guri la'aanta ah ama u baahan hoy degdeg ah, ama ardayda loo wareejiyey guri kooxeed ama guri kale oo ku meelgaar ah, ama xaalado kale oo degdeg ah, xaalad gaar ah ama aan laga fursan karin ay soo baxday (ardayga waxaa la waydiin doonaa inuu sharaxo xaalada oo uu bixiyo dukumeenti, hadba sida xaaladdu u saamaxdo). Dhammaan xaaladaha waa in ay ka hor istaagaan ardaygu inuu dhammeeyo shaqooyinka loo tixgaliyo inay qayb weyn ka yihiin xilliga buundo bixinta ee fasalkaas(fasaladaas) gaarka ah.

Ardeyda iyaga ayaa mas'uul ka ah inay ogeysiiyaan macalinkooda ama maamulaha dugsiga baahida loo qabo buundada ’Aan dhamaystirnayn’, ogeysiintaas waa in la sameeyaa kahor inta aan la soo gudbin buundooyinka kama dambaysta ah ee fasalkaas(fasaladaas). Ardaydu kiridhit kama helaan buundooyinka ’Aan dhamaystirnayn’. Si loo helo kiridhit, ardaydu waa inay la shaqeeyaan macalinkooda ama maamulaha dugsiga si ay u dhamaystiraan shaqada koorsada (shaqooyin koorso oo bedel ah ayaa la siin karaa ardayga, iyadoo ku xiran duruufaha jira) waqti macquul ah kadib marka la xaliyo duruufaha/xaaladaha u diiday ardayga inuu dhammeeyo shaqada koorsada ama kadib marka xaaladahaas aynaan mar kale ka hor istaagi karin ardayga inuu dhammeeyo shaqada uu seegay. Ardayda u diiwaan gashan dugsiga/waxbarashada xagaaga waxay heli doonaan buundo ’Aan dhamaystirnayn’ oo sugaysa in la dhamaystiro dugsiga/waxbarashada xagaaga.

**Sharuudaha Qalin-jabinta**

Si ay uga qalin jabiyaan dugsiga sare ee Rocky Mountain Prep ardaydu waa inay kasbadaan ugu yaraan 240 dhibcood/kiridhit. Shuruudaha ka qalin-jabinta dugsiyada sare ee RMP waxay buuxiyaan ama ka sare maraan shuruudaha u-diyaargarowga kuleejka ee DPS iyo CCHE- ee gobolka. Si aad u hesho wixii macluumaad ah oo ku saabsan ka-dhaafitaanada Qalin-jabinta iyo shuruudaha u-qalmitaanka, fadlan u tag maamulaha dugsigaaga isla marka aad aaminsan tahay inaad u qalanto.

**Dhibcaha hadda loo baahan yahay ilaa Fasalka Qalanjabinta ee 2026 waxaa ka mid ah:**

| | |
|---|---|
| **Dhamaystir 240 saacadood oo waxbarasho koorsada ah** | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga 40 dhibcood/4 sano<br>Xisaab 40 dhibcood/4 sano<br>Sayniska 30 dhibcood / 3 sano<br>(2 sano oo Saynis ka mid ah waxay ku salaysan yihiin shaybaarka)<br>Cilmiga Adduunka/Taariikhda 35 dhibcood / 3.5 sano<br>(5 dhibcood waa inay ahaadaan Life 101 / Cilmiga Xaquuqaha Madaniga)<br>Luuqadda Adduunka 20 dhibcood / 2 sano<br>Farshaxanka Suuban 10 dhibcood / 1 sano<br>Maadooyinka La Doorto 40 dhibcood<br>Jimcisiga/Caafimaadka 10 dhibcood / 1 sano<br>Gelitaanka Kuleejka 15 dhibcood/ 1.5 sano |

**Ka-dhaafitaanada**

Ciyaaraha isboortiga ee ay ansixiyaan Guddiga Waxbarashada ee Denver Public Schools isla markaana buuxiya shuruudaha hoose ayaa waxay ardayga loogaga dhaafi karaa shuruudaha qalin-jabinta ee

waxbarashada jirdhiska. Wax dhibco ah ama kiridhit ah lagama bixin doono kaqaybgalka ciyaaraha fudud oo ka-dhaafitaankan noocaas oo kale ah ma yarayn doono wadarta saacadaha loo baahan yahay in lagu kasbado diblooma. Labada simistar ee shuruudaha waxbarashada jirdhiska waxaa ardaga looga dhaafi karaa ka qaybgalka ciyaaraha.

**Shuruudaha Lagu Maamulo Ka-Dhaafitaanka Waxbarashada Jimicsiga:**

A. Ardaygu waa inuu joogteeyaa u-qalmitaanka tacliimeed inta lagu jiro xilligaas oo dhan.

B. Hal xilli ciyaareed oo buuxa ayaa loo baahan yahay si ardayga looga dhaafo shan saacadood oo simistarka ah (5 cutub) oo shuruudaha Waxbarashada Jirdhiska ah.

C Ardaygu waa inuu ahaadaa arday ku cusub dugsiga sare, arday dhigta fasalka labaad ama fasalka koowaad ee dugsiga sare, si uu ugu qalmo ka-dhaafitaankaas. Ardayda fasalada sareeya ee dugsiga sare ku jira ee aan weli buuxin shuruudaha waxbarashada jirdhiska looma oggola inay qaataan ka-dhaafitaankan waana inay iska diiwaangeliyaan koorsada waxbarashada jirdhiska.

**Dhibcaha loo baahan yahay ee heerka fasalka waa:**

| | |
|---|---|
| **Fasalka 9aad (Freshman)** | 0-59+ |
| **Fasalka 10aad (Sophomore)** | 60-119+ |
| **Fasalka 11aad (Junior)** | 120-179+ |
| **Fasalka 12aad (Senior)** | 180+ |

**Shuruudaha Dibloomada**

Ardaygu waa inuu buuxiyaa dhammaan shuruudaha kor ku xusan iyo sidoo kale uu muujiyaa u diyaarsanaanta xirfadda/kuleejka sida hoos lagu qeexay si uu shahaadada diboolmada ah uga helo dugsiyada sare ee RMP. Kaliya ardayda qaata dibloomada ayaa loo ogolyahay inay ka qaybqaataan hawlaha qalin-jabinta.

| **Muuji U Diyaarsanaanta Xirfadda Shaqo/Kuleejka** | **Ardaygu wuxuu muujin karaa kartida iyadoo la isticmaalayo mid ka mid ah hababka soo socda:** | |
|---|---|---|
| | **Tilmaamaha** | **Dhibcaha Ugu Yar** |
| | SAT* | 470 (Ingiriisi) and 500 (Xisaab) |
| | Imtixaanada Accuplacer Classic | 95 (Xirfadaha jumlad dhisida);<br>61 (Aqoonta xisaabta algebraha aasaasiga ah) |

| | | |
|---|---|---|
| | Imtixaanada Jiilka Xiga ee Accuplacer | 241 (Wax Akhris) AMA 236 (Wax Qoris);<br><br>255 (Xisaabta/AR) AMA 230 (Sababaynta Tirada, Aljebrada & Tirakoobka/QAS) AMA 245 (Aljabraada Hormarsan & Shaqooyinka Xisaabeed/AAF) |
| | ACT | 18 (Ingiriisi) and 19 (Xisaab) |
| | Fasalka Heerka Sare ah (AP) | 2 ama ka sareeya (Ingiriisi iyo Xisaab) |
| | Boortofooliyada Capstone | Buuxiyay Shuruudaha Ingiriisiga iyo Xisaabta |
| | Isdiiwaangelinta Isbarbar Socota | C ama wax ka sareeya ee koorsada CE ee u qalanta |
| | Shahaadada Waxbarashada Caalamiga ah (IB) buundada iyo Jagada | RMP ma bixiso barnaamijka Baccalaureate International (IB). Ardayda si guul leh u dhammaystay[3] koorsada(koorsooyinka) IB iyo/ama imtixaanka(imtixaanada) kahor inta aan loo gudbin RMP, waxay soo gudbin karaan ka-dhaafitaanka qalinjabinta si ay u helaan buundooyinka koorsada IB ee si guul leh loo dhamaystirey. Ardaydu waxay sidoo kale codsan karaan in IB loogu qoro iskiribtiga/dibloomada kama dambaysta ah ee ardayga si ay uga turjunto magaabis koorso oo uu ardaygu ka heli lahaa dugsiga uu ardaygu ka qaatay koorsada/imtixaanka. Waa mas'uuliyadda ardayga inuu soo gudbiyo ka-dhaafitaanka qalin-jabinta iyo/ama inuu codsado Magacaabista IB iyo inuu bixiyo dhammaan diiwaannada iyo shuruudaha u-qalmitaanka magacaabidda ee dugsigii hore. |

**Dhammaan ardayda waxa looga baahan yahay inay qaataan SAT marka laga reebo ardayda naafada ah ee buuxiya shuruudaha imtixaanada bedelka ah. RMP waxay ardayda naafada ah siin doontaa fursad ay ku helaan dhammaan dariiqooyinka qalin-jabinta iyo fursad ay ku kasbadaan diblooma. Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) ayaa sharxi doona koorsada waxbarasho ee la qorsheeyay ee ardayga, waxbarashada sida gaarka ah loo qaabeeyey, qabanqaabooyinka iyo wax ka beddelada la sameeyey, iyo adeegyada dheeriga ah iyo agabyada lagama maarmaanka u ah in ardaygu awood u yeesho inuu muujiyo aqoonta heerarka iyo si uu u gaaro yoolalka dugsiga sare kadib ah. Qorshaha IEP iyo/ama Qorshaha Qaybta 504 ayaa ah dukumeentiyada hagaya dariiqa dugsiga sare ee ardayga iyo wixii qabanqaabooyin oo lagama maarmaan ah.* Ardayda leh IEP-yada isla markaana buuxiya shuruudaha Tacliin Ahaan Saamayn Weyn Soo Gaartay waxay awood u yeelan doonaan inay dhammaystiraan Capstone iyaga oo u maraya *U Diyaargarowga Kala-guurka ee Boortafooliyada Capstone. Go'aamintaan waxaa samayn doona kooxda IEP, kooxdaas oo uu ku jiro ardayga, waxaana looga hadli doonaa ardayda suurtogalka ah inay u qalmaan fasalka 9aad. Ardayda leh Qorshaha Qaybta 504 iyo/ama IEP-yada waxaa laga yaabaa inay helaan qabanqaabooyin la ogolyahay ee dhammaan bandhigyada kala duwan ee dariiqyada*

[3]Fadlan eeg liiska Koorsooyinka DPS ee koorsooyinka IB ee u qalma inay buuxiyaan shuruudahan.

*karti-xirfadeedka, si waafaqsan tilmaamaha bixiyaha imtixaanka. Maareeyaha IEP-ga ardayga iyo/ama kooxda IEP/Qaybta 504, sida sharci ahaan loogu baahan yahay, ayaa ka doodaya dariiqooyinka qalin-jabinta iyo shuruudaha qalin-jabinta, iyo halka uu ardaygu ka taagan yahay buuxinta shuruudahan (ama shuruudaha wax laga bedelay ee waafaqsan IEP/qaybta 504 ee ardayga), iyadoo kala doodaya ardayga iyo qoyska inta lagu jiro muddada uu ardaygu ku jiro dugsiga sare ee RMP. Qabanqaabooyin ku habboon IEP-ga ardayga iyo/ama Qaybta 504 ayaa la siinayaa ardayga. Ardayda iyo waalidiinta/masuuliyiinta waxaa had iyo jeer lagu dhiirigeliyaa inay wixii su'aalooyinka ah ee la xiriira shuruudaha qalin-jabinta kala hadlaan maareeyaha qorshaha IEP/Qaybta 504, maamulaha dugsiga, ama kooxda IEP/Qaybta 504 hadba sida uu sharciga dhigayo.*

**Ka-dhaafitaanada Shuruudaha Qalin-jabinta**

Iyadoo dhammaan ardayda looga baahan yahay inay buuxiyaan shuruudaha qalin-jabinta RMP, shaqaalaha dugsiga sare, waalidiinta/masuuliyiinta iyo ardaydu waa inay maamulaha dugsigooda kala tashadaan tilmaamaha gaarka ah ee ku saabsan raadinta ka-dhaafitaanada qalin-jabinta. Maamulaha dugsiga sare ayaa wuxuu ka-dhaafitaanka shuruuda qalinjabinta uu codsan karaa arday gaar ah haddii, sida uu qabo maamulaha, la go'aamiyo in ay ku jirto danta waxbarasho ee ugu fiican ee ardayga ama haddii loo baahdo si arday kasta oo naafada ah loo Waxbarashada Dadwaynaha ee Bilaashka ah (FAPE). Ardayda naafada ah, ka-dhaafitaanka waa inay ansixiyaan sarkaalka dugsiga ee arrintaas u xilsaaran iyo qofka u xilsaaran waxbarashada gaarka ah ee dugsiga. Dhammaan ka-dhaafitaanada kale ee shuruudaha qalin-jabinta ee arday kasta waa in uu ansixiyaa maamulaha dugsiga kahor inta aan loo gudbin La-taliyaha Guud ee RMP si uu u bixiyo ansixinta kama dambaysta ah. Dhammaan codsiyada ka-dhaafitaanka shuruudaha qalin-jabinta iyo go'aanka kama dambaysta ah ee ka-dhaafitaanka noocaas ah waxaa lagu qori doonaa faylka lagu aruuriyo xogta ardayga.

**Daraasad Madaxbanaan**

Iyadoo la raacayo siyaasadda iyo habraaca DPS, ardayda rabta inay koorsada waxbarasho u sii wataan ka fasal madax bannaan, oo si gaar ah loo habeeyey ahaan, waa inay la kulmaan maamulaha, buuxiyaan 'Foomka Waxbarashada Madaxa-bannaan' ee DPS, oo ayna aqoonsadaan macallin u qalma oo u matala ka lataliye ahaan. Fadlan u tag maamulaha dugsigaaga haddii aad xiisaynayso inaad dhammaystirto waxbarasho madaxbannaan. Buundooyinka/dhibcaha/kiridhityada

**Dhibcooyinka Koorsada**

Haddii ardaygu aanu buuxin mid ka mid ah shuruucaha dalacsiinta ama uu ku dhaco koorsada, waxaa dugsiyada sare ee RMP ay xaq u leeyihiin in ardaygu mar kale ku celiyaan in uu qaato koorsada si uu u gaaro dhibcooyinka looga baahan yahay heerarka dallacsiinta.

Waxaa dugsiyada sare ee RMP ay ogaysiin doonta waalidka(iinta)/masuulka(iinta) ardayga iyagoo u diraayaan ogaysiis qoraal ah ugu dambayn badhtamaha simistarka haddii heerka waxbarashada ardaygu u qalmo tixgelinta ah in dib u qaato koorsada. Sidoo kale, dugsiyada sare ee RMP waxay waxyaabaha laga filaayo ardayga u sheegi doona ardayga iyo waalidka(iinta)/ masuulka(iinta) ee ku saabsan qorshaha loogu talagalay in wax laga qabto si ardayga uu uga gudbo heerka fasalka ama waxbarashada hadda.

**Iskiribtiga Wareejinta Iyo Dhibcaha Bundooyinka Dibadda**

(Waxa loola jeedaa dhibcaha lagu kasbaday meel ka baxsan manhajka caadiga ah ee Denver Public Schools). Ardayda hesha buundooyinka looga baahan yahay inay ku qalin jabiyaan wax ka yar siddeed simistar isla markaana raba inay xillig hore qalin-jabiyaan waa inay la hadlaan maamulaha dugsigooda.

**Wareejinta Dhibcooyinka**
Ardayda u soo wareegta dugsi sare oo RMP ah iyagoo ka soo wareegay meel ka baxsan degmada waxa iskiribtigooda qiimeyn ku samayn doona xafiiska diiwangelinta. In kasta oo RMP ay aqbali doonto dhammaan dhibcaha ka imanaya degmo kale, qaybta gaarka ah ee dhibcahan lagu dabaqayo waxay ku xiran tahay go'aanka diiwaan-hayaha. Dhibcaha sharafta (buundooyin la cabirey) ayaa la bixin doonaa oo kaliya haddii DPS ay liiskeeda koorsooyinka ku bixiso fasal la mid ah.

Dhibcaha la soo wareejinayo ee ka imaanaya dugsi ajnabi ah waxaa qiimeyn doona Xafiiska Diiwaangelinta RMP waxaana ka shaqeyn doona waaxda iskiribtiyada ee DPS si waafaqsan siyaasadooda iyo habraacyadooda.

**Codsashada Iskiribtiyada**
Dhammaan codsiyada iskiribtiyada ardayga ee la xiriira kuleejka ama deeqaha waxbarasho waxaa lagu samayn doonaa Overgrad, kaas oo ah software-ka loo isticmaalo in lagula socdo horumarka laga sameeyey kuleejka ama xirfadaha shaqo. Haddii waraaqaha iskiribtiyada ah loogu baahan yahay barnaamijyada xagaaga, wakaaladaha dibadda ama shaqooyinka, ardaydu waa inay 'oomka Iskiribtika Rasmiga ah ka codsadaan kooxdooda maamulka.

**Ardayga Ugu Buundada Sareeya, Ardayga Labaad Ee Ugu Buundada Sareeya iyo Maamuusyada**
Ardayda hela 10-ka GPA-yo ee ugu sarreeya waxay heli doonaan sharafyo tacliimeed waxaana la aqoonsan doonaa qali-jebinta. Ardeyda hesha labada GPA-yo ee ugu sarreeya waxaa loo magacaabi doonaa ardayga hadal-jeedinta ka samayn doona qalan-jebinta iyo ardayga hadal-furka ka samayn doona qalan-jebinta. Iyadoo la raacayo siyaasadaha iyo xeerarka DPS, ardaydu waa in lagu diwaan galiyaa dugsigooda ay dhiganayaan ugu yaraan saddex sanadood oo ayna fasalka qalin-jabinta ka helaan celceliska buundada ugu sarreeysa si ay ugu qalmaan oo ay u noqdaan ardayga hadal-jeedinta ka samayn doona qalan-jebinta. Celceliska dhibcaha waxaa lagu go'aamiyay iyadoo la raacaya habka xisaabinta dhibcaha ee DPS.

# Cutubka 8-aad: Bogagga Saxiixa Qoysaska

## Oggolaanshaha Isticmaalka Mas'uuliyada Leh ee Tignoolajiyada Si Masuuliyad Leh U Isticmaalka

### Isticmaalka Ku habboon

Dhammaan sharciyada Rocky Mountain Prep (RMP) iyo siyaasadaha anshaxa waxay khuseeyaan oo ku aadan yihiin isticmaalka aaladaha dugsigu bixiyo iyo interneetka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, cagajuglaynta, takoorka iyo dhibaataynta iyo siyaasadaha anshaxa. Ardayda ku xad-gudbida ama jabiyo xeerarka ama shuruucda dugsiga iyagoo isticmaalaya aaladaha dugsigu bixiyo ama interneetka RMP waxa ay wajihi karaan tallaabo ku aadan anshaxa. Isticmaalka nooc kasta oo tignoolajiyada ay bixiso RMP waxay ku xidhan tahay ardayda iyo waalidiinta/masuuliyiinta saxiixaya heshiiskan.

Ardayda iyo waalidiinta/masuuliyiinta waxay fahamsanyihiin in dhammaan xogta lagu wadaago, oo ay ku jirto iimaylka, aaladda ay bixiso RMP ama isticmaalka adeega interneetka ee RMP, laga yaabo inay la socdaan ama/ama ay galaan maamulka dugsiga.

Iyadoo lala kaashanayo waalidiinta/masuuliyiinta, RMP waxay ardayda baraysaa isticmaalka habboon ee tignoolajiyada habboon iyo interneetka. RMP waxay ku tiirsan tahay waalidiinta/masuuliyiinta inay sidoo kale kala hadlaan ilmahooda wax ku saabsan tignoolajiyada iyo isticmaalka habboon ee internetka. Haddii aad rabto in lagaa caawiyo sidaad ilmahaaga ugala hadli lahayd isticmaalka habboon ee aaladaha intarneetka, fadlan weydii maamulaha dugsigaaga wixii taageerooyin ah.

### U Hogaansanaanta CIPA

Rocky Mountain Prep waxa ay u hogaansantaa Xeerka Ilaalinta Interneetka ee Caruurta (CIPA) ee uu maamulo fedraalka iyada oo la kormeerayo, la filtar gareynayo, ama la xannibayo macluumaadka intarneetka ee loo arko mid waxyeelo leh ama aan ku habboonayn carruurta yaryar. Siyaasaddan filtar gareynta waxa u baahan oo qeexaya sharciga. Nuqul ka mid ah Siyaasadeena Filtar gareynta Macluumaadka oo faahfaahsan ayaa laga heli karaa mareegahayaga oo ku jira qaybta Xisaabtanka.

Nidaamka filtar garaynta RMP waxay sidoo kale la socotaa dhaqdhaqaaqa badqabka iyo hawlaha wax is-yeelaynta qaarkood (iyadoo isticmaalaysa ereyada muhiimka ah ee la yaqaan ama raadinta) oo digniinaha siisnaysa maamulayaasha jaamacadda ee loo xilsaaray. La socoshada iyo digniinta waxa la sameeyaa oo keliya saacadaha dugsiga. Iyadoo ku salaysan sababta digniinta, waxaa digniinta loo gudbin karaa sharci fulinta deegaanka ama maamulada kale ee ku haboon. Marka ay ilmahooda u oggolaadaan inay isticmaalaan teknoolojiyadda RMP iyo aaladaha dugsiga uu bixiyo, waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay ku isku waafaqeen in nidaamkan la socodka iyo feejignaanta uusan keenayn wax mas'uuliyad ah ama xil uusan ka saarnayn dhinaca RMP ee ku aadan waxyaabaha iyo howlaha uu ardayga ka suubiyo gudaha interneetka. RMP waxa laga yaabaa inay bedesho nidaamkeeda kormeerka iyo digniin bixinta wakhti kasta, si waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka.

### Waxyeellada/Masuuliyadda

Ardayda isticmaala aaladaha/intarneetka iyo qoysaskooda ayaa mas'uul ka ah waxyeellada maaliyadeed ee aaladaha burburay, lumay ama la xado, oo ku jiro kharashka beddelaada (ilaa $200 halkii Chromebook) iyadoo go'aanka iska leeyahay dugsiga. Haddii aaladda uu ardaygu ka soo qaatay dugisga uu waxyeelloobo, lumo ama la xado, waa inaad isla markiiba ogeysiisaa maamulaha dugsigaaga.

### Xadgudubyada

Rocky Mountain Prep waxa ay xaq u leedahay in ay diido, ka noqoto ama meesha ka saarto mudnaanta gaarka ee isticmaalaha iyo/ama in ay qaado tallaabo kale oo anshaxeed, oo ay ka mid yihiin dugsi ka eryida ama dugsi ka saarida, marka lagu xadgudbo siyaasaddan. Dugsigu wuxuu ku wargelin doonaa hay'adaha sharci fulinta ee ku habboon wixii hawlo sharci darro ah ee lagu sameeyo adeegga internetka ee RMP. Dugsigu waxaa uu sidoo kale si buuxda ula shaqayn doonaa

saraakiisha degaanka, gobolka, iyo/ama federaalka marka la samaynayo wixii baaritaan ah oo la xiriira hawlaha sharci darrada ah oo lagu sameeyo adeegga.

Markaan saxeexo halkaan hoose, waxaan qirayaa inaan akhriyay, fahmay oo aan aqbalay shuruudaha kor lagu sheegay. Waxaan fahamsanahay in ilmahayga aan loo oggolaan doonin isticmaalka tignoolajiyada Rocky Mountain Prep ama adeegga interneetka ilaa aniga iyo ilmahayga aan ka saxiixno heshiiskan.

**Saxiixa Waalidka/Masuulka: _________________________** Taariikhda_______________________

**Saxiixa Ardayga_____________________________________** Taariikhda_______________________

# Foomka Oggolaanshaha Sawirka/Warbaahinta

Rocky Mountain Prep waxay sawirada iyo fiidyowyada ardayda u isticmaashaa ujeeddooyinka xayaysiinta iyo horumarinta RMP, iyo sidoo kale wadaagista macluumaadka shabakadaha iyo ururada dibadda. Foomkan waxa uu u oggolaanayaa waalidka/masuulka in ay oggolaansho siiyaan ama u diidaan RMP inay sawirka ardaygooda u isticmaasho bandhigid ama daabacaad. Foomkan waxaa uu sidoo kale ogolaanayaa waalidka/masuulka inay doortaan in ilmahooda lagu aqoonsan karo magac ahaan iyo in kale marka la gelinayo websaydkeena ama meelaha kale ee baraha bulshada ah. Magacyada ardayda ayaa la sii dayn karaa marka laga reebo haddii waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah uu dugsiga ku ogeysiiyo in "macluumaad hagaha ah," sida uu qeexayo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoysaska iyo Qarsoodinimada Xogta ("FERPA"), aan la wadaagin karin. Ma jirto macluumaad shakhsi ah oo lagu aqoonsan karo, sida ay ku qeexday FERPA, taas la wadaagi doono.

**Waalidiintu waxay haystaan laba ikhtiyaar oo ay ku oggolaadaan ama ku diidaan oggolaanshaha:**

- Waalidiintu waxay diidi karaan ogolaanshaha bandhigga ama daabacaadda sawirka ilmahooda. Waa in aad doorataa ikhtiyaarkan haddii **aadan rabin** in sawirka ilmahaaga lagu isticmaalo bogga RMP ama baraha kale ee warbaahinta bulshada ee dugsiga, ama loo siidaayo ururada dibadda ama warbaahinta kale.
- Waalidiintu waxay ogolaan karaan in sawirka ilmahooda la daabaco ama lagu soo bandhigo daabacaad, muuqaal, iyo/ama warbaahinta dhijitaalka ah. Doorashada ikhtiyaarkan waxay la macno tahay in sawirka iyo magaca ilmahaaga **laga yaabo** inay ka soo muuqdaan daabacadaha RMP, iyo websaydka RMP, iyo **in laga yaabo** in loo siidaayo hay'adaha dibadda ama warbaahinta kale.

**Fadlan soo buuxi foomka hoose oo ardaygaaga u soo dhiib si uu u keeno dugsigooda.** Foomkan ogolaanshaha ah waxa uu ansax ahaanayaa inta ardaygaaga uu ku jiro dugsiga Rocky Mountain Prep ama ilaa foom cusub laga buuxiyo oo uu saxeexo waalidka/masuulka ama ardayga u qalma/qaangaaray.

**Siideynta SAWIRKA/MUUQAALKA:**

- Waxaan diiday oggolaanshaha ah in sawirka ilmahayga loo isticmaalo bandhig, daabacaad, ama in loo sii daayo hay'adaha dibadda.
- Waxaan oggolahay in sawirka ardaygayga lagu isticmaalo daabacaadda, fiidiyowyada, iyo/ama warbaahinta dhijitaalka ah. Waxaan fahamsanahay in sawirka ardaygayga ay isticmaali karaan ama ay sii dayn karaan RMP iyada oo aan ogeysiis dheeraad ah la i siin iyo in magaca ardaygayga lagu dhinac qori karo sawirkooda.

Magaca Ardayga: ____________________________________

Fasalka iyo Dugsiga Ardayga: ___________________________

Magaca Waalidkat/Masuulka: __________________________

Saxeexa Waalidka / Ilaaliyaha ilmaha: ____________________

Taariikhda:__________________________________________

## Foomka Doorshada Isgaadhsiinta ee U-doodista

Dugsiga Rocky Mountain Prep, waxaan aaminsanahay inay aad muhiim u tahay in xubin kasta oo bulshadeena ka mid ah ay hesho fursad ay ku wadaagaan fikradooda iyada oo loo marayo ka qaybgalka bulshada. Arrintaan waxaa ka mid ah ka codeynta doorashooyinka deegaanka, gobolka, iyo qaranka. Waxaan jeclaan lahayn inaan kuu soo dirno isgaarsiin ku saabsan codbixinta doorashooyinka soo socda, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan sida la iskaga diiwaangeliyo codeynta iyo macluumaadka ku saabsan goobta iyo goorta la codeynayo.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in dhammaan hawlaha la xidhiidha olole kasta oo ka socda RMP ay yihiin kuwo aan xisbi iyo siyaasad midna aan ku salaysnayn. Taas macneheedu waxa weeye in aanu aqbali doonin oo aanu taageeri doonin musharax ama xisbi gaar ah. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku siino agabyada iyo kheyraadka loo baahan yahay si aad muwaadin ahaan u ogaato oo aad uga qeybqaadato xaquuqdaada.

Markaad geliso macluumaadkaaga oo aad saxiixdo halkaan hoose, waxaad ogolaatay inaad naga hesho macluumaad ku saabsan dadaalladan, waxaadna ogolaatay inaan macluumaadkaaga xiriirka la wadaagno hay'adaha kale ee aan faa'iido doonka ahayn kuwaas oo dadka u soo diraya macluumaadka ku saabsan ka-qayqaadashada codeynta iyadoo lala kaashanayo Rocky Mountain Prep.

**Fadlan buuxi foomka hoose:**

**Magaca:** ____________________________________________

**Iimaylka:** ____________________________________________

**Lambarka Taleefonka:** _________________________________

**Dugsiga ardayga uu dhigta (fadlan door dhammaan kuwa khuseeya ee dhammaan ardaydaada):**

- RMP Berkeley
- RMP Creekside
- RMP Federal
- RMP Fletcher
- RMP Green Valley Ranch
- RMP Noel
- RMP RISE
- RMP Ruby Hill
- RMP SMART
- RMP Southwest
- RMP Sunnyside
- RMP Westwood

**Saxeexa:** ______________________________ **Taariikhda:** ____________________

## Heshiiska Rideshare

Xilliyo gaar ah oo sannad dugsiyeedka oo dhan ah, ardaygaagu waxa laga yaabaa inuu u baahdo inuu isticmaalo gaadiidka Rideshare si uu dugsiga u tago. Dugisga Rocky Mountain Prep ayaa laga yaabaa inay ku bixiso caawinta adeegyada gaadiidka rideshare. Si aad u bixino taageeradaas, fadlan eeg macluumaadkan hoose oo saxiix. Fadlan ogow: Rideshare waa inaan loo isticmaalin sida nidaamka gaadiidka aasaasiga ah ee arday kasta.

Waa ujeeddada ugu weyn ee heshiiskan in laga dhaafo, laga tanaasulo, laga yareeyo, lagana fududeeyo Culayska (oo ay ku jiraan Rocky Mountain Prep, macallimiinta, maamulayaasha, kormeerayaasha, iyo dhammaan shaqaalaha Rocky Mountain Prep) mas'uuliyadda dhaawaca shakhsi ahaaneed, burburka hantida, iyo dhimashada dayacaada ay sababtay. , oo ay ku jiraan haddii ay sababto dayacaad ama haddii kale darawalka rideshare ama shirkad.

Waalidka/masuulka/mas'uulka sharciga ah ee hoos ku saxiixan ayaa doonaya in ay u oggolaadaan ardaydooda/carruurtooda in ay ka qaybqaataan adeegyada gaadiidka ay ee rideshare (tusaale, UBER, Lyft, HopSkipDrive, iwm.) si arday kasta looga soo qaado loona geeyo kambaska kasta oo ka tirsan dugsiga Rocky Mountain Prep. Waalidka/masuulka/mas'uulka hoos ku saxiixan ayaa ardayda soo socota u oggolaanaya barnaamijka gaadiidka loo yaqaan rideshare:

| Magaca Ardayga | Taariikhda Dhalashada | Kambaska RMP |
|---|---|---|
| 1. | | |
| 2. | | |
| 3. | | |
| 4. | | |

Iyadoo la tixgelinayo oo la eegayo, waalidka(iinta)/masuulka sharciga ah iyo ardaydooda/carruurtooda loo oggolaaday inay ka qaybqaataan nidaamka rideshare, waalidka(iinta)/mas'uulka sharciga ah ee hoos ku saxiixan, si shakhsi-ahaaneed iyo iyagoo ka wakiil ah ilmahooda/carruurtooda waxaa ay halkan ka dhaafayaan, iska daynayaan, oo ay ka tanaasulaan dhammaan sheegashooyinka mas'uuliyadda iyo sababaha waxyabaaha dhaco, oo ay ku jiraan dhaawac shakhsi ah, burbur hanti, ama dhimashada dayaca ay keentay (ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn kharashyada khidmadaha qareenka) oo ka dhasha ka-qaybgalka nidaamka gaadiidka ee rideshare wixii sheegasho, xuquuqo ah, iyo talaabo kasta ee waalidka(iinta) ama masuulka sharciga ah ee hoos ku saxeexan iyaga oo ka wakiil ah dadka dhaxlaayo iyaga, dadka fulinka karo arrimahood, maamulayaashooda, iyo dadka xaqa u leh in ay dhaxlaan iyaga.

Waalidka/masuulka sharciga ah ee hoos ku saxiixan ayaa ku heshiiyey oo fahmay in Rocky Mountain Prep iyo maamulayaasheeda, kormeerayaasheedu, macalimiinta, iyo shaqaaluhu aanay hubin shatiga darawalnimada ee darawalka, xaqiijin caymiska, samayn baadhitaan taarikheed, ama aysab baarin darawalada iyo shirkadaha rideshare.

Waalidka(diinta)/masuulka(yiinta) sharciga ah ee hoos ku saxiixan waxay ogolaadeen oo fahmeen in Rocky Mountain Prep, iyo maamulayaasheeda, kormeerayaasheeda, macalimiinta, iyo shaqaaluhu ay dejin karaan siyaasadaha ku aadan soo qaadista ardayda ee shirkadaha rideshare. Waalidka(diinta)/masuulka(yiinta) sharciga ah ee hoos ku saxiixan waxay ogolaadeen inay keligood mas'uul ka yihiin u hoggaansanaanta shuruucda iyo qawaaniinta shirkadda rideshare ee ku aadan gaadiidka uu raacayo ardaygooda.

Waalidka(diinta)/masuulka(yiinta) sharciga ah ee hoos ku saxiixan waxay ogolaadeen haddii sheegasho kasta oo dhaawac shakhsi ah, burbur hanti ah, ama dhimasho uu dayac sababay ay ka bilaabato, isaga/iyada waa in ay difaacaan, magdhaw bixiyaan, oo ay joojiyaan mid kasta iyo dhammaan sheegashooyinka ama sababaha tallaabo kasta ee uu qaado cid kasta ama meel kasta oo lagu soo bandhigo dhaawaca shakhsi ahaaneed ee ardayga, burburka hantida, ama dhimashada dayaca ah.

Haddii shakhsiga hoos ku saxiixan uu rabo inuu wax ka beddelo foomkan, sida inuu tirtiro ama ka saaro arday, ogaysiis qoraal ah waa inuu keenaa shakhsiga hoos ku saxiixan ama waalid kale/masuulka oo ll diraa Rocky Mountain Prep waana in foom cusub la buuxiyaa. Foomkan waxa uu shaqaynayaa muddada sannad dugsiyeedka la saxeexay oo keliya waana in foom cusub la buuxiyaa sannad dugsiyeed kasta.

Waalidka(diinta)/masuulka(yiinta) sharciga ah ee hoos ku saxiixan waxay qiraayaan in la siiyay oo ay akhriyeen cutubyada sare ka muuqda oo aysan ku tiirsanayn wax matalaad ah oo go'aankooda aanay saamayn ku lahayn shakhsi kale. Markaad saxiixdo heshiiskan, waxaad xaqiijinaysa in aad xaq u leedahay in aad ardayga(da) u saxiido.

______________________________________________________

(Saxiixa Waalidka iyo/ama Masuulka) Taariikhda

______________________________________________________

(Saxiixa Waalidka iyo/ama Masuulka) Taariikhda

Rocky Mountain Prep waxa ay aaminsantahay in soo-xaadirista joogtada ah ee dugsiga ay furo u tahay guusha, qoysaskana waxaa laga filayaa inay xaqiijiyaan in carruurtooda ay dugsiga imaadaan maalin kasta.

**Ardaydu waa inaanay ka maqnaan dugsiga wax ka badan 4 maalmood oo maalmaha dugsiga ah (iyadoo cudurdaar jiro ama cudurdaar la'aanba) inta lagu jiro sannad dugsiyeedka oo dhan. Fadlan xaqiijin in ilmahaagu soo xaadiro maalin kasta marka laga reebo haddii ay jirto xaalad jirro oo halis ah ama xaalado aad u daran. Waa mas'uuliyadda qoyska in la ogeysiiyo dugsiga sababta ardayga uu dugsiga uga maqan yahay iyadoo la raacayo habraaca uu dejiyey dugsiga ee ku yaala Buug-gacmeedka Qoyska.**

Waxaan si dhab ah ula tacaalnaa dugsi ka maqnaanshaha, soo daahitaanka, iyo in ardayga dugsiga laga kaxeeyo wakhti hore, maadaama ay wax u dhimi karaan guusha tacliinta. Cawaaqibta ugu weyn ee tooska ah ee ka dhalan karta ka maqnaanshaha dugsiga waxay ku aadan tahay tacliinta ardaygaaga, maadaama dugsiga Rocky Mountain Prep uu leeyahay jawi waxbarasho oo adag oo degdeg ah.

- Haddii ardaygu leeyahay in ka badan 4 maqnaansho oo cudurdaar la'aan ah, waxay halis ugu jiri doonaan inay ka baaqdaan hawlaha RMP, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, safarrada dibadda, bandhigyada qoob ka ciyaarka, maalinta garoonka, iyo dabaaldegyada kale.
- Waxaan fahamsanahay in ay qasab tahay in ardaydu ay dugsiga joogaan waktigii loogu talagalay maadaama daahitaanka badan ay caqabad ku tahay waxbarashada ardayga.
- Waxaan fahamsanahay in cadaynta dhakhtarka loo baahan karo haddi ay dhacdo maqnaansho soconaysa 2 maalin ama wax badan.
- Waxaan fasaxyada damaashaadka qoyska qorsheyn doonaa inta lagu jiro muddada fasaxyada dugsiga. Waxaan fahamsanahay in RMP aysan oggolaan doonin sababta maqnaansha dheer ee inta lagu jiro maalmaha dugsiga ee la qorsheeyay. (Jadwal dugsiga ayaa ku lifaaqan dukumeentigan si aad ula socoto oo u qorshayso howlahaada.)
- Waxaan fahamsanahay in dhammaan ballamaha ay tahay in loo qorsheeyo maalmaha aan dugsiga jirin mar kasta oo ay suurtogal tahay, laakiin haddii ay noqoto inta lagu jiro maalinta dugsiga ee caadiga ah, waxaa la filayaa in ardaygaygu yimaado ka hor ama ka dib xilliga ballanta. Waxaan fahamsanahay in dugsigu aanu aqbalayn in uu ilmahayga uu dugsiga ka maqnaado maalinta oo dhan xilliga booqashooyinka caadiga ah.
- Waxaan fahamsanahay in maqnaanshaha xad-dhaafka ah ay keeni karto in ardaygayga dib loogu celiyo fasalka hadda uu dhigto ama wax layaaba in loo baahdo in uu ka qaybqaato xiisaha xilliga xagaaga si uu u buuxiyo wakhtiga uu seegay fasalka. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in RMP looga baahan yahay inay tixgeliso sharciga dugsi u-goynta marka la eego xaaladaha ardaygu leeyahay oo ah wax badan 10 maqnaansho oo sabab la'aan ah muddo hal sano oo sannad dugsiyeedka ah. Dugsiga waxaa uu soo gudbin karaa dacwad ku saabsan dugsi u-goynta ee wax ka badan 10 maqnaansho oo aan cudurdaar lahayn inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Tani waxay la macno tahay in ardayda iyo qoysasku looga baaahan yahay in ay tagaan maxkamadda sababo la xiriirta dugsi u-goynta ardayga. Waxaan fahamsanahay in maqnaanshaha badan oo xadka dhaafa ay keeni karto in ardaygayga dib loogu celiyo fasalka hadda uu dhigto ama wax layaaba in loo baahdo in uu ka qaybqaato xiisaha xilliga xagaaga si uu u buuxiyo wakhtiga uu seegay fasalka.
- Waxaan fahamsanahay in xiriirka ka dhaxeeya dugsiga iyo waalidka uu muhiim u yahay guusha ardaygayga oo aan waxaan ogolahay inaan xiriir wanaagsan la sameeyo dugsiga.

Magaca Ardayga: ____________________________________

Kambaska Ardayga:____________________________________

Saxiixa Waalidka:_____________________________________

Taariikhda:__________________________________________

**Loogu Talagalay Waalidiinta & Mas'uuliyiinta:**

- Waxaan ballan qaadayaa inaan taageero barnaamijka waxbarashada adag ee Rocky Mountain Prep iyo xeerarka anshaxa.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan xaqiijin doono in ilmahaygu dugsiga ku jiro waqtigii loogu talagalay, isagoo wata labiska dugsiga, maalin kasta, marka laga reebo dugsi ka maqnaansho cudurdaar leh, markaas oo aan soo wici doono dugsiga sida waafaqsan siyaasadda dugsi, maalin kasta oo uu ilmahaygu maqnaan doono ama soo daahi doono.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan si joogto ah u kormeeri doono shaqada dugsiga, shaqada guriga, iyo buundooyinka ilmahayga. Waxaan mar walba ku dhiirigelin doonaa inay si adag u shaqeeyaan oo ay soo saaraan shaqada ugu macquulsan ee ay awoodaan.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan ilmahayga siiyo jawi/deegaan uu ku qabsan karo shaqada dugsiga, oo leh miis iyo kursi nadiif ah iyo agabyada lagama maarmaanka ah.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan soo wici doono Rocky Mountain Prep haddii aan qabo su'aalo ama walaacyo ku saabsan horumarka waxbarasho ee ilmahayga ama waxbarashada shucuurta-bulsheed iyo inaan ka soo qaybgeli doono munaasabadaha loogu talagalay waalidiinta/masuuliinta ardayda inta lagu jiro sannadka oo dhan.

**Loogu talagalay Ardayda:**

- Waxaan ballan qaadayaa inaan dugsiga ku imaado wakhtigii loogu talagalay, anigoo wata labbiska dugsiga (marka laga reebo haddii wax kale la i faro), maalin kasta.
- Waxaan fahansanahay qiyamka PEAK ee Rocky Mountain Prep waxaana ballan qaadayaa inaan mar walba sameeyo wixii karaankeyga ah si aan u adeeco.
- Waxa aan ballan qaadayaa in aan si buuxda ixtiraam, feejignaan iyo dadaalba ugu bixiyo hawl kasta.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan sameeyo shaqadayda dugsiyeed habeen kasta, oo aan si habsami leh ugu soo celiyo dugsiga, aan soo gudbiyo wakhtiga ku habboon.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan si joogto ah oo daacadnimo leh ula hadlo waalidiintayda iyo dadka masuulka ka ah horumarkayga dugsiga, darajooyinkayga, shaqadayda, iyo habdhaqankayga.

**Intaa waxaa dheer, macalimiinta iyo shaqaalaha waxay ballanqaadyada soo socda u sameeyaan ardayda iyo qoysaska:**

- Waxaan ballan qaadayaa inaan si heer sare ah u gudan doono dhammaan waajibaadkeyga shaqo iyo inaan joogo meesha la iga rabo inaan joogo, goorta la iga rabo inaan halkaas joogo.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan si buuxda ugu diyaar garoobo fasal kasta oo aan dhigayo.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan darajayn/buundo bixin sameeyo oo aan ardayda siiyo jawaab celin ku saabsan imtixaanada ku saleysan heerarka iyo caadooyinka tacliimeed waqtiga ku habboon sida lagu qeexay siyaasadda imtixaanaadka RMP.
- Waxa aan ballan qaaday in aan si joogto ah oo caddaalad ah u fuliyo dhammaan xeerarka iyo siyaasadaha dugsiga.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan la xiriiro waalidiinta/mas'uuliyiinta ardaydayda ugu yaraan hal mar afartii toddobaadba, iyo inaan waalidiinta/mas'uuliinta ardaydeyda ula xiriiro si joogto ah oo macquul ah si aan ula wadaago jawaab celinada togan iyo kuwa taban labadaba.

- Waxaan ballan qaadayaa inaan ilaalinayo heerarka ugu sarreeya ee waxqabadka tacliinta iyo habdhaqanka ku habboon.
- Waxaan ballan qaadayaa inaan ardaydayda u qiimeeyi shakhsi ahaan iyo inaanan waligey hilmaamin kartidooda dhabta ah.

Saxiixa Waalidka/Masuulka: __________________ Taariikhda ______

Saxiixa Ardayga _____________________________ Taariikhda ______

## Bayaanka Fahamka ee Buug-gacmeedka Ardayda & Qoysaska

Waxaan qirayaa in aan helay nuqulka Buug-gacmeedka Rocky Mountain Prep ee loogu talagalay Ardayda & Qoysaska ee sanad dugsiyeedka 2024-2025. Markaan saxiixno halkaan hoose, aniga iyo ilmahayga waxaan fahamsanahay inay mas'uuliyadeenu tahay inaan barano waxa ku qoran buug-gacmeedka, aniga iyo ardaygayga waxaanan aqbalnay inaan u hoggaansanno siyaasadaha iyo habraacyada ku jira buug-gacmeedka. Intaa waxaa dheer, waxaan fahamsanahay oo aan aqbalay in markaan ilmahayga ka diiwaangeliyo Rocky Mountain Prep in dhammaan macluumaadka diiwaangelinta iyo oggolaanshaha waalidka/masuulka iyo sii daynta lagu buuxiyo diiwaangelinta onlaynka ah ee DPS ay khuseeyaan Rocky Mountain Prep. Waxaan fahamsanahay haddii aan su'aalo ka qabno buug-gacmeedka ama siyaasadda Rocky Mountain Prep, waxaan la hadli doonaa maamulaha dugsiga.

________________________________________________________

Magaca Ardayga Magaca Waalidka/Masuulka:

________________________________________________________

Saxiixa Ardayga Saxiixa Waalidka/Masuulka:

________________________________________________________

Taariikhda Taariikhda